Qodobka 13aad: Awoodda maamulka dhulka xeebaha

1. Dhammaan bixinta rukhsadaha iyo shatiyada kale ee ku saabsan kalluumeysiga iyo hawla kale ee la xiriira ee saameeya kheyraadka badda ee nool kuna dhex jiraan biyaha dalka waxay hoos yimaadaan Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

2. Hawl kasta oo la xiriirta baarista iyo ka faa'ideysiga macdanta, saliidda ama ilaha soo saarista quwadda, wuxuu hoos imaanayaa Wasaaradda ku shaqada leh arrimahaas (sida Wasaaradda Macdanta & Biyaha) hase yeeshi waa inay la kaashataa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

3. Hawl kasta oo si toos ah ula xiriirta badmaridda biyaha dalka ama hawl kasta oo saameyn kara socodsinta dekedaha waxaa awoodiisa iska leh Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

4. Wasaaradda ku shaqada leh ee lagu sheegay faqradda 1aad ilaa 3aad ee kor ku xusan, waxay awood u leedahay inay soo saarto Xeer-nidaamiyaha loo baahdo oo ku saabsan arrimaha ay awoodooda u leedahay Wasaaradda.

Qodobka 14aad: Falalka rukhsada ee dhulka xeebaha

1. Iisticmaalka la ogol yahay ee ku saabsan Dhulka Xeebaha waxaa lagu soo saaraya qoraal ay soo saarto Waaxda qaabilsan, qoraalkaas waa in lagu dhigaa shuruuddaha la xiriira isticmaalka loogu tala galay iyo aqoonsiga dhinacyada, tilmaanta hantida, isticmaalka loogu tala galay, shuruudaha ama kheyraadka isticmaalkaas iyo muddada rukhsada.
2. Waaxda Badda ayadoo tixgelineysa baahida Jamhuuriyadda ee ku saabsan isticmaalka dadweynaha, waxay bixin kartaa rukhsada oggolaanshaha ku dhaqanka iyo isticmaalka dhulka xeebaha ama inta ku saabsan Badda dalka iyo biyaha gudaha muddo kooban.
3. Haddii rukhsadda ay saameyso dhulka dekeda, waxaa siinteeda awood u leh hay'adda qaabilsan maamulka dekeddaas, markaas oo kale, rukhsada waxaa lagu maamulayaa sidii ay ku heshiiyen Hay'adda Dekedda iyo Qofka la siiyey rukhsadda.
4. Rukhsaddaha, muddadooda ay ka badan tahay labo sano, kuwo aysan ka badneyn labo sano laakiinse ay leeyihiin guryo dumistoodu aysan sahlaneyn, iyo kuwo ujeeddadoodu ay ku saleysan yihiin waajibaad gaar ahaaneed oo ay leedahay Hay'adda Maamulka waxaa lagu bixinayaa Xeer ay soo saarto Wasaaradda Kalluumeyisiga iyo Gaadiidka Badda.
5. Rukhsaddaha kale oo ay ku jiraan kuwo ku saabsan soo saarista, qodista iyo gurashada dhagxaanta macdanta iyo waxyaabaha kale, waxaa lagu bixinayaa rukhsad ay soo saarto Madaxda Hay'adda qaabilsan.
6. Haddii ay jiraan araaji badan ee rukhsadaha eeku saabsan isla hantidii, waxaa mudnaanta la siinayaa arjiilaha dhiibaya dammaanadda ugu faa'idada badan ee isticmaalka rukhsadda kuna talo jira inuu u isticmaalo ujeedo la xiriirta arrimaha badda waafaqsanna danta guud ayadoo uu maamulka sidaas ugu gartay. Hadii aysan jirin asbaabta kor ku xusan mudnaanta waxaa la siinayaa araaji laha ugu horeeya sida ku muuqata taariikhda iyo waqtiga loo keenay maamulka.

Qodobka 15aad: Rukhsadaha ijaarka

1. Qofka la siiyey rukhsadda ku dhaqanka iyo isticmaalka hantida dhulka xeebaha, waa inuu maamulka siyaa ijaar qaddarkiisa ay sheegayo warqadda rukhsadda.
2. Ilaa iyo muddadii rukhsadda, ijaarka waxaa lagu yareyn karaa haddii rukhsadda muddadiisa la gooyey ama ku dhaqankiisa ay yaraatay ayadoo ay jireen duruufo dabiici ah oo wax ka bedellay hantida rukhsadda. Waajibaadka bixinta kirada wuxuu la dhammaanayaa, dhammaadka muddada rukhsadda, ama hadii qofka la siiyey rukhsadda uu ka tanaasulo rukhsadda la siiyey, ama la isticmaali kari waayo rukhsadda ayadoo ay jiraan sababo dabiici ah marka laga reebo sanadka lagu jiro haddii la tirtirayo rukhsadda.
3. Rukhsadaha loogu tala galay deeq ahan ama ujeedooyin kale oo la xiriira danta guud, ijaarka waxaa lagu goynayaa ayadoo la aqoonsan yahay dabeecadaha hantida xeebaha oo la bixiyay.

Qodobka 16aad: Ka noqoshada rukhsadda

1. Dhammaan ama qeyb ka mid rukhsadda waa laga noqon kara ayadoo ay jiraan sababo gaar ahaneed, ee la xiriira isticmaalka guud ee badda ama dhulka xeebaha, ama sababo kale awgood ee ku xiran dan guud ayadoo ay sidaas go'aan ku gaartay Hay'adda

qaabilsan.

2. Ka noqoshada waxaa go'aan ka gaareysa hay'adda bixisay rukhsadda.
3. Haddii aan si kale loo sheegin, markii la tirtirayo rukhsado ku saabsan hanti maguurga ah Hay'adda qaabilsan ee bixisay rukhsadda waxaa waajib ku ah inay bixiso magdhaw u dhiganta qimaha hantida ku dhisan iyadoo laga qiyas qaadanayo muddada hartay markii la tixgeliyo muddada asalka ee lagu siiyey rukhsadda.
4. Hase yeeshi markasta, magdhawgu kama badnaan karo qimaha sugar ee suuqa hantida markii la tirtiray rukhsadda.
5. Haddii rukhsadda qayb -ahaan loo tirtiray, qofka la siiyey rukhsadda wuxuu ka tagi kara xuquuqdiisa ee ku saabsan rukhsadda oo dhan isagoo, hay'adda bixisay siinaya ogeysiis, ujeeddadiisa ka bixidda, muddo 60 maalmood laga bilaabo taariikhda uu helay ogeysiiska tirtirida qayb-ahaan.

Qodobka 17aad: Tirtiridda rukhsadda

1. Hay'adda bixisay rukhsadda waxey ku dhawaaqeysaa in la tirtiray rukhsaddaayadoo ay jireen duruufaha hoos ku qoran midkood:-
 - b) Haddii aan la fulin hawlaha ku xusan warqadda rukhsadda ama la bilaabi waayo maamulka wakhtiga rukhsadda la siiyey gudahiisa;
 - t) Haddii la isticmaali waayey rukhsadda si joogta ah muddada lagu gooyey warqadda rukhsadda ama habka isticmaalka uu ka duwan yahay shuruudaha ku xusan warqadda rukhsadda ama lagu isticmaalay hab ka soo horjeeda danta guud;
 - j) Haddii ujeeddada guud ee loo siiyey rukhsadda la beddelay ayadoo aan oggolaansho loo haysan;
 - x) Haddii aan la bixin ijaarka sida waafaqsan haftootyinka lagu tilmaamay warqadda rukhsadda.
- Kh) Haddii uu si sharci darro ah qof kale loogu beddelo isticmaalka rukhsadda.
- d) Haddii la fulin waayo waajibaadka la xiriira rukhsadda ama kuwo ku tilmaaman sharciga ama xeer-nidaamiyaha.Xaaladaha (b) iyo (t), Maamulka wuxuu siin karaa muddo dheerad ah qofka rukhsadda la siiyey, haddii uu soo sheego sababo macquul ah fulin la'aanta isticmaalka joogtada ah.
3. Ka hor inta aan lagu dhawaaqin tirtiridda, maamulka wuxuu goynayaa taariikhda gudaheeda laga rabo qofka inuu keensado difaaciisa isagoo muujinaya sababo uu ku doodayo inaan laga tirtiri Karin rukhsadda.
4. Qofka la siiyey rukhsadda haddii laga tirtiray sababaha kor lagu sheegay awgood, xaq uma laha in loogu magdhabo shaqada laga qabtay ama kharashka lagu sameeyay ama qimaha guryaha lagu dhisay dhulka xeebaha.

Qodobka 18aad: Rahanka dhismaha dhulka xeebaha iyo waxka bedelidda rukhsadda

1. Qofka la siiyey rukhsadda ku saabsan hantida dhulka xeebaha, waxaa ka reeban inuu u dhigto dhismaha uu ka dhisay ama uu ku qoro qof kale isticmaalka rukhsadda isagoo aan oggolaansho rasmi ah ka haysan Hay'adda dhiibtay rukhsadda.
2. Haddii qofka la siiyey rukhsadda uu ku tala jiro inuu u rahmo dhismaha uu ku dhisay dhulka xeebaha ama uu ku beddelo dad kale isticmaalka rukhsadda, waa inuu si rasmi ah u keensadaa arji, loogu oggolaado codsigiisa, hay'adda bixisay rukhsadda.
3. Haddii la iibiyo ama lagu qaado fulin dacwadeed, qofka iibsaday ama qofka lagu wareejiyo dhismahaas dhulka xeebaha ku dhisan qofka leh rukhsadda, ma dhaxli karo rukhsadda ayadoo aysan oggolaan hay'adda bixisay rukhsadda.
4. Haddii uu dhinto qofka la siiyey rukhsadda, dhaxal tooyadiisa waxay dhaxlayaan

rukhsadda hase yeeshaa waa in ay waydiistaan in la oggolaado lix bilood gudaheeda haddii kale waxay la kulmayaan tirtiridda xuquuqdooda ku saabsan rukhsadda waxaana lagu dabbaqaayaa markay maamulka la noqoto inaysan habboonayn in la oggolaado ayadoo ay jiraan sababo la xiriira kartida farsameed iyo xaaladda dhaqaaleed ee dhaxaltooyada.

5. Faqradda (4) ee kor ku xusan waxaa kaloo lagu dabbaqayaa xaaladaha kala diridda shirkadaha loo siiyey rukhsadaha.

Qodobka 19aad: La wareegidda dhismaha

Marka rukhsadda la tirtiro ayadoo la raacay Qodobka 17aad ee kor ku xusan, haddii aan si kale lagu sheegin warqadda rukhsadda, ama dhammaadka rukhsadda, lahaanshaha dhismaha iyo wixii la xiriira dhulka xeebaha waxaa la wareegayaa maamulka ayadoo aan wax magdhaw ama soo celin kharash la siin qofkii markii hore rukhsadda la siiyey, dhaxaltooyadiisa ama wakiiladiisa, Hay'adda bixisay rukhsadda waxay amri kartaa qofka markii hore la siiyey rukhsadda inuu dumiyoo dhismaha ku yaal, dhulka la siiyeyna kusoo celiyo xaaladdiisa hore ayadoo uu kharashkaas bixinayo.

Qodobka 20aad: Nidaamka ku saabsan isticmaalka dhulka xeebaha ee dekedaha

Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye ku saabsan isticmaalka dhulka xeebaha oo ku dhex jira dekedda dhammaantood ama qayb ahaanba. Xeer-nidaamiyahas wuxuu dhigayaa habka socodiinta dekedaha ayadoo la oggol yahay isticmaalka dhulka xeebaha iyo dhulka la xiriira oo ka kooban raridda, dejinta iyo keydinta ku meel gaarka ee badeecadaha ama alaabta muddo ka badan kan caadi ahaan loo baahdo fulinta hawlaha caadiga ee dekedaha. Raridda, dejinta, iyo keydinta badeecadaha khatarta ah iyo alaabta kale, dhulka xeebaha oo dhamman ama qayb-ahaan ka tirsan dekedaha, waxaa lagu dabbaqayaa habab gaar ahaaneed ee loogu soo saaro shuruucda iyo xeer-nidaamiyaha ay soo saarto hay'adda ka tirsan Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda.

Qodobka 21aad: Dhisidda & maamulka warshadaha iyo keydinta alaabta khatarta ah ee ololi karta ama sunta ah

1. Marka laga reebo faqradda 2aad ee Qodobkan, Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda wuxuu keli ahaan awood u leeyahay inuu bixiyo rukhsadaha ayadoo la raacayo sharcigan marka la dhisayo ama la maamulayo warshado ama bakhaaro lagu keydinayo alaabta khatarta ah ee ololaysa ama sunta ah kuna yaala dhulka xeebaha gebi ahaan ama qayb-ahaan, Biyaha Gudaha ama Badda Dalka.
2. Rukhsaddaha loo siinayo xaruumaha iibiyaa shidaalka, saliida, macdanta iyo alaabta la xiriirta iyo keydinta alaabta ololaysa oo aan ka badnayn 105.94 Cu. Ft (20 cu .M), waxaa bixinayaa Agaasimaha Waaxda Badda.
3. Dhisidda iyo maamulka warshadaha iyo xarumaha kor ku xusan waxaa lagu dhaqayaa qodobbo gaar ahaaneed ee xeer-nidaamiyaha uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda.

BUUGA II – MAAMULKA BADMARIDDA IYO MARAAKIIBTA

QAYBTA I - HAY'ADDA MAAMULKA BADMARIDDA.

Qodobka 22aad: Wasaaradda qaabilsan

Awoodda maamuleed oo ay ku jirto soo saarista Xeer-nidaamiyaha ku saabsan badmaridda maraakiibta ganacsiga iyo kuwo kale iyo dekedhaba, waxaa iska leh Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda.

QODOBKA 23aad: Maamulka arrimaha xeebaha

Ayadoo la tixgelinayo maamulka badda, xeebta Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaa loo aqoonsanayaa inay tahay xubin keliya oo Xamar ay tahay magaalada ugu weyn Xafiiskeedana waxaa lagu magacaabayaa Waaxda Badda. Qaybta Badda waxaa ku jira xubnaha Badda ee Kismaayo oo ka bilaabata Raas Chiambone ilaa El Kaskeero (laga reebo El Kaskeero), faraca badda marka laga bilaabo Marka El kaskeero ilaa Dhanaane (laga reebo Dhanaane) Muqdisho laga bilaabo Dhanaane ilaa Eyl, Boosaso, laga bilaabo Eyl ilaa Bandar Siyaad, Las qoray laga bilaabo Raas Suura (laga reebo Bandar Siyaad), Maydh laga bilaabo Raas Suura (laga reebo Raas Suura) Berbera laga bilaabo Lowya Cadde ilaa Raas Khansiir (laga reebo Raas Khansiir). Wakiilada Badda Baraawe, Cadale, Hobyo, Eil, Bender Beila, Xaafuun, Hordiyo Baargaal, Caluula, Qandala, Saylac iyo Chiambone.

QODOBKA 24aad: Awoodda maamulka ee hay'adaha badda

1. Waaxda badda waxay ka hoos shaqeynaysaa Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda.
2. Adeegayaasha Badda waxay ka hoos shaqeynayaan Waaxda Badda, Qaybaha Baddana waxey ka hoos shaqeynayaan Adeegayaasha Badda.
3. Xafiisyada Laamaha Badda waxay ka hoos shaqeynayaan qaybaha badda.

QODOBKA 25aad: Magacaabidda hoggaamiyayaasha dekedaha (harbour masters) iyo hay'adaha dekedaha

1. Agaasimaha Waaxda Badda, Madaxa Adeegayaasha Badda, Madaxda Qaybaha Badda iyo Madaxa Xafiisyada Laamaha Badda, waxay yihiiin hoggaamiyeyaasha Dekedaha oo xafiisyo ku leeyihiin.
2. Ka sokow awoodaha ku xusan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha la xiriira, hoggaamiyeyaasha Dekedaha waxay leeyihiin, awoodda, ayadoo ka dhex shaqeynayaan xadkooda dhammaan hawlahaa maamulka ee ku saabsan gooshitaanka iyo socodka maraakiibta aan si gaar ahaaneed loo dhiibin hay'adaha kale.

Qodobka 26aad: U wareejin awoodda hay'adaha qunsuliyadaha hoggaamiyayaasha dekedaha

1. Hoggaamiyeyaasha dekedaha waxay la wareegi karaan awoodda Qunsuliyadaha Shisheeyaha oo ku saabsan bixinta fiisada (VISA) ee dokumentiga markabka iyo kaalmeynta la siinayo maraakiibta ganacsiga ee shisheeyaha, haddii aysan jirin hay'ad Qunsuliyeed, sidaasna uu soo warsado Kabtanka Markabka.

Qodobka 27aad: Waaxda badda iyo kormeerka badmaridda iyo socodka maraakiibta dalalka shisheeye

1. Waaxda Badda ee Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda waxay xalinaysaa arrimaha badda oo aan awoodooda la siinin hay'adaha kale.
2. Waajibaadka maamuleed ee Waaxda Badda waxaa fulin kara dalalka shisheeye hay'adaha Qunsuliyed ama Wakiilka rasmiga ee loogu magacaabay ujeeddadaas,

xeerna uu ku magacaabay Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda.

QAYBTA II - HAWLAHA MAMULKA BOLIISKA IYO ADEEGYADA DEKEDAHA

Qodobka 28aad: Nidaamka dhaqdhaqaaqa maraakiibta hawlaха dekedaha

1. Hoggaamiyaha Dekedda, wuxuu hagayaа kormeerayaana soo gelidda, bixidda, dhaqdhaqaaajinta, istaagidda maraakiibta dekedda dibadeeda iyo dhammaan dhaqdhaqaaajinta kale ee maraakiibta intay ku jiraan dekedda, waxaa kaloo Hoggaamiyuhu hagayaа kormeerayaana calaamadaha badda iyo faynuusyada, dabka iyo tallaabooyinka looga hortegayo dabka iyo tallaabo kasta oo la xiriira nabadgelyada iyo ilaalinta dekedda dhexdeeda iyo meelaha u dhow.
2. Wakaaladda Dekedha Soomaaliyeed waxay hoggaaminaysaa kormeereysaana dejinta, raridda iyo keydinta badeecooyinka, saaridda iyo dejinta rakaabka iyo wixii hawlo kale ah ee ka soocda dekedda gudaheeda, marka laga reebo kuwa loo xilsaaray Hoggaamiyaha Dekedda (Harbour Master) sida ku qoran Farqadda 1aad ee Qodobkan.

Qodobka 29aad: Ka saarista alaabta iyo markabka ku caariyey badda

1. Haddii badeecooyin ama alaab kale dekedda dhexdeedda ku caariyey, dadka mas'uulka ah ayaa ka shaqeynaya ka saaristooda, Haddii dadka mas'uulka ka ah ay ku gefaan waajibaadkooda ayagoo sida uu qabo Hoggaamiyaha Dekedda, khatar ama dhibaato u geysanayo badmaridda, Hoggaamiyaha Dekedda wuxuu amrayaa ka saarista in la sameeyo, ayagoo uu kharshka dhiibayo dhinaca mas'uulka ah.
2. Haddiiku caarista maraakiibta ay tahay meel ka mid ah badda Jamhuuriyada Dimuqraadiga Soomaaliya (marka laga reebo xadka dekedda sida ku qoran Farqadda 1aad ee kor ku xusan) oo uu Agaasinka Waaxda Badda go'aan ka gaaray inay khatar ama dhiibaato u geysanayaso badmaridda, hay'adda mas'uulka ka ah waxay amaraysaa in markableygu ama markab-waduhu uu ka saaro qolofka markabka, isagoo muddo u gooyey, lana tashaday Wasaaradda Hawlaха Guud iyo Xafiiska Farsamada Badda.
3. Haddii markableyga uu ku gefo fulinta amarkaas, hay'adaha kor ku xusan waxay amraysiaaka saarista in la sameeyo ayadoo uu kharshka dhiibayo markableyga markabka caariyey ama wadihiisa.
4. Dekedda gudaheeda aydoo la raacayo tallaabooyinka uu qaaday Hoggaamiyaha Dekedda, hay'adda Dekedda waxay ku dabbageysaa awoodaha uu siiyey Waaxda Badda Farqadda 2aad ee Qodobakan.
5. Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiiddka Badda, wuxuu go'aan ka gaarayaа ka saarista, hababka qaadista wixii laga soo saaray iyo iibinta alaabta iyo qolofka markabka iyo qadarka lacag celinta kharashka uu maamulka ku leeyahay markableyga, hawlgeiyaha (OPERATORS) iyo dhinaca ku shaqada leh. Maraakiibta ku caariyey badda hoosteeda culeyskoodana aan ka badneyн 300GRT, markableyga, ama hawlgeiyaha waxaa waajib ku ah inuu bixiyo kharashka ka saarista ugu badnaan ilaa qiimaha qolofka markabka.
6. Ka sokow kharashka ka saarista alaabta iyo markabka ku caariyey badda hoosteeda, dadka u xil saaran alaabta ku caariyey badda, markableyga iyo hawlgeiyaha maraakiibta caariyey oo ogaan ku xadgudba farqadaha 1,2,3 ee Qodobkan, wuxuu muteysan karaa ganaax sida uu dhigayo xeer-nidaamiyaha, ganaaxana ugu badnaan uu noqon karo lacag qadarkeeda tahay, saddex laab qiimaha kharashka ku baxay soo

saarista.

Qodobka 30aad: Kaalmeynta maraakiibta ku jira khatarta

1. Hoggaamiyaha Dekedda haddii uu ogyahay inuu markab kale uu ku jiro dhibaato ama uu ogaaday qolof markab ama shil kale, waa inuu isla markiiba qaadaa tallaabooyinka lagu kaalmeynayo. Hoggaamiyaha Dekedda haddii loo baahdo wuxuu wargelinayaan kana codsanayaa kaalmo, hay'adaha kale ee ku shaqada leh, awoodna u leh faragelinta rasmiga ah.
2. Si loo raadiyo kaalmo, Hogaamiyaha Dekedda, Waaxda Badda ama hay'ad kale ee dowladeed ee ay arrintu khuseyso, waxay amri kartaa in maraakiibta, oo leh lahaansho gaar ahaaneed ama in kale, iyadoo aan la fiirineyn dalka calnakiisa, dekeda ama agagaarka markabka ku dhibaateysan in loogu dhiibo gacantooda, ayadoo ay ku jiraan shaqaalahaa markabka amarkaasoo lagu codsanayo in si dedeg ah loogu fidiyo kaalmada.
3. Magdhabidda iyo abaalmarinta la xiriirta kaalmada ay bixiyeen Maraakiibta, laguna sheegay farqada 2aad ee Qadobkan waxaa la bixinayaa sida waafaqsan qodobada ku saabsan kaalmada iyo samatabixinta ee Xeerkana ama Xeer-nidaamiyaha loo soo saaray ujeedadaas.

Qodobka 31aad: Kormeerka hawlaha dekeda iyo dhibaatooyinka dekeda iyo maraakiibta

1. Ku dhaqanka dadka iyo fulinta hawlaha ee lagu sameynayo dekeddaha gudohooda waxaa kormeer ku sameynaya hay'adda Dekedda iyo Hoggaamiyaha Dekedda (Harbour Master).
2. Haddii ay jiraan dhibaatooyin ama falal ka soo horjeeda nabadgelyada iyo xasiloonida dekeda oo ka dhaca dekeda gudaheeda ama meelaha u dhow dekeda Hay'adda Dekedda iyo Sarkaalka Dekedda waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka loo baahdo oo ay ku jiraan kaalmeynta Boliska Dekedda si ay dib ugu soo celiyaan xasiloonida iyo kontoroolka.

Qodobka 32aad: Khasaaraha loo geysto dhismooyinka dekeda iyo qalabka kale ee badda

1. Haddii khasaare loo geysto dhismooyinka ama qalabka badda, Waaxda Badda kadib markii ay xaqiijiso qadarka khasaaraha iyo kharashka hagaajinta ayadoo la kaashaneysa hay'adaha farsamada, waxay amreysaa inuu qofka mas'uulka ka ah uu si degdeg ah u sameeyo hagaajinta lagama maarmaanka ah isaga naftiisa aaya bixinaya kharashka hagaajintaas.
2. Markey arrintu tahay mid degdegsiimo ah ama ay fulin waayaan dadka mas'uulka ka ahaa Waaxda Badda waxay fulineysaa hawlaha hagaajintaas sida uu tilmaamo Wasiirka Kalluumeysga & Gaadiidka Badda.
3. Haddii kharashkaas uu geysto markab, Waaxda Badda ayada oo uu codsi ka yimid Hay'adda Dekedda ama Hoggaamiyaha Dekedda uu Markableyga ama Hawlgelyahaya ama Wakiilkisa ka codsanayaa inuu keeno dhigaal lacageed iyo khidmo kale oo ku waajiban, ahna damaanad xagga bixinta kharashka lagu sameynayo hagaajinta. Haddii loo baahdo, Waaxda Badda waxay awood u leedahay inay ka qaado lacagta lagu leeyahay markabka gefay, kana reebto markabka inuu dhoofo ilaa uu fuliyo waajibaadkaas.
4. Haddii khasaaraha loo geysto dekeda ama meelaha dekeda gudaheeda, tallaabooyinka kor ku xusan waxaa qaadaya Hay'adda Dekedda ama Hoggaamiyaha Dekedda.

Qodobka 33aad: Kaluumeysga isticmaalka waxyaabaha qarxa iyo ifinta dekedaha

1. Dekedaha gudohooda iyo meelaha kale ay maraakiibtu ku xirtaan ama loo xadeeyey maritaanka maraakiibta, kalluumeysga haysashada iyo isticmaalka waxyaabaha qarxa iyo ifinta nalalka ama dabka oo dhibaato u geysan kara adeegyada calaamadaha waa mamnuuc marka laga reebo duruufta gaar ahaaneed ee ay oggolaatay Waaxda Badda.
2. Dadka lagu helo ku xadgudubka Qodobka ama Xeer-nidaamiyaha ujeeddadaas loo soo saaro waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka badnayn (3) sadex bilood am ganaax ilaa So. Shs 25,000/=.

QEYBTA III - SHAQAALAH BADDA

Qodobka 34aad: Badmaaxiinta shaqaalaha maraakiibta ganacsiga iyo shaqaalaha ku hawlan arrimaha badda ee dekedaha

1. Shaqaalaha Badda guud ahaaneed oo ay ku jiraan dadka ku hawlan hawlah la xiriira ama ku xiran badmaridda ama ganacsiga la marinayo badda ama lagaga socodsiiinayo dekedaha.
2. Shaqaalaha Badda oo xiriir la leh hawlah la badmaridda waxaa kujira dhammaan dadka ka shaqeeya u adeegidda markabka nooc kasta ha ahaadee, socodsintooda, qalabka markabka, badeecada kor saaran iyo shaqaalaha markabka.
3. Shaqaalaha Badda oo la xiriira hawlahla socodsinta dekedaha oo ay ku jiraan dadka ka shaqeeya maamulka iyo socodsinta dekedaha, fulinta waajibaadka la xiriira dayactirka qalabka badmarida iyo hantida maguurtada ah ee dekedaha, shaqaalaha dekedaha, kuwo ku shaqada leh jiidista maraakiibta iyo dadka ka shaqeeya warshadaha badda kuwaasoo aan ku jirin shaqaalaha maraakiibta.

Qodobka 35aad: Qorista iyo buugga badmaax ee badmaaxiinta

1. Badmaaxiinta oo caadi ahaan lagu yaqaanno Badmaaxiinta ganacsiga ama Badmaaxin Ganacsade, waxaa lagu diiwaangelinyaa diiwaanno gaar ah oo u haysanayo Agaasimaha Waaxda Badda.

2. Agaasimaha Waaxda Badda, wuxuu siinayaan Buugga Badmaaxeet qof kasta oo laga rabo inuu haysto Buuggaas, haddii uu qofkaas fuliyo shuruudaha uu dhigayo Qodobkan. Buugga Badmaaxa wuxuu yahay Shahaadada Rasmiga ah ee keliya oo ku saabsanaqoonsiga iyo Baasaboorka isagoo ku jira shaqada badda iyo Shahaadada adeegga, ayadoo la tilmaamayo darajo kasta ee uu sitaha warqadaha aqoonsiga uu u qalmo hawlah markabka dushiisa, oo loogaga baahdo buugga.

Buugga badmaaxa waxaa ku qoran qoraal caddeynaysa in qofka leh buuggaas uu yahay muwaadin ka tirsan Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliya, si loogu qoro qofka diiwaannada kor ku xusan, muteysanna helidda Buugga Badmaaxa, Badmaaxu waa inuu Agaasimaha Waaxda Badda u gudbiyaa caddeynata hoos ku qoran:-

- b) Inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed
- t) Inuu deggan yahay dalka Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliya.
- j) Inay da'diisu tahay ugu yaraan 15 sano.
- x) Inuu haysto oggolaanshaha waalidka ama qof kale oo mas'uul ka ah haddii uu yahay qof aan qaan gaarin.
- kh) Inuu yahya qof jirka ka fiyow oo mari kara badda. d) Inuu yaqaan dabbaasha iyo

wadidda doonyaha.

- r) Waa in uusan ahayn qof lagu xukumay dambiyoo lid ku ah hanti ama dad, ugu yaraan xarig hal sano ah marka laga reebo ku celinta bulshada.
3. Dad aan qaan gaarin oo da'dooda ka yar tahay (10) sano, waxaa lagu qori kara diiwaanada kor ku xusan, inay shaqaale ka noqdaan maraakiibta ama doonyaha, hadii xubnaha qoyskooda ay katirsanyihiin shaqaalaha markabka ah ayadoo shardi looga dhigayo inay mas'uulka noqdaanDadka aan qaan gaarin.
- Markay ka soo degaan maraakiibtaas dadka aan qaan gaarin oo ku qoran diiwaanada looguma qori Karo maraakiibta ama doonyaha ilaa ay gaaraan shan iyo tobani (15) sano, haddii aysan xubnaha qoyskooda mas'uul uga noqonin, ahna isla shaqaalaha markabka la soo sheegay.
4. Buugga Badmaaxa waxaa haysanayaBadmaaxa la siiyey, Buugga waxaa lagu dhigayaa saxiixa, caddeynya jinsiyadda, da'da, tilmaanta jirka, sawirka iyo faraha badmaaxa. Intaas ka sokow, Buugga wuxuu muujinaya mihnada, darajada khibradda ee uu aqoonta u leeyahay badmaaxu.
5. Qof kasta oo si sharci darra ah ku hela uuna isticmaala Buugga Badmaaxa ama been abuura qoraallada si uu u helo Buugga Badmaaxa, wuxuu muteysanayaa xarig aan ka badneyn hal (1) Sano, hadii uusan sharci kale dhigin ciqaab ka badan intaas.

Qodobka 36aad: Ka tirtiridda diiwaanka

1. Badmaaxiinta waxaa lagaga tirtirayaa diiwaanada rasmiga, Buugga Badmaaxiintana waa lagala noqon karaa haddii ay jiraan sababaha hoos ku qoran:
 - b) Geerida qofka ku qoran diiwaanka.
 - t) Caddeynya ujeeddada qofka ku qoran diiwaanka inuu kaga tago hawlaha badda.
 - j) Waayidda jinsiyadda Soomaaliyeed.
 - x) Waayidda joogtada ee caafimaadka jirka oo ku saabsan badmaridda.
 - Kh) Ciqaabta oo lagu dhawaaqo xukun ugu dambeyn ah, ee ku saabsan dembi dabeeecaddiisu kareebayso arjiilaha in lagu qoraa Buugga sida waafaqsan Qodobka lasoo dhaafey.
 - d) Ka joojin badmaridda mudo tobani (10) sano ah oo isku xiga, dadka ku qoran diiwaanada, lehna darajooyin mihnadeed, iyo shan sano isku xiga dadka kale ee ku qoran.
 - r) Si kas iyo ula kac ah uu u diido amarrada Sharciga ah ee uu bixiyeyKabtanka Markabka ama Sarkaal kale ee haya hoganka.
2. Dadka laga tirtiray diiwaanka rasmiga ah sida waafaqsan faqradda 1 (j) iyo (kh) ee Qodobkan waxay dib u codsankaraan in lagu qoro haddii ay dhamaadaan sababaha dhaliyey tirtiridda.

Dadka laga tirtiray sida waafaqsan faqrada 1 (t) iyo (d) ee Qodabkan, waxay codsankaraan dib u qoridda haddii codsigaas la keeno muddo lamid ah muddada hore ee badmaridda, muddadaasoo laga tirinayo maalinta tirtiridda.

3. Joojinta buugga badmaaxa ee uu leeyahay badmaaxu iyo xaqiisa ku saabsan ka shaqeeynta markabka ku suran Calanka Soomaaliyeed ilaa muddo aan ka badneyn (6) bilood waxaa lagu dabaqi karaa haddii la helo cadeyn in badmaaxa caadeystay inuusan u gudan wajibaadkiisa si hufan, ama in gefka ama taxadar la'aanta badmaaxa ee ku saabsan fulinta waajibaadkiisa ay khatar u keeni karaan markabka, badmaaxa laga joojiyey hawshiisa wuxuu waaxda badda uu arji ugu qoran karaa isagoo codsanaya dib u qorid shaqo.

Qodobka 37aad: Baahida shaqaaleynta markabka

Baahida ugu yar ee lagama maarmaan ah in la siiyo Shahaadada Saraakiisha maraakiibta.

1. Caddeymo: haddii aan si kale loo tilmaamin ereyada hoos ku qoran waxa loola jeeda macnaha ku qoran hortooda :-

- b) "Xeer - Nidaamiye"—Waxaa loola jeedaa nidaamka si sharci ah oo ay dejisay Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.
- t) "Kabtanka"—Waxaa loola jeedaa qofka haysta hoggaanka markabka.
- j) "Sarkaalka"- Waxaa loola jeedaa shaqaale ka mid ah markabka oo aan ahyn kابتanka, sharciga dalka ama Xeer-Nidaamiyaha ama heshiis ama caado la aqoonsanyahay lagu magacaabay.
- x) "Sarkaalka Dheegga" Waxaa loola jeeda sarkaalka leh aqoonta ku saabsan qeybta dheegga ee markabka.
- (kh) "Sarkaal Xigaha"- Waxa loola jeeda sarkaalka markabka ee ku xiga hogaamiyaha ayada oo uu markabka hogaankiisa la wareegayo haddii hogaamiyaha uu noqdo qof aan karti lahayn.
- d) "Sarkaalka Injineerka"- Waxa loola jeeda Sarkaalka injineerka aqoonta u leh qeybta makiinadaha.
- r) "Sarkaal Injineerka sare"- Waxa loola jeeda sarkaalka injineerka ugu sareya mas'uulna ka ah dhaqaajinta makiinadaha markabka.
- s) "Sarkaal Xigeenka Injineerka"- Waxaa loola jeeda sarkaal ku xigaha sarkaalka injineerka sare mas'uulna ka noqonaya dhaqaajinta makiinadaha markabka hadii karti la'aan ku dhacdo Sarkaalka Injineerka sare.
- sh) "Sarkaalka Raadiyaha"- Waxaa loola jeeda qofka haysta shahaadada socodsinta War- isgaarsiinta (Radio Telegraph) ee derajada koowaad ama derejada labaad amashahaadada guud ee socodsinta war-isgaarsiinta ee adeegyada howlaha badda (Maritime mobil service) oo ay bixisay hay'adaha sharcigan loo xil saaray kana tirsan Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliya ama aqoonsan tahay Waaxda Badda.
- Dh)"Socodsiiyaha Telefoonka Raadiyaha" Waxaa loola jeedaa qofka haysta shahaadada Habboon ee ay bixisay hay'adda sharci ahaan loo xil saaray ama loo aqoonsan yahay.
- o) "Safarka Xeebta" ama "Safarka Xeebta Agagaarkeeda" waxa loola jeeda safarka markabka oo ka bilaabma kuna dhamaada dekedaha Jamhuuriyadda Dimquradiga Soomaaliya, oo aan ku jirin ku xirnaanshaha dekedaha ama xeebaha dal shisheeye.
- g) "Badmaridda" iyo "Kormeerka Badmaridda" waxaa loola jeeda waajibaadka ku saabsan meeleynta iyo hoggaaminta markabka sida waafaqsan hababka badmaridda.
- f) "Quwada Dhaqaajinta", Waxaa loola jeeda quwadda dhaqaajinta ugu badan ee joogtada ah ey leeyihin dhammaan makiinadaha markabka oo dhaqdhaqaaqa, oo lagu sheego kilowaat kuna qoran shahaadada markabka ee dalka ama qoraal-ada kale ee rasmiga ah.
- k) "Baahida Shaqaaleynta", Waxaa loola jeedaa tirada ugu yar ee saraakiisha aqoonta leh iyo shaqaalaha markabka oo leh darajooyin kala duwan kuwaas oo looga kala baahan yahay hawlaha kala duwan ee maraakiibta kala duwan iyo adeegyada xeebta iyo ganacsigacaalamiga.
- I) "Xeerka ", Waxaa loola jeedaa, wixii ku saabsan Qodobkan, Xeerka Caalamiga ee Xeerarka Tababarka, Shahaadada iyo Kormeerka Badmaaxiinta,1978,IMO,LONDON.
- m) "Wasiirka" ama "Wasaaradda", Waxa loola jeedaa Wasiirka Kalluumeysiga iyo

- Gaadiidka Badda, isagoo isticmaalaya awooddisa rasmiga ah Wakiilna ka ah Wasaardda Kalluumeysiga, Gaadiidka Badda iyo Dekedaha iyo Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliya.
2. Baahida Shaqaaleynata:- Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda, wuxuu soo saari doonaa Xeer-nidaamiye dhigaya baahida ugu yar ee shaqaaleynata maraakiibta ee waafaqsan markabka ballarka, ganacsiga iyo tilmaanta gaar ahaaneed. Hase yeeshi Xeer-nidaamiyahaas waxaa lagu dhigi kara, hadba sida habboonaata, oo ay ku jirto shaqaaleynata iyo shahaadada shaqaalaha dhammaan maraakiibta, doonyaha iyo maraakiibta yaryarka ee ku qaada rakaabka ijaar, safarda xeebaha dalka ama caalamiga.
3. Qodobkan waxaa lagu dabbqayaa dhammaan Maraakiibta, Doonyaha iyo Dayuurad-badeedka wata Calanka Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliya marka laga reebo:-
- b) Maraakiibta Dagaalka iyo Maraakiibta kale ee Dowladda ay leedahay ama u adeegsato Jamhuuriyadda ujeeddooyinka aan ganacsi ahayn.
- t) Maraakiibta Kalluumeysiga.
- j) Doonyaha dalxiiska (pleasure yahts) oo ayaan ku jirin hawlaha ganacsiga ama rakaabka ijraar loogu qaadayo.
- x) Doonyaha iyo Maraakiibta yaryarka ku hawlan ganacsiga xeebaha kaliya, kiro ku qaadayn rakaabka iyo,
- kh) Markab culeyskiisu ka yar yahay 10 GRT, kirana aan ku qaadayn rakaab.
4. Baahida lagama maarmaanka ee ugu yaraan ah shahaadada Saraakiisha kashaqeynaya maraakiibta wadata Calanka Soomaaliyeed waxaa lagu dhigayaa waxyaabaha soo socda:-
- b) Kabtanka iyo Kabtan Xigeenka maraakiibta culeyskooda yahay 1600 (GRT) tanolaatka diiwaangashan ama wax ka badan; Kabtanka iyo Kabtan Xigeenkasta ee markabka maraya badda watana Calanka Soomaaliyeed culeyskiisu dhan yahay 1600 GRT ama ka badan waa inuu haysta shahaadada habboon, aqoonsantahayna Wasaaraddu.
- Qofka doonaya shahaadadaas waa inuu fuliyaa shuruudaha hoos ku qoran kuna Qancaa Wasiirka:-
1. Caafimaadkiisa fican yahay, gaar ahaan Aragtida iyo Maqalka.
2. Inuu ka soo baxay aqoonta looga baahan yahay Sarkaalka loo dhiibo Kormeerka Badmaridda maraakiibta culeyskooda dhan yahay 200 GRT ama ka badan, haystana awoodda khibradaha badmaridda ee la soo oggolaaday, sida hoos ku qoran:-
- b) Hadii la siinayo Shahaadada Kabtan Ku - Xigeenka tababar aan ka yarayn toban iyo sideed (18) bilood, ama aan ka yarayn toban iyo laba (12) bilood, marka lagu daro tababar gaar ahaaneed, oo uu aqoon san yahay Wasiirka inuu la mid yahay shaqo lix (6) bilood ah Sarkaalnimo xagga Kormeerka Badmaridda.
- t) Hadii la siinayo Shahaadada Kabtanka shaqa badmarid aan ka yarayn soddon iyo lix (36) bilood, ama ka yarayn labaatan iyo afar (24) bilood, hadii uu ka soo shaqeeeyey tobay iyo laba (12) bilood isagoo ka ahaa Kabtan Ku-Xigeen ama uu qofku si hufan uu soo dhammeeyey tababarkiisa Wasiirkana la noqoto inuu la mid yahay tababarkaas shaqo ugu yaraan tobay iyo labo (12) bilood ah.
3. Uu muujiyo karti sida uu tilmaamo Wasiirka loogagana baahan yahay aqoonta ugu yar marka qofka la siinayo Shahaadada.
- j) Kabtanka Ku-Xigeenka maraakiibta culeyskooda yahay 200 ilaa 600 GRT, Kabtan iyo Kabtan Ku-Xigeenka markabka maraya badda watana Calanka Soomaaliyeed, culeyskiisuna u dhaxeeyaa 200 GRT ilaa 1600 GRT, waa inuu haystaa Shahaado habboon. Qofka la siinayo Shahaadada waa inuu ka qanco Wasiirka inuu fuliyey shuruudaha hoos

ku qoran:

1. Caafimaadkiisu fiican yahay, gaar ahaan xaggaa Aragtida iyo Maqalka.
 2. Hadii la siinayo Shahaadada Kabtan Ku Xigeenka waa inuu fuliya shuruudaha laga rabo Sarkaalka haya hoggaanka Kormeerka Badmaridda maraakiibta culeyskooda dhan yahay 200 GRT ama ka badan.
 3. Haddii la siinayo Shahaadada Kabtanka, waa inuu fuliyaa shuruudaha laga rabo Sarkaalka haya hoggaanka kormeerka maraakiibta culeyskooda dhan yahay 200 GRT ama kabadan asagoo soo maraya hawl badmaren ah aan ka yarayn muddo Sodden iyo lix (36) Bilood, ama muddo aan ka yarayn labaatan iyo afar (24) bilood haddii shaqadaas ka mid ahayd shaqada Kabtan Ku – Xigeenka oo aan kayarayn tobant iyo laba (12) bilood ama haddii uu si guud u soo dhammeeyey tababar gaar ah oo uu Wasiirka la noqoto inay la mid tahay shaqadaas; iyo
 4. Uu muujiyey karti raalli-geliyey Wasiirka kartidaas oo ku saabsan aqoonta ugu yar ee loo baahdo Shahaadadaas oo kale.
 5. Sarkaal haya hoggaanka markabka maraya badda, watana Calanka Soomaaliyeed culeyskiisuna uu ka yar yahay 200 GRT, kuna hawlan ganacsi caalami ah, ama uu kiro ku qaado rakaabka, waa inuu haystaa Shahaado uu aqoonsado Wasiirku, kuna saabsan hawsha Kabtanka maraakiibta culeyskooda dhan yahay 200GRT ilaa 1,600 GRT.
 6. Sarkaal kasta ee haya hoggaanka kormeerka badmaridda ee markabka maraya badda, culeyskiisuna dhan yahay 200 GRT, watana Calanka Soomaaliyeed, isagoo ku hawlan ganacsi caalami ah ama uu kiro ku qaadayo rakaabka waa inuu haystaa Shahaadada habboon, Wasiirkuna aqoonsan yahay kuna saabsan hawsha maraakiibta culeyskooda dhan yahay 200 GRT ama kabadan.
- x) Shuruudaha Shahaadooyinka looga baahdo maraakiibta wata Calan Soomaaliyeed, culeyskoodana ka yarayn 200 GRT, kuna hawlan safarada agagaarka xeebaha, kirona ku qaadayn rakaab, waxaa go'aamiya Wasiirka, sida hadba loo baahdoisagoo ku soo saaraya Xeer-hoosaadyo iyo Xeer-nidaamiye lagu soo saarayo sharcigan.
- Kh) Saraakiisha haya hoggaanka kormeerka badmaridda maraakiibta wadata Calan Soomaaliyeedculeyskooduna u dhanyahay 200 GRT ama ka badan yahay; Sarkaal kasta oo haya hoggaanka kormeerka badmaridda, kana shaqeeya markab badda marayaa watana Calanka Soomaliyeed,culeyskiisuna dhan yahay 200 GRT ama ka badan,waa inuu haystaa Shahaado habboon.
- Qofka raba shahaadadaas oo kale waa inuu Wasiirka ka qanciyaa inuu fuliyey shuruudaha hoos ku qoran:-
1. Da'diisu tahay ugu yaraan tobant iyo sided (18) sano.
 2. In caafimaadkiisu taam yahay, gaar ahaan xaggaa Aragtida iyo Maqalka.
 3. Inuu soo maray shaqada qeybta dheegga ugu yaraan seddex sano, oo ay ku jirto lix (6) bilood oo shaqo ku saabsan ilaalinta buundooyinka ayadoo uu kormeerayo Sarkaal aqoon u lehTababar gaar ahaaneed oo aan ka badneyn laba (2) sano waxaa lagu badelli karaa shaqada badmaridda, haddii uu Wasiirku uu ku qanco in tababarkaas uu ugu yaraan lamid yahay muddada shaqada badmaridda ee loogu beddelayo iyo
 4. Uu ku qanciyoo Wasiirka inuu haysto aqoonta lagama maarmaanka u ah hawshaas.
 5. Xayiraad- Wasiirku wuxuu bixin karaa Shahaadooyin, xayraad la'aan dhinaca baahida shaqada, shaqaalaha aqoon buuxda u leh fulinta hawlahaas; hasa yeeshiee wuxuu siinaya Shahaadooyin ku xiran shuruudo xagga baahida soocodsinta hawlahaaha ku saabsan hawlaha agagaarka xeebaha, dadka muujin waaya aqoonta buuxda, laakiinse hawlahaoda ku xiran yihiin xayiraadda aysan waxba u dhimayn nabadjelyada.
 - d) Sarkaalka Injineerka Sare iyo Sarkaal Xigeenka Injineerka saaran maraakiibta wata Calanka Soomaaliyeed, kuna shaqeeya matoorka weyn oo leh quwad 3,000 Kilowat ama

ka badan. Sarkaalka Injineerka Sare ama Sarkaal -Xigeenka Injineerka saaran markab maraya badda watana Calanka Soomaaliyeed, kuna shaqeyya matoorka leh 3,000 kilowat ama ka badan waa inuu haystaa Shahadada ku habboon Qofka la siinayo Shahaadadaas wa inuu Wasiirka ka qanciyaa inuu buuxiyey shuruudaha hoos ku qoran:-

1. Inuu caafimaadkiisu taam u yahay hawsha.
2. Uu fuliyey shuruudaha looga bahan yahay Shahaadada Sarkaalka Injineerka oo haya hawsha kormeerka iyo,

b) Helidda Shahaadada Sarkaalka Injineerka Sare, waxaa loo baahan yahay ugu yaraan tobaniyo labo (12) bilood, shaqada badmaridda oo lagu aqoonsan yahay Sarkaal-Xigeenka Injineerka iyo Saraalka Injineerka.

t) Helidda Shahaadada Sarkaalka Injineerka Sare, waa inuu soo dhammeeystay ugu yaraan soddon iyo lix (36) bilood, hawsha badmaridda oo la aqoonsan yahay oo ugu yaraan tobaniyo labo (12) bilood ay ka mid yihiin hawasha Sarkaal Injineerka oo leh mas'uulayad isagoo aqoon u leh hawsha Sarkaalka Injineerka labaad.

1. Uu soo maray tababar farsamo leh oo la aqoonsan yahay kuna saabsan dab-demis.
2. Uu muujiyey kartida uu soo tilmaamay Wasiirka ee loogu baahdo aqoonta Shahaadada lagama maarmaanka u ah.

3. (r?) Sarkaalka Injineerka Sare iyo Sarkaal Injineerka labaad ee maraakiibta lagu soocodsiyo matoorka weyn ee quwadiisu tahay 750 ilaa 3,000 Kilowaat; Sarkaalka Injineerka sare ama Sarkaalka Injineerka labaad oo ka shaqeyya markab badda maraya oo wata Calanka Soomaaliyeed laguna socodsiyo matoor weyn oo quwaddiisu tahay 750 ilaa 3,000 kilowaat, waa inuu heystaa shahaado habboon.

Qofka waa inuu wasiirka uga qanciyaa inuu fuliyey shuruudaha hoos ku qoran:-

1. In caafimaadkiisu taam u yahay hawshaas.
2. Uu fuliyey shuruudaha looga baahday Sarkaalka Injineerka oo haynaya kormeerka, iyo

b) Marka la siinayo shahaadada Sarkaalka Injineerka labaad, uu leeyahay ugu yaraan tobaniyo labo (12) bilood ee shaqada badmaridda isagoo ku shaqeyey Sarkaal-Xigeenka Injineerka ama Sarkaal Injineerka, ama

t) Marka la siinayo shahaadada Sarkaalka Injineerka Sare waa inuu ka soo shaqeyey ugu yaraan labaatan iyo afar (24) bilood, shaqada badmaridda ee lasoo oggolaaday taasoo ugu yaraan tobaniyo labo (12) bilood uu ka soo shaqeyey isagoo aqoon u leh hawsha Sarkaalka Injineerka labaad.

3. Uu soo maray tababar farsamo oo ku saabsan dab-demiska, oo la aqoonsanyahay.
4. Uu muujiyey isagoo ka qanciyey Wasiirka inuu leeyahay aqoonta farsamo leh eelagama maarmaanka u ah jagadaas.

j) (S?) Marka la siinayo shahaadada Saraakiisha Injineerka oo haynaya kormeerka iyo Saraakiisha ka shaqeynaya maraakiibta wadata Calanka Soomaaliyeed, laguna socodsiyo matoor quwaddiisu ka yar tahay 750 Kilowat, shuruudaha looga baahan yahay, waxaa soo saaraya Xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka oo awood loogu siiyey Sharcigan.

Sh) Saraakiisha Raadiyaha ama Socodsiyaha Telefoonka Raadiyeyaasha: Sarkaal kasta ee Raadiyaha oo mas'uulka ah ama fulinayaan waajibaadka raadiyaha iyo socodsiyaha telefoonada Raadiyaha ee saaran markab maraya badda, watana Calanka Soomaaliyeed, waa inuu haystaa Shahaado habbon, ee uu bixiyey Wasiirka ama uu aqoonsan yahay, isagoo laga rabo shuruudaha hoos ku qoran:-

1. Inuu da'sdiisu ka yarayn tobaniyo sideo (18) sano.
2. Inuu caafimaadkiisu u fiican yahay hawsha.
3. Inuu fuliyey shuruudaha dheeraadka iyo inuu leeyahaay waaya aragnimada uu

tilmaamay wasiirka ama wasaarad kale ee Jamhuuriyadda oo ay arrintan khuseyso.

4. Qof kasta oo shahaado loo siiyey sarkaalka raadiyaha ama socodsiiyaha telefoonada raadiyaha wuxuu ka qancinayaas wasiirka isagoo muujinaya inuu leeyahay aqoon ku filan oo farsama ah xagga raadiyaha ama telefoonka raadiyaha si uu u guto waajibaadkiisa xagga socodsinta raadiyaha si hufan.

5. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro nidaam iyo Xeer-nidaamiye habbon, soo saarista xeerarka kormeerkaa aqoonta ugu yar ee looga baahdo shahaado siinta iyo xeerarka kale ee loogu horumarinayo nabadjelyada nolosha badda iyo maraakiibta wadata Calanka Soomaaliyeed ay kaga shaqeeyaan saraakiil iyo shaqaale aqoon u leh hawlahas. Markuu soo saarayo nidaam iyo xeer-nidaamiyaha la xiriira arrimahaas, Wasiirku waa inuu tixgeliyaa qadobada Xeerka Caalamiga ee ku saabsan shuruudaha gaarka ah ee maraakiibta qaadda badeecooinka khatarta ah ama kuwa leh tilmaamo gaar ahaaneed.

QEYBTA IV - HABKA MAAMULKA MARAAKIIIBTA WARQADAHAYO IYO DIIWAANGELINTA

Qodobka 38aad: Maraakiibta, doonyaha iyo maraakiibta yar yarka ah

1. Erayga "Markab" waxaa loola jeeda doonyaha waaweyn loogu isticmaalo ama u qalmo in lagu isticmaalo Badmaridda biyaha korkiisa ama hoostiisa. Erayga "Markab" waxaa kaloo jira Doonyaha kale ee loogu talo galay ujeeddooyinka gaar ahaaneed sida qodidda badda hoosteeda, maraakiibta qaada, wiishashka sabbeya, maraakiibta loogu tala galay hagaajinta maraakiibta kale, maraakiibta jiida maraakiibta kale, maraakiibta qodda saliidda, dayuurad-badeedka ku goosha biyaha.

2. Maraakiibta, ayadoo la tixgelinayo baahidooda farsamo iyo noocyada adeegyada ay qabtaan, waxaa lagu meeleyaa heerar kala duwan ayagoo lagu diiwaangelinayo habka Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha uu soo saaro Wasiirka Kallumeysiga & Gaadiidka Badda, ayagoo lagu qorayo diiwaanada hoos ku qoran midkood ee uu haynayo Agaasimaha Waaxda Badda:-

b) Diiwaanka Maraakiibta.

t) Diinwaanka Doonyaha.

j) Diiwaanka Maraakiibta yar-yarka.

3. Ku qorista maraakiibta yaryarka diiwaanada ku habboon taasoo saldhig u ah dekedda asalka ah oo ay ka socdeen.

4. Qodobada saameeya Maraakiibta waxaa kaloo lagu dabbaqayaa doonyaha iyo maraakiibta yaryar, haddii aan si kale loo tilmaamin.

Qodobka 39aad: Oggolaanshaha badmaridda iyo aqoonsiga maraakiibta, doonyaha iyo maraakiibta yaryar

1. Maraakiibta ku qoran diiwaanada ay hayso Waaxda Badda, kana soo baxaan shuruudaha waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha, waxaa loo oggolaanayaa badmaridda.

2. Ka sokow, culeyska iyo meesha diiwaangelinta, maraakiibta waxaa lagu aqoonsanayaa magaca, doonyaha magaca iyo lambarka diiwaanka, maraakiibta yaryarkana lambarkooda diiwaanka oo keliya.

3. Shuruudaha iyo hababka diiwaangelinta ee maraakiibta waxaa lagu goynayaa Xeer-nidaamiyaha Qodobada Sharcigan.

4. Markuu keensado arji, keenana caddeyn muujinaysa in la fuliyey dhammaan shuruudaha iyo qodobada diiwaangelinta, markabku wuxuu xaq u leeyahay in la diiwaangeliyolana siiyo Calanka Soomaaliyeed.

Qodobka 40aad: Calanka maraakiibta ganacsiga

1. Calanka Markabka Ganacsiga waa inuu leeyahay tilmaanta hoos ku qoran:- Cad dhar ah ballarkiisu yahay 150cm iyo 100cm leeyahayna midabka buluugga dhexdana ku leh Xiddig shan geesood leh, kuna wareegsan baroosinka oo xarigiisa lagu dhigay xarafka "S" oo ah tilmaanta Soomaaliyeed.
2. Qof kasta oo ka tegayaa ama si kale u isticmaalayaa Calanka Maraakiibta Ganacsiga ee Soomaaliyeed, kaasoo aan lagu oggolayn Xeer-nidaamiyaha ujeeddadaas loo soo saaray, ama uu Calanka u isticmaalo markab shisheeye oo si gef ah u tilmaansan,ama ujeeddasiisu tahay garashada jinsiyadda marakabka shisheeyaha waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa (1) sano ama ganaax ilaa Shs So. 250.000/= ama xarig & ganaax labadaba.

Qodobka 41aad: Diiwaangelinta noocyada kala duwan ee maraakiibta

1. Markabku ha ahaado midka matoorka ama kan debaysha lagu wado, culeys kasta ha lahaadee kuna hawlan ganacsiga dekedaha Jamuuriyadda dhexdeeda ama markab kale ee ku hawlan ganacsi shisheeye, ma qaadan karo Calanka Soomaaliyeed, mana la siin karo xuquuqda iyo Bursiinooyinka markabka Soomaaliyeed haddii markabkaasu uusan ku diiwaangashanayn habka uu dhigayo Sharcigan, shuruudaha kale iyo Xeer-nidaamiyaha.
2. Dekedda dalka ee markab kasta oo diiwangashan sida uu dhigayo habka Faqrada 1aad ee Qodobkan, waxaa weeye Muqdisho, Magaca dekedda dalka waxaa lagu muujinayaa shahaadada diiwaangelinta si cadna loogu dhigayaa markabka dhinaciisa.

Qodobka 42aad: Shahaadada jinsiyadda maraakiibta, rukhsadaha doonyaha iyo shatiyada maraakiibta yaryarka

1. Magaca warqadaha diiwaangelinta Markabka wuxuu noqonayaa "Shahaadada Jinsiyadda" ee maraakiibta, "Rukhsadaha" doonyaha iyo "Shatiyada" maraakiibta yaryarka.
2. Shahaadada Jinsiyadda waxaa soo saarayaa Agaasimaha Waaxda Badda ama Wakiilka uu magacaabay Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gadiidka Badda, waxaana lagu qorayaa culeyska saafiga ee diiwaangashan, magaca iyo deegaanka markableyga iyo magaca, nooca, tilmaanta iyo tilmaamaha waaweyn ee markabka.
3. Ruksadaha Doonyaha iyo Shatiyada maraakiibta yaryarka oo ay bixisay Waaxda Badda, haynaysana diiwaanadooda, kuna qoran magacooda, lambarkooda guud, culeyskooda saafiga ee diiwaangashan, magaca iyo deegaanka markableyga iyo meesha lagu qoray lambarka.
4. Markay jirto xaalad degdeg ah ama ay jiraan duruufo gaar ahaaneed, Shahaadada Jinsiyadda waxaa loogu beddeli karaa shahaado ku meel gaar ah ee uu soo saaray Agaasimaha Waaxda Badda, lana siiyey maraakiibta cusub oo la dhisay, ama ay bixisay Waaxda Badda ama Qunsuliyadda ka hor siinta lambarka marka la siinayo maraakiibta wadata Calnak Shisheeye oo arji ku soo warsaday in la siiyo Shahaadada Jinsiyadda. Shahaadadaas waxaa kaloo la siinaya maraakiibta lumiyey shahaadadooda Jinsiyadeed. Hay'adaha kor ku xusan waxay go'aamiyaan muddada shahaadada taasoo la xiriirta muddada loo baahdo soo saarista Shariyada Jinsiyadda. Hase yeesh, muddada shahaadada kama badnaan karto hal sano. Rukhsadaha doonyaha iyo Shatiyada maraakiibta yaryraka, marka ay jiraan xaalado degdeg ah ama duruufo gaar ahaaneed, waxaa lagu beddeli karaa rukhsad ku meel gaar ah ama shati sida ay u

kala leeyihiin.

5. Shahaadada Jinsiyadeed waa in la cusbooneysiyyaa marka magaca, culeyska ama nooca iyo tilmaamaha maraakiibta isbeddesho. Ka sokow sababahaas, rukhsadaha doonyaha waa in la cusbooneysiyyaa marka la beddelayo lambarka diiwaanka iyo Shatiyada Maraakiibta yaryarka, waxaa la cusbooneysiinayaa marka la beddelayo magaca markableyga.

6. Wasiirka Kalluumeysiga & Gadiidka Badda, wuxuu leeyahay awood, maamuleed oo ku saabsan soo saarista Xeer-nidaamiyeasha, qaababka iyo hababka kale, kuwaasoo ay kujiraan goynta ajuurada ee loo bixinayo, siinta warqadaha diiwaangelinta ama wax ka beddelidooda ama beddelkooda.

7. Shahaadada Jinsiyadda, Rukhsadaha Doonyaha iyo Shatiga Markab yar waxaa la siinayaa markabka khuseeya, waxaana ka reeban in la iibyo, magac beddelid ama wareejin kale ee ku saabsan warqadda diiwaangelinta. Iibka sharcidarrada ama wareejinta shahaadada Jinsiyadda waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa Shs. So. 15,000/= ama xarig ilaa labo (2) sano ama labadaba.

8. Ka sokow ajuurada diiwaangelinta asalka ee lagu sheegay Farqada 4aad ee Qodobka 43aad ee hoos ku qoran, markab kasta waa inuu bixiyaa ajuurada culeyska sanadka, ee ku tilmaaman Xeer-nidaamiyaha. Ajuurada sanadka waxaa lagu bixinyaa waqtii iyo habka uu tilmaamo Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda. Fulin la'aanta waxay keenaysaa in la tirtiro Shahaadada Jinsiyadda.

9. Shahaadada Jinsiyadda waxaa loo diidayaa arjiilaha keeni waaya cadeyn muujineysa hoggaansan la'aanta Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha habboon.

10. Haddii marakbleyga, hawlgeliyaha, wakiilka ama qareen si rasmi ah wakiil u noqonaya markabka iyo markableyga, lagu helo dembi ku saabsan kхиyaamo ama marag-beeneed si uu u helo shahaado Jinsiyadeed, waxaa loo gudbinayaa hay'adda Garsoorka ee Jamhuuriyadda, ayadoo markabka la haysto oo ay ku jiraan qalabkiisa, alaabta rakiban ama ku dhexta lagu wareejinaya Jamhuuriyadda.

Qodobka 43aad: Shahaadada shuruudaha jinsiyadeed

1. Markab meel kasta ha lagu sameeyee, uu leeyahay Qofka Soomaaliyeed ama muwaadin Shisheeye, wuxuu muteysan karaa in lagu qoro diiwaanka. "Erayga "Muwaadinka" wuxuu saameeyaa dadka, shirkadaha, mashruucyada ganaci iyo Ururada.

2. Markableyga iyo Doonleyda oo aan ahayn Dad Soomaaliyeed iyo kuwo deggan Jamhuuriyadda waa inay magacaaban Wakiil si joogta ah u deggan Jamhuuriyadda. Wakiilkaas waxaa loo qaadanayaa inuu yahaya Xafiiska Rasmiga ee markableyga isagoo xaqiijinaya joogista joogtada ah ee dalka markableyga inta ku saabsan dhammaan arrimaha saameynaya markabkaas, oo ay ku jiraan tallaabooyinka Garsoorka, fulinta shuruucda iyo waajibaadka dhaqaalaha ee lagu fulinya markabka ama mulkileyaasha.

3. Arjiga lagu codsanayo Shahaadada Jinsiyadeed waxaa keenaya markableyggaa, markabka ha joogo Deked Soomaaliyeed am dibadda, isagoo qoraal u soo gudbinayo Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda. Arjigaas waxaa lagu soo lifaaqaya dhaar muujinaysa magaca markabka, culeyskiisa saafiga ah, meesha lagu sammeeyey, taariikhda dhammaadka dhismaha magaca iyo cinwaanka markableyga (da), jinsiyadda markableyga. Ajuuro macquul ah oo loogu socodsiiyayo arjiga, waxaa lagu tilmaamaya Xeer-nidaamiyaha.

4. Ka hor inta aan la bixin Shahaadada Jinsiyadda hay'adda bixinaysa waxay u baahan tahay caddeyn ku saabsan waxyaabaha soo socda:-

b) Shahaadada Markabka.

- t) In warqadaha diiwaangelinta Shisheeyaha la dhiibay ayadoo oggolaansho laga haysto Dawlad Shisheeye.
- j) In Markabku uu yahay mid geli kara badda, sida ku cad Shahaadada Badmaridda ee ay bixisay hay'adda qaabilsan ha ahaato tan Soomaaliyeed ama Shisheeye.
- x) In Markableygu uu bixiyey una gudbiyey Jamhuuriyadda ajuurada culeyska ee diiwaangelinta asalka, ee uu tilmaamay Xeer-nidaamiyaha.
- Kh) Inlagu qoro magaca, lambarka rasmiga, culeyska saafiga, Dekedda Deegaankiisa iyo (haddii loo baahdo khidmadda markabka) dhirirka mowjadaha iyo;
- d) In Shahaadada cabirka ee looga baahdo Sharcigan inay bixiso hay'adda qaabilsan Soomaaliya dhexdeeda ama shisheeye.

Qodobka 44aad: Shahaadada cabirka

1. Ayadoo loo adeegayo ujeeddooyinka diiwaangelinta, goynta xadka mas'uuliyadda iyo ujeeddooyinka kale ee uu tilmaamo Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha shahaadada cabiraka waxay caddeyn u noqonaysaa culeyska markabka, Shahaadadan waxaa lagu haynayaa markabka dushiisa, ayadoo ay ka mid tahay domkumentiga rasmiga ee markabka.
2. Xafiiska uu u tilmaamo Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda, ujeeddooyinkaas waxay cabirayaan markabka arji u soo qorto Sharciga Jinsiyadda. Maraakiibta markii hore dal shisheeye lagu diiwaangeliyey ama aan weligood la diiwaangelinin, hase yeeshay ay hay'ad qaabilsan ku cabirtay dal shisheeye, hay'adda cabirka waxay oggolaan karto cabirka ku qoran Shahaadada Cabirka ee ugu dambeysay ee markabka, tasoo caddeyn u noqoneysa cabirka markabka iyo culeyska oo dhan iyo kan saafiga.
3. Dhammaan qiimaha iyo kharshyada la xiriira cabirka, waxaa bixinyaa markableyga ama Diiwangaelyaha kaddib markii la bixiyey shahaadada.
4. Shahaadada Jinsiyadeed ee markab kasta waxaa lagu caddeynayaa culeyska markabka oo dhan iyo kan saafiga ah.
5. Markabka la diiwaangeliyey sida waafaqsan Sharcigan looma baahna in dib loo cabiro, kaddib markii la bixiyey shahaadada cabirka ee asalka, haddii aan la beddelin culeyska markabka saaran.
6. Habka Cabirka: Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda, wuxuu Xeer-nidaamiyaha ku tilmaamaya habka gaarka ee cabirka maraakiibta,xisaabta culeyska diiwaangashan oo dhan ama kan saafiga iyo qiimeynta culeyska haddii Xeer-nidaamiyuhu uu ku salaysan yahay caadada rasmiga ee cabirka, duruufaha ay tilmaamaan Wakaalado Badeed ee la aqoonsan yahay iyo Dal Shisheeye.

Qodobka 45aad: Shahaadada u qalmidda badmaridda

1. Si loo hormariyo nabadvigelyada nolosha badmaridda, markab kasta oo wata Calanka Soomaaliyeed waa inuu ahaado mid xaaladiisa badmarineed ay fiican tahay intuusan safarka bilaabin. Waxaa lagu rakibaya qalab ku habboon oo la xiriira safarka, marka la hubiyo inay saaran yihiin shaqaale wanaagsan sida uu dhigayo Xeer-nidaamiyaha kaasoo tixgelinaya isticmaalka loogu tala galay iyo badmaridda markabkaas iyo Qodobada Xeerarka Caalamiga ee ay meel marisay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.
2. U qalmidda badmaridda markabka waxaa lagu caddeynayaa shahaadada u qalmidda badmaridda ee uu bixiyo Xafiiska Farsamada Badda oo si toos ah u hoos yimaada Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda kuna saleysan kormeerka

maraakiibtaas. Shahaadooyinka u qalmidda badmaridda oo ay bixiyeen Wakaalado Shisheeye oo si sharci ah u dhisan, maraakiibta markii hore Dawlado Shisheeye warqado ay siiyeen, markaakiibta cusub ee la dhisay oo la kormeeray iyo maraakiibta aan joogin Jamhuuriyadda oo la kormeeray, waa kuwo ansax ah, waxaana oggolaan kara Xafiiska Farsamada ee Badda haddii la keeno caddeyn ku filan in markabka la kormeeray iyo shahaadada u qalmidda badmaridda ee markabka ay tahay ansax taasoo lagu haynaya maraakiibta dushooda kana mid ah warqadaha rasmiga ah ee markabka.

3. Maraakiibta u hoggaansami waaya shuruudaha u qalmidda badmaritaanka oo ku qoran Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha habboon waxaa loo diidi karaa Shahaadada Jinsiyadda ama Rukhsadda Dhoofinta ama soo gelidda Dekedaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu cizaabi karaa markableyga ama hawlgeleyha ganaax ilaa Shs.So. 500.000/= sida waafaqsan Xeer-nidaamiyaha.

4. Wasiirka Kallumeyesiga & Gaadiidka Badda, wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaamiye tilmaamaya kuna saabsan heerarka u qalmidda badmaridda.

Qodobka 46aad: Ku wareejinta diiwaangelin shisheeye

Qofka leh markabka ku diiwangashan sida waafaqsan shuruudaha Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaha doonyahana, inuu markabka ku wareejiyo diiwaangelin shisheeye, wuu wareejin kara haddii aysan jirin waajibaad kale oo aan la fulin sida rahanka ama waajibaad loo leeyahay Jamhuuriyadda ee ku saabsan markabka. Ka hor wareejintaas, markableyga diiwangashan wuxuu iskaga dhiibaya warqadaha markabka, Waaxda Badda ama Wakiilka Diiwaangelinta.

Oggolaanshaha wareejinta diiwaangelinta waxaa la bixinaya kaddib markii ogeysiis la siiyo deynlayaasha iyo dadka rahanka leh, sida waafaqsan Qodobka 47aad faqradda 2aad iyo 3aad ee hoos ku qoran.

Qodobka 47aad: Qalidda markabka oo iskiisa ah

1. Markableyga haddii uu doonayo inuu qalo markabkiisa, ama doontiisa ama markab yar oo aan quwaddiisu ka badnayn 50 GRT, waa inuu muujiyaa ujeeddadiisa iyo codsiga oggolaanshaha Waaxda Badda isagoo dhiibaya warqadaha markabka.

2. Hay'adda qabata caddeyntha kor ku xusan, waxay amreysaa faafinteeda, ayadoo lagu dhejinayo looxa qorista, laguna daabacayo Faafinta Rasmiga, lana wacayo qof kasta ee shaqada ku leh ama danta ugu jirto markabkaas si ay xuquuqdooda u helaan 120 maalmood (haddii uu yahay markab) ama 90 maalmood gudohooda (haddii ay yihiin doonyo iyo maraakiibta yaryarka). Haddii 120 maalmood gudohooda laga billaabtaa taariikhda markii hore la faafiyey caddeyntha, deynlayaashu ay soo gudbiyaan dacwooyinkooda ama haddii la cadeeyo jiritaanka xuquuqda kusaabsan hanti maguуро ah ama damaanad, oggolaashaha waxaa la bixin karaa markii la diido dacwooyinkaas, xukun maxkamadeed oo kama dambeys ah, kadib markii la qanciyoo dhammaan deynlayaasha, xuquuqda la tirtiray ama qofka leh markabka uu fuliyey shuruudaha ay bixisay Waaxda Badda kuna saabsan mushaharooyinka shaqaalahi iyo lacagta uu ku leeyahay maamulka.

3. Oggollaanshaha waxaa kaloo dhiibi karta hay'adda Garsoorka markuu dhinacadaneynaya uu codsado si loo ilaaliyo danaha la caddeeyey ee dhinaca.

4. In kastoo ay jiraan waxyaabaha ku qoran Qodobkan, qalliinka waxaa la oggolaan karaa ka hor fulinta shuruudaha farqadda 2aad ee Qodobkan haddii ay lagama maaarmaan u noqoto sababaha degdegga ah, hase yeeshi ma tirtirkaro xuquuqda deynlayaasha.

Qodobka 48aad: Dhiibista iyo tirtiridda shahaadada diiwaangelinta lumista dhabta ah

1. Haddii markab diiwaangashan uu lumo, ayadoo ay la wareegtay Dowlad Shisheeye ama ay gaareen dhaawacyo aan la kabi karin ama si kaleba laga reebay inuu ku soo noqdo dekdedda uu asal ahaan ka soo baxay, Shahaadada Diiwaangelinta, haddii la haysto, waa in lagu celiyaa Waaxda Badda ama Wakiilka Guddiga Diiwaangelinta waqtii macquul ah gudahii. Hadii shahaadada diiwaangelinta ay baaba'do ama aan la helayn si loo celin lahaa, Waaxda Badda kadib markii ay hubiso in markabku uusan u qalmin khidmadda markab wata Calanaka Soomaaliyeed, waxay tirtiraysaa shahaadada diiwaangelinta kaddib markii ay bixisay ogeysiin macquul ah qofka iska leh markabka ama hawlgeleyaha.

2. Haddii arjiga loo sameeyey diiwaangelinta cusub ee markabka shahaadadiisii hore waa in loo dhiibaa Waaxda Badda ama Wakiilka Guddiga Diiwaangelinta oo arji loo qortay.

Qodobka 49aad: Tirtiridda shahaadada diiwangelinta lumista ku talagalka

1. Kaddib afar bilood iyo hal maalin laga billaabo taariikhda marka ugu dambeeyey oo laga helay markab diiwaangashan haddii uu yahay midka matoorka ku socda ama kaddib sideed bilood iyo hal maalin maraakiibta kale, waxaa loo qaadanaya inuu lumay markabka.

2. Kaddib markii la sameeyo baaritaan macquul ah, xafiiska diiwaangelinta, u dhammaadana waqtiga kor ku xusan wuxuu ogeysiis ahaan u soo saaraya lumitaanka kutalagalka iyo ujeedddada tirtiridda shahaadada diiwaangelinta markabka. Ogeysiiskaas haddii ay suurtowdo, waxaa la siinaya qofka iska leh markabka ama howlgeliyaha.

Qodobka 50aad: Ka tirrtiridda diiwaanada maraakiibta

1. Maraakiibta waxaa laga tirtiraya diiwaanada qoraalka haddii ay jiraan duruufaha soo socda:-

- b) Lumista dhabta ah

- t) Lumistaku talagalka ah

- j) Qallidda markabka

- x) Ka tanasuulidda Calanka – u beddelidda diiwaan-gelinta Dal Shisheeye.

- Kh) Beddelka Xafiiska Qorista.

- d) Dhiibista Shahaadada diiwaangelinta markableyga ama hawlgeleyaha oo iskiisa u dhiibaya.

- r) Bixinla'aanta ajuurada culeyska ee sanadlaho ah.

- 3.(2?) Markii la tirtiro ama la isaga dhiibo sida ku qoran Qodobada kor ku xusan, Waaxda Badda waxay diiwaanka khuseeya ugala noqonaysaa warqadaha markabka, iyadoo ogeysiinta tirtiridda faafinaysa sidii laga rabay.

Qodobka 51aad: Warqadaha markabka

1. Warqadaha markabka oo la rabo in markabka dushiisa lagu hayo waxaa ka mid ah kuwa soo socda:-

- b) Maraakiibta: Shahaadada Jinsiyadda, Shahaadada u qalmidda badmaridda, Shahaadada cabirka, nuqul ka mid ah rahanka markabka oo la sugay haddii uu jiro, tirada shaqaalaha iyo magacooda iyo Buugga loogga iyo Shahaadada badbaadada qalabka ee markabka ee xamuulka qaada oo u habboon markabka iyo adeeggiisa, Shahaadada badbaadada dhismaha markabka xamuulka qaada iyo Shahaadada raadiyaha markabka xamuulka qaada.

- t) Doonyaha: Rukhsada, tirada iyo magacyada shaqalaha j) Maraakiibta yaryarka: Rukhsad.
2. Diiwaanka tirada iyo magacyada shaqaalaha ee uu bixiyey Xafiiskatirakoobka iyo Qorista shaqaalah, waa in laga helaa waxyaabaha soo socda:-
- b) Magaca markabka ama doonta.
- t) Magaca Markableyga.
- j) Taariikhda la qalabeeyey iyo tan laga dhigay.
- x) Liiska shaqaalaha iyadoo la isticmaalayo heshiiska shaqada ee shaqaalaha iyo tilmaanta aqoontiisa, waxbarashadiisa, waajibaadkiisa dusha markabka iyo mushahaarka lagu heshiiyey heshiiska.
3. Liiska shaqaalaha waxaa kaloo lagu qoraya:-
- b) Kormeerkha Xafiiska Farsamada Badda.
- t) Bixinta Canshuuraha Badda iyo waajibaadka.
- j) Fiisada soo gelitaanka iyo bixidda markabka oo lagu dhejiyo deked kasta oo ay ku dhejinayso Hay'adda Badda ama Qunsuliyadda.
4. Buugga loogga waxaa la buuxinaya maalin kasta waxaana ka buuxinaya Kabtanka markabka, kaasoo ka warbixnaya xaaladaha muhiimka ah ee safarka; lacagta la qabtay iyo tan la bixiyey oo la xiriirta markabka iyo shaqaalihiiisa; fulinta shuruudda iyo Xeer-nidaamiyaha badbaadad badmaridda, dembiyada lagu galay markabka dushiisa iyo talaabooyinka la qaaday, dhacdo gaar ah ee ku saabsan markabka, dadka iyo xamuulka saaran inta uu markabka ku jirey safarka, raridda iyo dejinta badeecada, tilmaanta dabeeecada, tayada iyo tirada badeecooyinka, taariikhda iyo meesha raridda dekeda dejinta, magaca markableyga iyo qofka leh badeecooyinka iyo taariikhda iyo meesha ka bixinta. Kabtanku wuxuu kaloo ka warbixinyaa saacadaha badmaridda, tirada wareegga ee halkii daqiq, isticmaalka quwadda, qiyaasta iyo dayactirka makiinadda ayadoo lala tashanayo Injineerka Sare oo dhigaya maalin kasta warbixinta ku saabsan hawlaha la waday awooddiisa. Warbixinnda Buugga Loogga waa inuu Kabtanku saxiixaa maalin kasta.
5. Warbixinadaasi waxay noqon karaan kuwo loo isticmaalo sida caddeyn lid ku ah markableyga, haddii idil ahaan loo soo qaddimo iyadoo aanu qayb ka mid ah nuxurkooda reebin dhinaca ka faa'ideysanaya waxtarka warbixinadaas.
6. Kabtanka markabka, Sarkaal kale, Markableyga, Hawlgeliyaha ama qof kale oo lagu helo dembi ku saabsan been abuurka warqadaha ama soo saaris caddeymo ama warbixinno loogudbinayo hay'adaha, haddii falkaas aysan keenayn dembiyo ka culus, waxaa lagu ciqaabayaa Xariga ilaa afar (4) sano ama Ganaax ilaa Shs. So. 500,000/= ama labadaba, haddii uusan Sharci kale dhigin ciqaab intaas ka badan.

QEYBTA V - BOLIISKA BADDA – SOO BIXINTA IYO BAARISTA

Qodobka 52aad: Imaanshaha markabka

1. Maraakiibta shisheeyaha oo soo gelaya Deked ka mid ah Jamhuuriyadda waa inay u hoggaansanaadaan dhammaan amarrada Qodobkan iyo sidoo kale waa inay keenaan Buugga Caafimaadka iyo Warqadaha Aqoonsiga markabka iyo Dekedda ugu dambeysay ee uu markabku ku xirtay. Lahaanshaha markab ama doon wadata Calan Soomaaliyeed deked ka mid ah Jamhuuriyadda ama haddii iskii ama khasab ku soo galo, Kabtanka markabka ama Doonta, ka sokow fulinta Xeer-nidaamiyaha caafimaadka ee lagu tilmaamay Qaybta VIaad, waa inuu fuliyaa amarrada hoos ku qoran:-
- b) In la siiyo hay'adda badda ee timaada markabka dushiisa warbixin la xiriirta macluumaadka looga baahdo aqoonsiga markabka, magacyada Kabtanka, Markableyga

io Wakiilkiisa, tirada Shaqaalaha, guud ahaan Tayada iyo Nooca badeecooyinka saaran markabka iyo kan laga soo dejinayo, tirada rakaabka fuushan markabka iyo tirada rakaabka degaya.

t) In la siyo markii lasoo cadsado, warqadaha markabka oo ay ku jiraan buugaagta Loogga ee markabka ama doonta iyo liiska shaqaalaha oo ay kormeerayso hay'adda Badda kuna dhejinaysa fiisaha meesha ku xigta warbixinta ugu dambeysay ku qoran tahay buugga.

j) Inla caddeeyo dhibaatooyinka markabka, badeecooyinka, shaqaalaha ama rakaabka iyo wixii dhacdo gaar ah oo dhacay intii lagu jiray safarka, Hay'adda Badda waa inay akhrisaa warbixinta, haddii ay la noqotana ay bilowdaa baaritaan xagga xaqiiqdii la soo sheegay.

KABTANKA markabka waa inuu baaristaas gacan ka gaystaa isagoo qaadaya tallaabada habboon sida wargelinta Hay'adda Badda haddii makabku uu ku shisheeye xagga dhibaatooyinka ama dhacdooyinka gaarka ah oo waxyeelo gaarsiin kara socodsinta markabka.

2. Haddii baaristu ay noqoto lagama maarmaan Kaptanku waa in uu macluumaadka laga cadsaday u soo gudbiyaa Hay'adda Badda ama Qunsuliyadda, taasoo ku saabsan safarka isagoo u diraya shaqaalaha iyo rakaabka wax uga og macluumaadka.

Qodobka 53aad: Dhoofidda maraakiibta

1. Markab kasta ama dooni kasta oo wadata Calanka Soomaaliyeed kama dhoofi karo deked Soomaaliyeed ama kan shisheeyeba haddii uusan haysan fiisaha bixitaanka oo lagu dhejiyey liiska shaqaalaha, Hay'adda Badda ama Qunsuliyadda. Baahida fiisada waxaa lagu fulin karaa soo saaridda warqadaha dhoofka oo ay bixisay Hay'adda Badda ee qaabilsan.

2. Fiisada lama bixin karo haddii markableyga ama Kaptanku aysan fulin waajibaadka laga doonayey kuna qoran nidaamka iyo xeer-nidaamiyaha ku saabsan nabadgelyada badmaridda ama aysan fulin waajibaadka ku saabsan caafimaadka ama furdooyinka ama ay bixin waayeen canshuurta ganaaxa ama lacagta dammaanada ee laga doonayey.

3. Fiisada dhoofka oo la siiyey maraakiib ama doonyo shisheeye sida ku cad rukhsadda dhoofka ee Hay'adda Badda waxaa la bixin karaa haddii la fuliyo nidaamka iyo Xeer-nidaamiyaha la xiriira Boliiska iyo Furdada lana bixiyey canshuuraha badda iyo lacagta furdada iyo ganaaxa ama lacagta dammaanada oo laga rabay.

4. Kaptanku ama sarkaal kale oo haya hoggaanka markabka lagu helo dembiga fulin la'aanta si kas ah shuruudaha soo gelidda iyo dhoofka oo ku xusan sharcigan iyo xeer-nidaamiyaha waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa Shs.So 100,000/=.

Qodobka 54aad: Ilaalinta anshaxa markabka dushiisa

1. Dhammaan dadka fuushan markabka awood kasta ha lahaadeene waxay hoos imaanayaan awooddha kaptanku Hoggaamiyaha.

2. Shaqaalaha markabka kama bixi karaan ayagoo aan ogollaansho ka haysan Kaptanku. Haddii markabku uu galoo dhibaato, shaqaalaha waa iney isla kaashadaan sidii loo badbaadin lahaa markabka, rakaabka iyo badeecadda iyo haddii markabku uu jajabo, shaqaaluhu waa iney ku dadaalaan samatabixinta markabka sidii hadba loo baahdo.

3. Kaptanku markabka, Hoggaamiyaha Dekedda, Wakaaladda Dekedaha iyo Qunsuliyadda dibadda waxay awood u leeyihiin iney ka qaadaan tallaabooyin anshax ah shaqaalaha markabka iyo shaqaalaha kale oo hoos yimaada hoggaankooda. Dadka diida ama daahiya fulinta amarada, ama ay u hogaaansami waayaan nidaamkooda ku saabsan hawlaho dekedda, ku shaqeeyaa kala danbeyn la'aanta ama taxadar la'aan u fuliyaan

waajibaadkooda, waxaa loo qaadanayaa inay ku xadgudbeen xeerarka anshaxa, waxaana lagu qaadayaa ciqaabta soo socota:-

- b) Shaqaalaha markabka waxaa lagu hayn karaa markabka dushiisa muddo aan kabadeyn shan (5) cisho. Shaqaalaha iyo dadka kale waxaa laga goyn karaa mushaharkooda muddo aan ka badneyn tobantoban (10) maalmood.
- t) Rakaabka ku xad gudba xeerarka anshaxa si culus waxaa la siinayaa digniin; fulin la'aanta digniinta waxaa ka dambeynaya xayiraadda socodka markabka dushiisa isagoo laga reebayo inuu joogo dheegga markabka muddo kabaden shan saacadood maalin kasta ilaa shan maalmood.

Qodobka 55aad: Cabashooyinka shaqaalaha iyo rakaabka

1. Shaqaalaha markabka ama rakaabka, mid kasta wuxuu cabasho u keensan karaa hay'adda ama Qunsuliyadda kuna saabsan tallaabooyinka anshaxa ee uu ku qaaday Kabtanka ama Sarkaal kale, markabka dushiisa inta ku saabsan waajibaadkiisa.
2. Kabtanka kama diidi karo si toos ah ama si dadbanba qofka doonaya inuu soo cawdo, gudbinta cabashadiisa hay'addaha kor ku sheegan hortooda haddii baahi degdeg ah aysan qasab ka dhigeyn joogitaankiisa markabka dushiisa.
3. Shaqaalaha markabka oo aan ka yarayn saddex meelood hal meel shaqaalaha la soo kireeyey, waxay cabasho la xiriirta u keensan karaan xagga tayada iyo tirada alaabta quudka ee saaran markabka.
4. Hay'adda Badda ama Qunsuliyadda kadib markay dhegeysatay dacwooyinka xaqijiisana xaaladda dhabta ah, waxay amri kartaa Kabtanka markabka inuu qaado si degdeg ah tallaabooyinka ugu habboon ee lagu hagaajinayo xaaladda. Haddii la fulin waayo kuwaas, waxaa la qaadayaa tallaabooyin garsoor ama maamul si loo xaliyo.

Qodobka 56aad: Rarida sharci darada ee badeecooyinka khatarta ah

1. Markii badeecooyin khatar ah si sharci darro ah lagu raro markabka, Kabtanka markii uu ogaado arrintaas waa inuu qaadaa tallaabooyinka habboon ee lagama maarmaanka ah oo ay ku jiraan amarrada dejinta badeecooyinkaas, ama haddii markabku uu ku jiro safarka badda, waa inuu alaabtaas ka dhigaa kuwo aan khatar keeni karin ama uu kabaabi'iyo haddii aysan suuro gal noqon ku haynta alaabtaas markabka dushiisa ilaa la gaarayo dekedda ugu sokeysa. Kabtanka waa inuu qaadaa isla tallaabooyinka markii si sharci ah la rarayo badeecooyinka, hase yeeshee qaadistooda ay u noqoneysa khatar markabka, dadka ama badeecooyinka.
2. Badeecooyinkaas markii lagu hayo markabka dushiisa ilaa dekedda ugu horeysa, Kabtanka waa inuu u gudbiyaa Hoggaamiyaha Dekedda ama Qunsuliyadda si loogu xannaaneeyo bakhaarada furdada, gacantana loogu geliyo kuwa shaqada ku leh.
3. Kabatanka markabka, Sarkaalka, Shaqaalaha markabka ama qof kale oo si kas ah u raro hub, rasaas ama alaab kale oo khatar ah ama uu kaalmeeyo qof kale xagga koridda markabka si uu u galo dembi, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka badneyn shan (5) sano ama ganaax ilaa Sh. So. 500,000/= ama xarig iyo ganaax labadaba.

Qodobka 57aad: Geerida ama waayidda dadka inta lagu jiro safarka

1. Haddii ay dhintaan ama la waayo dad inta lagu jiro safar, Kabtanka markabka isagoo la kaashanaya laba marqaati, waa inuu isku dayaa baarista sababta geerida ama waayidda. Haddii geerida ay sabab u tahay jiro la isugu daarayo oo lagu daari karo dad kale ee fuushan markabka, Kabtanku waa inuu qaadaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee loogu karantiilayo jirada ayadoo la ogeysiinayo shaqaalaha dekedda kale ee lagu xirayo markabka.

2. Kaddib markii ay dhamaato baarista sababta geerida ama waayidda, Kabtanku, ayagoo goobjoog u ah marqaatiyaasha ugu kaalmeeyeen arrintaas, wuxuu warbixin kaga siinayaan xaqiiqda Hay'adda Dekedda ama Qunsuliyadda, dekeda dambe ee uu markabka ku xiranayo. Ogeysiis ku qoran macluumaad shakhsiyeed ee ku saabsan qofka geeriyooyday ama la waayey, iyo macluumaad kale ee arrinta khuseysa waxaa loo gudbinayaan hay'adda habboon oo ka tirsan meesha uu ugu dambeystii degganaa qofka geeriyooyday ama la waayey.

Qodobka 58aad: Dhoofinta badmaaxiinta iyo muwaadiniinta soomaaliyeed

1. Dalalka shisheeye oo aysan joogin Qunsuliyadda, Kabtanka markabka wata Calanka Soomaaliyeed waa inuu markabkiisa magangelyo ku siyyaa soona dhoofiyaa badmaaxa ama muwaadin Soomaaliyeed laga tegay ama xayirmay oo uu la kulmo, marka hore ogeysiinaya haddii ay suurtowdo, Qunsuliyadda ugu sokeysa.
 2. Hase yeeshi, Kabtanku waa in marka hore isku dayaa inuu hubiyo duruufta badmaaxa ama muwaadinka iyo xaaladdiisa waxaana ka reeban inuu kaalmeeyo qof ay baadigoobayaan Hay'adda dalka dembi uu galay awgiis.
 3. Kabtanka markabka wata Calan Soomalaiyeed oo u socdo deked Soomaaliyeed oo fulin waaya codsiga Qunsuliyadda oo ku siinta magangelyada iyo dhoofintiisa sida ku xusan Qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa Shs. So. 75,000/=.

Qodobka 59aad: Lumidda warqadaha markabka

Hadii ay lumaan warqadaha markabkaKabtanku waa inuu Dekedda ugu horreysaa ee uu ku xirto markabka,warbixin uga siiyaa Hoggaamiyaha Dekedda ama Qunsuliyadda oo u sameynaysa warqado ku meel gaar ah si uu safarkiisa u sii wato.

Qodobka 60aad: Nidaamka farsamada

1. Nidaamka ku lug leh Calaamadaha Badda guud ahaan, baajinta shilalka iyo socodsiinta raadiyaha badda iyo qalabka isgaarsiinta saaran markabka dushiisa, waxaa lagu sheegayaa Xeer-nidaamiye uu soo saaray Wasiirkha Kalluumaysiga iyo Gaadiidka Badda, isagoo la kaashanaya Wasaaradaha kale ee arrintu khuseyso.
 2. Qof kasta oo ku xadgudba nidaamka Sharcigan ama Xeer-nidaamiyaha khuseeya arrimaha kaalmeynta badmaridda, isticmaalka qalabka isgaarsiinta, nalalka ama qalabka kale ee calaamadaha, waxaa lagu ciqaabaya xarig aan ka badnaynshan (5) sano ama ganaax ilaa Shs, So, 100,000/= ama xarig iyo ganaax labadaba.

QAYBTA VII - ADEEGYADA KONTOROOLKA CAAFIMAADKA

Qodobka 61aad: Adeegyada kontroolka caafimaadka badda nidaamka guud

1. Nidaamka socodsiinta adeegyada la xariira kontroolka caafimaadka badda waxaa loo dejiyey sidii looga gaashaaman lahaa cudurrada faafa ayadoo la kontroolayo soo geliddajamhuuriyadda dad looga shaki qabo inay qabaan cudur cayn kaas ah ayadoo lagu sameynayo kormeer lanafulinayo xeer-nidaamiyaha caafimaadka oo ku lug leh maraakiibta soo gelaysa dekedaha Soomaaliyeed.
 2. Adeegyada kontroolka caafimaadka badda wuxuu hoos imaanayaa hay'adda caafimaadka guud taasoo la soo marinayo waaxda badda ee dekedaha, khidmadaha loo qabanayo maraakiibta ku xiran dekeda iyo kuwa soo gelaya ama dhoofayaba.
 3. Dekedaha Jamhuuriyadda dhixdooda, hadii loo baahdo waxaa loo magacaabayaa sarkaal caafimaad.
 4. Saraakiisha caafimaadka waxay sameynayaan fulinayaanna baaritaanno iyo kontrollo

la xiriira barnaamijka kontroolaka cudurrada sida ku xusan sharcigan iyo xeernidaamiyaha ayagoo hubinaya in dhammaan tallaabooyinka caafimaadka la qaaday dekedaha gudahooda iyo maraakiibta ku xiran dushooda. Saraakiisha caafimaadka waxay fulinayaan ayagoo isticmaalaya awoodda xaringga ee hoggaamiyaha dekedda iyo Boliiska Dekedda. Sarkaalka caafimaadka waa inuu si deg deg ah caafimaadka guud iyo waaxda badda u soo sheegaa xaqiq kasta la xiriirta caafimaadka guud iyo xadgudub kasta ee nidaamka caafimaadka isagoo isla markaas ku talinaya tallaabooyinka lagama maarmaanka ee loo baahan yahay in la qaado.

5. Dekedda uusan joogin sarkaal caafimaadka, khidmadda kontoroolka caafimaadka waxaa loo wakiilanayaa kalkaliyeeyasha caafimaadka ayadoo la tixgelinayo habka iyo xayiraadyada ay gooyaan waaxda caafimaadka guud oo isla markaas magacaabaya takhtar qalliinka ah joogana meel dhow si uu u kormeero shaqaalaha caafimaadka, dhex galana xaaladaha culus haddii loo baahdo.

Qodobka 62aad: Codsiga oggolaanshaha soo gelidda dekedda dhexdeeda (pratique)

1. Dhammaan maraakiibta soo geleysa Jamhuuriyadda Dimquraadiga Soomaaliya waa in la geliyaa karantiil caafimaad (Quarantine) ilaa loo oggolaado soo gelidda dekedda. Kaptannada maraakiibta iyo doonta Qaranka ama shisheeye oo uu ku jiro kabtananada maraakiibta ciidamada badda, marka ay soo gelayaan deked ka mid ah Jamhuuriyadda waxaa waajib ku ah in markabka laga go'doomiyo, lagana taago calan leh midab huruud ah oo muujinaya karantiil caafimaad sida ku xusan sharciga calaamadaha caalamiga ah ka hor inta aan loo oggolaan soo gelidda dekedda.

2. Si looga sii daayo karantiilka ayadoo la bixinayo ogollaanshaha soo gelida, kaptanku markabaka waa inuu codsigiisa u gudbiyaa hoggaamiyaha dekedda oo tegi doona markabka dushiisa.Kaptanku waa inuu u soo gudbiyaa caddeyn caafimaad iyo buugaagta caafimaadka ee uu haysto, hay'adda badda, oo la kaashaneysa sarkaalka caafimaadka dekedda.

Qodobka 63aad: Karantiilka dekedaha

Kaptanku hadduu doono ma codsanayo oggolaanshaha soo gelidda ee lagu xusay Qodobka hore, baddana ma geli karo, waa inuu hay'adda badda u soo sheegaa u jeeddadiisa markuu soo gelayo isagoo u soo gudbinaya dokumentiga looga baahan yahay sharcigan iyo xeer-nidaamiyaha, isagoo markabka ku xayiraya meel gaar ah, kana taagaya calan huruud ah oo tilmaamayaa karantiilka inta uu joogayo, maraakiibta shisheeyahana ee ciidamada badda muddada kama badnaan karto shan (5) maal mood nidaam ahaan marka laga reebo heshiis diblomaasiyeed ama duruufo khasab ah (Force Majeure).

Qodobka 64aad: Caddeyn ta caafimaadka

Ka hor codsiga soo gelidda, kaptanku waa inuu kontroolaa xaaladda caafimaadka ee dadka saaran markabka waana inuu sameeya caddeyn caafimaad isla markaasna saxiixa, waxaana la saxiixayaa sarkaalka caafimaadka ee markabka haddii uu jiro, caddeyn ta waa inay tilmaantaa taariikhda iyo meesha uu markabku ka yimid, dekedaha uu dhexda ku soo maray iyo taariikhdooda, tirada rakaabka iyo shaqaalaha, xaaladda caafimaadka ee markabka, jirro dhacday intii safarka lagu jiray iyo warbixin la xiriirta xaaladda caafimaadka iyo daaweynta rakaabka iyo shaqaalaha intii badda lagu jiray.

Hay'adda badda, hadii ay shaki ka qabto cadeynta ee uu sameeyey kaptanku, waxay weydiin kartaa rakaabka ama shaqaalaha.Haddii maraakiibta ay yihii kuwo dagaal,

caddeynta kaptanka waxaa loo qaadanayaa inay tahay mid sax ah, marka laga reebo duruufo gaar ah.

Qodobka 65aad: Oggolaanshaha gelidda

1. Hay'adda Badda ayadoo la kaashanaysa sarkaalka caafimaadka, waa inay si deg-deg ah u oggolaato gelitaanka kaddib markii ay hubsato in dhammaan buugaagta caafimaadka ay hagaagsan yihiin.
2. Oggolaanshaha gelitaanka dib baa loo dhigi karaa ama la diidayaa haddii ay jiraan waxyabaha soo socda:-
 - b) Haddii tirada dadka fuushan markabka ay ka duwan tahay tan ku qoran warqadaha markabka.
 - t) Haddii badeecadda dhammaanteed ama qaybteed ay ka kooban tahay alaab looga shaki qabo inay waxyelo u geysan karto caafimaadka guud.
 - j) Kaptanku uu helay warbixn abuureysa welwel inta lagu jiray safarka.
 - x) Sarkaalka caafimaadka ama Hay'adda Badda ay haysato caddeyn in jirradu ama geeridu ka timid cudur dhashay intii safarka lagu jiray.
- Kh) Markabku uu dhawaan ku xirtay deked ay waaxda caafimaadka guud kaga ogayd inuu ka dilaacay cudur faafa ama la ogyahay inaysan lahayn waxyaboo lagu kontorooli karo cudurrada.
3. Kabtanaka markabka ama sarkaalka haya hoggaanka markabka wata Calanka Soomaaliyeed ama mid shisheeye ah oo ku xadgudba nidaamka ku saabsan karantiilka, tillaaboyinka kontoroolka caafimaadka ama uu si kas ah uu iska dhegatiyo amarrada hay'adda qaabilan kontoroolka caafimaadka ama si kas ah u oggolaada degidda dad buka isagoo aan dhowrin tallaaboyinka taxadarka, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka badnayn hal (1) sano ganaax ilaa Shs. So. 50,000= ama labadaba.

BUUGA III - LAHAANSHAHADHO RAKIBAADDADHO MARAAKIIBTA

QAYBTA I - LAHAANSHAHADHO MARAAKIIBTA

Qodobka 66aad: Nidaamka guud

1. Haddii aan si kale loo sheegin maraakiibta waxaa lagu dabaqayaa shuruucda ku saabsan hantida guurta ee shaqsiga ah.
2. Qalabka qodista, qalabka kale, qalabka hagaajinta, mobilka guud ahaan wixii kale ee ku rakiban markabka ama lagu isticmaalo dayactirka, safeynta qurxinta markabka waa qeyb ka mid ah markabka.

Qodobka 67aad: Wada lahaanshaha

1. Saamiyada ka qeyb galka lahaanshaha markabka waxaa lagu tilmaamayaa qeybo (FRACTIONS).
2. Wax kasta oo saameeya danta guud ee dalka wada leh markabka, go'aanada ay gaareen intooda badan waa iney u hogaansanaadaan inta yar, aqlabiyyad waxaa lagu gaaraa codka dadka wada leh oo metelaya in ka badan nus qiimaha markabka, hase yeeshi go'aannada ku saabsan iibka ama rahanka markabka waxaa lagu gaarayaa heshiis ay wada gaaraan ugu yaraan saddex meelood laba meel dadka matalaya oo metalaya qiimaha markabka.
3. Hase yeeshi hay'adda garsoorka markii ay codsadaan dadka wada leh oo metelaya ugu yaraan nus qiimaha markabka ama haddii ay jirto baahi degdeg ah oo culus, ugu yaraan afar meelood hal meel qiimaha markabka waxay oggolaan kartaa iibka ama

rahanka markabka kadib markii la siiyo ogeysiis dhamaan dadka wada leh ayagoo la siinayo fursad dhegeysi.

Qodobka 68aad: Mas'uuliyadda la haansho - qeyb ahaaneed

1. Qofka qeyb ku leh markab wuxuu masu'uul ka yahay saamiga uu ku leeyahay sida lagu daabacay diiwaanka maraakiibta.
2. Qof kasta oo qeyb ku leh, oo aan raali ka ahayn fal uu sameeyey maamulka wuxuu ka bixi karaa mas'uuliyadda la xiriirta falkaas waxa loo qeybinayaad dadka kale oo leh ayadoo la raacayo saamiyada sida ay u kala leeyihiin.

Qodobka 69aad: Awoodaha maamulaha hawlgeliyaha ah

Maamulaha ahna hawlgeliyaha oo ay magacaabeen dadka leh lahaanshaha qeyb ahaan wuxuu fulin karaa dhammaan falalka maamulka. Awoodiisa waxay ku koobnaankaraan go'aan qoraal ah oo ay gaaraan aqlabiyadda dadka leh lahaanshaha.

Qodobka 70aad: Wareejinta iyo rahanka saamiga

Qof kasta oo qeyb ku leh, aydoo la tixgelinayo xuquuqda mudnaanta leh wuxuu si xor ah u wareejin karaa saamigiisa uu ku leeyahay markabka isagoo iibinaya, hibeynayana ama si kale u wareejinaya, wuxuu saamigiisa rahan u dhigi karaa marka keliya oo ay oggolaadaan aqlabiyadda dadka leh wada lahaanshaha.

Qodobka 71aad: Xuquuqda mudnaanta ee dadka leh wadalahaanshaha

1. Haddii qof qeyb ku leh uu soo bandhigo inuu saamigiisa markabka la wada leeyahay iibka, wuxuu noqonaya mid aan waxba ka jirin xataa haddii loo firsho qofka saddexaad oo leh niyadsami, oo gatay haddii aan markii hore la siinin ogeysiis ku saabsan iibka dhammaan dadka leh wada lahaanshaha ama lahaansha guud, ugu yaraan tobant iyo shan (15) maalmood ka hor taariikhda ugu dambeysa oo loogu tala galay iibka.
2. Toban iyo shan (15) maalmood gudohood laga bilaabo maalinta la bixiyey ogeysiiska, hal ama ka badan dadka qeyb ku leh waxay ku dhaqmayaan xuquuqda mudnaanta, saamiga la iibinayo haddii aan isla wakhtiga gudahiisa la fuliyey iibka lacagtan la bixiyey.
3. Dadka qeyb ku leh dhexdooda waxay qaybinayaan saamigooda mudnaanta leh sida waafaqsan saamiyadooda haddii dhammaantood ay isticmaalayaan xuquuqdooda mudnaanta ah ama sida waafaqsan saamiyada dadka markii hore isticmaalay xuquqdaas haddii aysan dhammaan dadka qeyb ku leh isticmaalin xuquuqdooda mudnaanta ah.

Qodobka 72aad: Qaabka falalka la xiriira lahaanshaha markabka - baahida qoraalka

1. Fal ama heshiis kasta ha ahaado mid lacag la'aan ah ama midka lacageed, dhammaan xukunnada kama dambeysta ah iyo guud ahaan dhammaan falalka ujeedadoodu tahay dhismaha, wareejinta, caddeynita, wax ka bedellidda ama tirtiridda xuquuqda ku saabsan markab diiwaangashan, waa inay ahaadaan qoraal si loo fuliyo sharci ahaan.

Qodobka 73aad: Faafinta *lahaanshaha* ku saabsan falalka lahaanshaha markabka

1. Falalka lagu tilmaamay Qodobka hore qiimo malaha dhinacyada saddexaad haddii aan dadweynaha loo bandhigin ayadoo lagu dhigayo diiwaanka markabka, doonta ama markab yar.
2. Faafinta ku saabsan maraakiibta iyo doonta waa in lagu dhammeystiraay agaagoo

falalka kor ku xusan lagu dhigayo shahaadada jinsiyadda iyo rukhsadaha sida ay u kala leeyihiin. Faafinta waxaa lagaga codsanayaa guddiga qorista. Haddii markabka uusan ku dhignayn diiwaanka qorista.

Ogeysiiska kor ku xusan waxaa sameynaysaa hay'adda badda ama qunsuliyadda ee meesha laga helo markabka.

Qodobka 74aad: Nidaamka kala horraynta

Haddii falal kala geddisan lagu daabaco sida waafaqsan qodobada hore, kala horreynta waxaa la isugu xisaabtamaya taariikhda ku qoran diiwaanka markabka, doonta ama markab yar ayadoo la siinayo mudnaanta kowaad kuwa marka ugu horreysa lagu dhigay. Haddii uu jiro khilaaf ka dhexeeya qoraallada diiwaanka iyo shahaadada jinsiyadda ee maraakiibta ama rukhsadaha doonta, waxaa tixgelin la siinaya qoraallada diiwaanka.

Qodobka 75aad: Tirtiridda iyo wax ka beddelidda qoraalada diiwaanka

1. Qofka ka soo dacwooda qoraal, wax ka beddelid ama tirtirid ku saabsan diiwaanka markabka oo uu ku tuhmo in si khalad ah loogu dhigay waxaa loo oggollaan karaa tirtiridda ama saxiddeeda ayadoo ay sidaas ku heshiyeen dhinacyadu ama lagu saxay amar maxkamadeed.
2. Tirtirid ama wax ka bedellid laguma dabaqi karo dhinac saddexaad oo leh niyadsami xuquuqdiisana la diiwaangeliyey ka hor tirtiridda ama wax ka beddelidda.

QEYBTA II - HAWLGELIYAH A MARAAKIIBTA

Qodobka 76aad: Qeexidda hawlgeliyaha markabka

1. Hawlgeliyahu waa qofka u isticmaala markabka hal safar ama ka badan ama u isticmaala ujeedooyinka loogu talagalay isagoo u gudbinaya waxyaabaha daruuriga ah ayadoo aan la firinayn inuu yahay markableyga iyo in kale ama uu isagu laftiisa hayo hoggaanka markabka ama uu qof kale u dhiibto.
2. Hawlgeliyaha aan ahayn markableyga ka hor intaanu bilaabin hawshiisa, waa inuu u sameeyaa caddeyn guddiga qorista, caddeyntaas waxaa kaloo sameynaya qofka leh markabka.
3. Haddii caddeynta ay isla wakhtigii sameeyaan hawlgeliyaha iyo markableyga, guddiga qoristu waxay oggolaanaysaa caddeynta hawlgeliyaha isagoo afka ay kaga hor sheegeen markableyyga iyo hawlgeliyaha. Haddii kale, guddiga qoristu wuxuu oggolaan karaa caddeynta hawlgelyaha mar keliya ee uu helo nuqul sax ah oo ka mid ah heshiiska dhigaya habka isticmaalka markabka, caddeynta hawlgeliyaha waxaa lagu qoraya diiwaanka markabka.

Qodobka 77aad: U qaadashada hawlgeliyaha

1. Haddii aysan jirin caddeynta hawlgeliyaha ee ku tilmaaman Qodobka hore, markableyga waxaa loo qaadanayaa inuu yahay hawlgeliyaha haddii aan caddeyn kale laga bixin arrintaas.
2. Haddii ay jiraan markabley dhowr ah, waxaa loo qaadanayaa inay yihiin hawlgeliyeaal sida ay u kala leeyihiin saamiyadooda ku saabsan wada lahaanshaha, haddii aan la bixin caddeyn ka duwan.

Qodobka 78aad: Magacaabidda wakiilka

Marka hawlgeliyuhu uusan degganayn ama joogin meesha qorista markabka ama

doonta ama hawlgeliyuhu markii uu yahay kaptan, hawlgeliyaha waa inuu magacaaba qof deggan meesha oo wakiil uga noqonaya gudiga qoritaanka hortiisa.

QEYBTA III - MAS'UULIYADDA MARKABLEYGA IYO HAWLGELIYAH IYO XADKEEDA

Qodobka 79aad: Mas'uuliyadda hawlgeliyaha

1. Hawlgeliyaha wuxuu mas'uul ka yahay anshaxa iyo falalka kaptanka, shaqaalaha, wadaha haddii uu qortay hawlgeliyahu ama qof kale ee u qortay ama dadka leh markabka oo u adeegaya markabka. Hawlgeliyuhu wuxuu kaloo mas'uul ka noqonaya waajibaadka uu leeyahaya kaptanka dhammaan arrimaha ku saabsan markabka iyo safarka.
2. Ayadoo ay jirto faqradda tan ka horeysa ee Qodobkan, hawlgeliyuhu mas'uul kama noqonayo dacwooyinka ka dhasha ka leexashada safarka ayadoo la fulinayo waajibaadka kaptanka oo la xiriira kaalmada samatabixinta ama waajibaadka kale ee uu sharciga u xilsaaray kaptanaka.

Qodobka 80aad: Xaaladaha xadka mas'uuliyadda badeecooyinka

1. Markableyga, kireeyaha, maareeyaha ama hawlgeliyaha markabka ku socda badda wuxuu xaddeyn karaa mas'uuliyaddiisa sida waafaqsan qaybta IIIaad Qodobka 82aad ee sharcigan kuna saabsan dacwooyinka qandaraasleyda ama dhinacyada seddexaad iyo hay'adaha dawladda hadii ay dhacdo khasaaro hanti (Dhismayaasha Dekedaha) ama geeri ama dhawac shekhsiyeed ka dhaco markabka dushiisa ama khasaarahaas, geerida ama dhaawaca, shakhsiyeed ay ka timaado toos badmaridda iyo ku shaqeynta markabka. Xadku wuxuu kaloo saameeyaa khasaaraha ka dhasha daahidda qaadista badeecooyinka xagga badda.
2. Qofka leh markabka wuxuu xaqq u leeyahay xadka mas'uuliyaddiisa xaaladaha ku qoran faqradda 1aad ee Qodobkan xitaa xaaladaha markii mas'uuliyaddiisa ay ka dhalato ayadoo aan jirin wax caddeyn ah oo ku saabsan oo gef uu saameeyey markableyga ama dadka uu anshaxooda mas'uul ka yahay.
3. Xadka mas'uuliyadda lagu tilmaamay Qodobkan ma saameyn karo noocyada dacwooyinka hoos ku qoran:-
 - a) Dacwooyinka samatabixinta ama dacwooyinka dhigaalada ee khasaaraha guud ee badda (General Average).
 - t) Dacwooyinka kaptanka, shaqaalaha markabka ama adeegayaasha markableyga oo waajibaadkooda ay ku xiran yihiin markabka, oo ay ku jiraan dacwooyinka dhaxaltoo yadooda, wakiilada shaqsiyeed ama kuwa mas'uuliyadooda ay u xilsaaran tahay.
 - j) Dacwooyinka ku saabsan khasaaraha nuklerka.
4. Qofna ma koobi karo mas'uuliyaddiisa haddii ay caddaato in khasaaruhu uu ka dhasho falama gef shaqsiyeed oo dhacay ayadoo ujeedadiisu ahayd in la gaarsiyo khasaarahaas ama loo sameeyey si taxadar la'aan ah iyo ayadoo la ogaa in khasaarahaas uu ka dhici karay falkaas ama gefkaas.
5. Haddii markableygu uu xaqq u leeyahay inuu furo dacwad ka soo horjeeda oo lid ku ah dacwoodaha kana dhalatay isla falkaas, labada dacwo waxaa la isugu hordhigayaa laysuguna xisaabtamayaa ayadoo xadka lagu dabaqayaa haraaga haddii uu jiro.
6. Falka lagu codsanyo xadka mas'uuliyadda ma noqonayo oggolaanshaha mas'uuliyadeed.

Qodobka 81aad: Ujeeddada xadka mas'uuliyadda

1. Xuduuda mas'uuliyaddeed ee ku tilmaaman Qodobka 82aad ee qeybtan waxaa lagu dabaqayaa isku darka dacwooyinka shaqsiga iyo hantida oo ka dhasha fal keliya ayadoo aan la fiirin dacwooyinka kale ee ka dhashay ama ka dhalan kara falalka kale.
2. Haddii isku darka dacwooyinka ka dhasha falka keliya ay ka bataan xuduudda mas'uuliyadeedwaxaa loo qaadanayaan iney ku kooban yihiin hal sanduuq oo keliya.
3. Lacagta sidaas loo uruuriyey waxaa loo heynayaa bixinta dacwooyinka ku saabsan xuduudda Mas'uuliyadda oo lasoo oogi karo.

Qodobka 82aad: Lacagta xadka

1. Lacagta xadka waxay ku saleysan tahay culeyska duuban (DWT) ee markabka oo lagu xisaabiyeey sida waafaqsan nidaamka Sharciga ee Cabirka Culeyska Maraakiibta ee 1969⁶, iyo Qeybta IVaad, Qodobka 44aad ee sharcigan. Qiimaha xadka waxaa saldhig u ah xuquuqda qaadashada gaar ahaaneed (SDR) sida uu caddeeyey sanduuqa lacagta ee caalamiga (IMF) sidii lacagta xadka loogu beddeli lahaa lacag soomaaliyeed. Qiimaha xaqa qaadashada gaarahaaneed waxaa lagu xisaabinayaan taariikhda sanduuqa xadka la dhisay ama lacagta la bixiyey ama la bixiyey dammaanadda.
2. Markableygu wuxuu koobi karaa mas'uuliyaddiisa ku saabsan dacwooyinka khasaaraha hantida ama kan shakhsiyeed ilaa lacagta hoos ku qoran:-
 - b) Haddii dhacdadu ay saameyso dacwad ku saabsan khasaaraha naf ama dhaawac shakhsiyeed lacag dhan oo isku duubka ah waxey ku saleysan tahay qaabka soo socda:-
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 500 DWT iyo wax ka ayar - 333,000 SDR
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 501 ilaa 3,000 DWT -- 333,000 lagu daray 500
 - SDR tankiiba
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 3001 ilaa 30,000 DWT- 333,000 lagu daray 333
 - SDR tankiiba
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 30,001 ilaa 70,000 DWT - 333,000 lagu daray 250
 - SDR tankiiba
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 70,000 DWT ka badan - 333,000 lagu daray 167
 - SDR tankiiba
 - t) Haddii dhacdadu ay saameyso dacwooyinka ku saabsan khasaaraha hanti keliya, lacagta oo dhan ee isku duub ah waxay ku saleysan tahay:-
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 500 DWT iyo wixii ka yar - 167,000 SDR
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 501 ilaa 30,000 DWT - 167,000 SDR lagu daray 167 SDR tankiiba.
 - Maraakiibta culeyskoodu yahay 30,001 ilaa 70,000 DWT - 167,000 SDR oo lagu daray 125 SDR Tankiiba.
 - Maraakiibta culeyskoodu ka badan yahay 70,000 DWT- 167,000 SDR lagu daray 83 SDR tankiiba.
 - j) Xadka dacwooyinka rakaabka lagu qaado kiro waxaa weeye kuwa soo socda:-
 - 46,666 SDR oo lagu dhuftay tirada rakaabka ee lagu oggol yahay in markabka loogu qaado ama dhammaan rakaabka saaran markabka dushiisa haddii la dhaafay tirada rakaabka ee ugu badan la oggol yahay laakiinse aan ka badnayn 25,000,000 SDR.

⁶ The International Convention on Tonnage Measurement of Ships, 1969

X) Haddii dhacdadu ay ku saabsan tahay dacwooyinka khasaarahaa nafta ama dhaawac shakhsiyeed iyo dacwooyinka hanti, sanduuqa marka hore waxaa lagu isticmaalayaa bixinta dacwooyinka shakhsiyeed, marka danbena waxaa lagu isticmaalayaa bixinta dacwooyinkahantiyeed hase yeeshi haddii Qaybta kowaad aysan ku filnayn bixinta dhammaan dacwooyinka shakhsiyeed, haraaga ku saabsan dacwooyinkaas waxa marka hore lagu bixinayaa dacwooyinka hanti iyo bixinta lagu sameeyey qaybta labaad ee sanduuqa.

2. Qayb kasta oo ku saabsan sanduuqa xadka u kala qeybinta dacwoodayaasha waxaa lagu sameeynaayaa ayadoo la kala raacayo habka lacagta dacwooyinka oo la caddeeyey.

3. ka hor inta aan la qaybin sanduuqa, haddii markableyga uu bixiyey dhammaan ama qayb ka mid ah dacwooyinka ku saabsan dhacdada, wuxuu la mid noqonayaa xagga sanduuqa, dacwoodaha la bixiyey lacagiisa doonaya in laga magdhabo sanduuqa ilaa heer oo ah dacwoodaha lacagiisa uu xaq u yeesho kaga soo celinta lacagiisa

Qodobka 83aad: Siideynta markabka la xiray xaalada xadka mas'uuliyadda

1. Mar kasta ee markableygu uu xaq u leeyahay inuu koobo mas'uuliyaddiisa, lana xiray markabkii, ama markab kale ama hanti kale oo isla lahaanshihii ama la dhiibay damiin sidii looga gaashaman lahaa xariga Maxkamaddu waxay amri kartaa siideynta markabka ama hantida kale ama dammaanad kale haddii la xaqiijiyey in Markableyga uu dhiibay lacag ku filan oo noqon karta dammaanad raali gelin karta una dhiganta dhammaan xadka ma'uuliyaddiisa iyo in dammaanada sidaas loo dhiibay loogu helay faa'idada dacwoodaha sida waafaqsan xuquuqdooda.

2. Haddii Markableygu uu dhiibay dammaanad una dhiganta dhammaan xadka mas'uuliyaddiisa oo ku saabsan qaybtaan, dammaanadaas waxay qayb ka noqonaysaa sanduuqa xadka, loona meel dhigayaa bixinta dhammaan dacwooyinka ka dhasha dhacdada halka lagu xusay ee uu Markableygu ku koobay mas'uuliyaddiisa.

Qodobka 84aad: ku dabbaqidda koobitaanka dad kale

1. Ayadoo la raacayo Faqradda 2aad ee Qodobkan xaaladaha ku saabsan dacwooyinka hantida ama dhaawac shakhsiyeed oo lid ku ah kabtanaka markabka, shaqaalah markabka ama shaqalahale kale ee uu qoray markableygu, kireystuhu, maareeyuhu ama hawlgeleyaha markabkaanse ahayn markableyga, qofka la dacwooday wuxuu koobi karaa mas'uuliyaddiisa isla habka iyo isla lacagta ku qoran sharcigan kuna saabsan markableyga.

2. Haddii la soo dacweeyo Markableyga ama shaqaalahale markabka, dadkaas waxay ku koobi karaan mas'uuliyadooda inkastoo falka uu ka dhashay dacwadda oo ka timid gefka qofkaas ama qofafkaas, hase yeeshi haddii kabitanka ama qofka ka tirsan shaqaalahale uu isla markaana yahay markableyga, qofka leh wada-lahaanshaha kireystaha, maareeyaha ama hawlgeleyaha markabka, nidaamyada faqraddan waxaa lagu dabbaqayaa haddii falka ama gefka laga hadlayo uu yahay fal ama gef uu saameeyey qofka laga hadlayo isagoo haysta jagadii kabitanka ama xubin ka mid ah shaqaalahale markabka.

Qodobka 85aad: Awoodda garsoorka ee ku saabsan ku dabbaqidda xadeynta

Markableyga ama qofkii kale ee ku tilmaaman Qodobka 84aad ee sharcigaan, doonayana in loo xadeeyo mas'uuliyaddiisa sida waafaqsan Qodobka 82aad ee qaybtan, waa inuu arji u keensado isagoo codsanaya xadeynta mas'uuliyadda, Maxkamad qaabilسان deked ka mid ah Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 86aad: Arji lagu codsanayo xadeyn

1. Arjiga ku saabsan codsiga xadeynta loo gudbiyey Maxkamad sida waafaqsan Qodobka 85aad ee kor ku xusan, waa in laga helaa waxyaabaha soo socda:-
 - b) Falka ay ka dhalatay dacwaddu.
 - t) Lacagta ugu badan Sanduuqa Xadeynta iyo
 - j) Habka dhisidda Sanduuqa Xadeynta.
2. Waxyabaha soo socda waa in la soo raaciyya arjiga:-
 - b) Liiska dadka soo dacwooday oo ay la socdaan cinwaannadooda, nooca iyo lacagta dacwadda, haddii uu ogyahaya dacwoodaha, iyo
 - t) Warqadaha caddeynta saldhigga lagu xisaabiyyey Lacagtii Sanduuqa.

Qodobka 87aad: Qaadista dacwadda xadeynta

1. Guddoomiyaha Maxkamadda wuxuu xaqijinayaa in Sanduuqa loo dhisay sida waafaqsan sharcigan wuxuuna amrayaa furidda dacwadaha ku saabsan dhismaha Sanduuqa isagoo goynaya lacagta inuu horumarinayo arjiiluhu si uu u daboolo kharashka dacwadda.
2. Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu magacaabayaa qofka la xisaabtamaya Sanduuqa.

Qodobka 88aad: Bixinta lacagta caddaanka & keenista dammaanadda

1. Haddii lacagta sanduuqa la bixiyey caddaan ahaan Maxkamaddu waxay magacaabaysaa qofka qabanaya lacagta dhigaalka. Dhigaalka waxaa lagu sameynayaa magaca Arjiilaha, waxna lagama bixin karo ayadoo aanay Maxkammaddu oggolaanin. Qofka haystaa dhigaalka wuxuu noqonayaa qofka amaanad ahaan u maamulaya Sanduuqa isagoo mas'uul uga ah Maxkammadda. Dultaarka lagu helay lacagta dhigaalka waxaa lagu darayaa sanduuqa.
2. Haddii sanduuqa uu wakiil ka yahay dammiin shaqsi ah ee magaca xisaabtamaha dammaanada waxba lagama bedelikaro iyadoo aan Maxkammaddu oggolaanin.

Qodobka 89aad: Caddeynta dhismaha sanduuqa xadeynta

1. Maxkammaddu ayadoo tixgelinaysa codsiga arjiilaha, waxay caddeynaysaa in Sanduuqa xadeynta la dhisay kaddib markii la fuliyey dhammaan shuruudaha sharchiyeed.
2. Laga billaabo taariikhda amarka Maxkammadda ee ku saabsan dhismaha sanduuqa, dacwoodaha lid ku ah sanduuqa looma oggolaan karo inuu isticmaalo xaq ku saabsan hantiyada kale ee markableyga oo ku saabsan dacwad ayadoo la tixgelinayo xaq markableyga ee kusaabsan xadeynta mas'uuliyaddiisa.

Qodobka 90aad: Ogeysiiska caddeynta dhismaha sanduuqa

Markuu dhismay Sanduuqa xadeyntu, xisaabtamuhu waa inuu ogeysiyya dacwoodayaasha magacyada iyo cinwaannada ku qoran arjiga, isagoo ugu diraya warqad diiwaangashan kuna qoran macluumaadka soo socda:-

- b) Magaca iyo cinwaanka Markableyga ama Arjiilaha iyo wakiilkiisa haddii uusan ahayn Markableyga.
- t) Magaca markabka iyo dekedda deegaankiisa. j) Shilka khasaarahaa kaga soo gaaray.
- x) Lacagta dacwadda ee uu Arjiilaha soo qiyaasay iyo cinwaanka qofka warqadahuay u socdeen.
- kh) Caddeyn muujinaysa in dacwoodaha laga rabo inuu Maxkammadda uu keeno caddeyn qoraal ah oo ku saabsan dacwaddiisa muddo soddon (30) maalmood gudahooda haddii uu deggan yahay Soomaaliya iyo lixdan (60) maalmood gudahooda

haddii uu deggan yahay Soomaaliya dibaddeeda.

d) Caddeyn muujinaysa in haddii uu keeni waayo caddeyn, waqtiga la tilmaamay gudihiisa, Maxkammaddu waxay lacagta xadeynta ee uu soo jeediyey Arjiilahu iyo in dacwoodahu uu muddada la soo sheegay gudaheeda uu kala doodi karo Maxkammadda wixii ku saabsan dacwadda.

Qodobka 91aad: Faafinta dhismaha sanduuqa

1. Ogeysiiska ku saabsan dhismaha sanduuqa xadeynta iyo macluumaadka lagu sheegay warqadda ogeysiiska sida waafaqsan Qodobka 90aad waxaa lagu faafinaya faafinta Rasmiga ee Soomaaliya iyo hal ama wax ka badan wargeesyada shisheeyaha.
2. Dacwoodayaasha magacyadooda iyo cinwaannadooda uu Arjiiluhu soo muujin, waxay haystaan muddo soddon (30) maalmood, laga billaabo taariikhda faafinta iyo keenista dacwooyinkooda iyo duridda lacagta Sanduuqa xadeynta.
3. Duridda dacwoodayaasha ee ku saabsan sanduuqa, kaaliyaha Maxkammaddu wuxuu u gudbinaya dhinacyada ay khuseysu ugu yaraan saddex (3) maalmood ka hor maalinta dhageysiga Maxkammadda ee ku saabsan doodaha Arjiilaha iyo dacwoodaha.

Qodobka 92aad: xisaabtamaha (liquidators)

1. Xisaabtamaha wuxuu xaqijinaya dhammaan dacwooyinka isagoo Arjiilaha siinaya ogeysiis ku saabsan xadeynta.
2. Xisaabtamuhu wuxuu diyaarinaya caddeyn ku saabsan dacwooyinka isagoo Arjiilaha siinaya ogeysiiska ku saabsan Xadeynta iyo dhammaan dacwoodayaasha, laguna dirayo warqad diiwaangashan.
3. Haddii lacagta Sanduuqa Xadeynta ay tahay mid go'an, dacwooyinkuna ay yihiin kuwo la oggolaaday, Xisaabtamuhu wuxuu diyaarinaya una gudbinaya Gudoomiyaha Maxkammadda qaabka qaybinta Sanduuqa, ayadoo la tixraacayo qaabkaas oo ku saabsan qaybinta, Maxkammaddu waxay soo saaraysaa go'an sidii loo maamuli lahaa Sanduuqa. Markii la soo saaray go'aankaas, qofka mas'uulka ka ah amaanada sanduuqa ama Arjiilaha ku saabsan Xadeynta wuxuu dhameynaya dacwooyinka qaybinta sanduuqa koobitaanka sida waafaqsan Amarka Maxkammadda.
4. Kaddib markii la fuliyey go'aanka Maxkammadda, dacwoodahuna bixiyey lacagiisa, Maxkammaddu waxay ku dhawaaqaysaa in dacwaddii la xiray, taasina waxay ka reebeysa dacwoodaha inuusan dacwad ku furin Arjiilaha oo ku saabsan Xadeynta ku saleysan isla falkii.

QAYBTA IV - MAS'ULIYADDA HAWLGELIYAH EE MARAAKIIBTA NUKLEYARKA

Qodobka 93aad: Caddeymo ku saabsan ujeedooyinka la xiriira qaybtan

1. "Maraakiibta nukelayarka" waxaa loola jeedaa markab ay ku rakiban tahay warshad ku shaqeysa quwadda nukelarka ama qaada waxyaabaha nukelarka sida shidaalka ama xamuulka.
2. "Dalka Rukhsad bixiyaha" waxaa loola jeedaa dal socodsiiyey ama ogolaaday socodsiinta markab nukleyar ah oo wata calankiisa.
3. "Hawlgeliyaha" waxaa loola jeeda qofka looga oggolaaday dalka rukhsadda bixinaya ama qayb ahaan fal ama gudasho la'aan waajib ee uu sameeyey qofka ay gaartay inuu socodsiyo markab nukelar ah ama haddii uu dalka naftiisa socodsiinayo markab nukelar ah. Haddii Hawlgeliyaha markabka nukelarka ah aan laga oggolaan dal kale inuu socodsiyo markab nukelar ah, markableyga lahaa markabka waqtiga shilka, waxaa loo qaadanaya inuu yahay hawlgeliyaha inta ku saabsan ujeedooyinka ku xusan

Qaybtan.

4. "Khasaaro nukeleyar ah" waxaa loola jeeda dhaawac la gaarsiiyey dadka ama hanti nooc kasta ama qadar kasta ha ahaatee oo ka dhasha waxyaabaha leh tilmaamaha shucaaca (Radio-Active) ama kuwa isugu jira walaxyo khatar ah oo shidaal nukeleyar ah ama alaaboo shucaaca ah ama qashin nukeleyar ah.

5. "Dhacdo Nukeleyar ah" waxaa loola jeeda dhacdo kasta ee dhacdooyinka leh asaas la mid ah kan keenay khasaaraha nukeleyarka.

Qodobka 94aad: Xaaladaha mas'uuliyad la'aanta

Mas'uuliyad ku saabsan Qaybtan lama saari karo hawlgeeliyaha haddii khasaaraha nukeleyarka ah uu ka dhashay shil nukeleyar oo si toos ah kaga yimid fal dagaal, rabshado, dagaal sokeeye ama kacdoon (Insurrection).

Qodobka 95aad: Mas'uuliyadda buuxda

Hawlgeeliyaha markabka nukeleyarka ah wuxuu si buuxda mas'uul uga noqonayaah khasaaro nukeleyar ah markii la caddeeyo in khasaarahaas uu ka dhashay dhacdo nukeleyar ah oo uu sabab u ahaa markabka nukelar ah.

Qodobka 96aad: Waqtiga mas'uuliyadda hawlgeeliyaha

Hawlgeeliyahu mas'uul kama noqonayo shil nukelar ah oo dhacay ka hor inta uusan la wareegin maamulka shidaalka, alaabta ama qashinka nukelarka ah ama ka dib markii uu u wareejiyey qof kale oo sharchiyan loo oggolaaday mas'uulna ka noqonayaah wixii khasaara nukeleyar ah ee uu geysto.

Qodobka 97aad: Ka reebid mas'uuliyadda shilka

Haddii hawlgeeliyuhu uu caddeeyo in shilka nukeleyarka ah uu ka dhashay dhammaan khasaarahu, hawlgeeliyuhu waxaa dhammaan ama qayb ahaan laga reebi kara mas'uuliyadda dhibaataada gaartay qofkaas.

Qodobka 98aad: Cabashada hawlgeeliyaha leh mas'uuliyadda

Hawlgeeliyuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu keensado dacwad barbar ah ama uu furto cabashooyin kale ee sharchiyeed lidna ku ah dhinacyada uu u maleeyo inay dhammaan ahaan ama qayb ahaan u gefsan yihiin markii uu gaarsiiyey shilka nukeleyarka.

Qodobka 99aad: Khasaaraha badan

Haddii khasaaraha nukeleyarka ah iyo khasaarooyinka kale oo aan ahayn khasaaraha nukeleyarka, ka yimid shil nukeleyar ah ay ka wada yimaadeen shil nukeleyar ama dhacdooyin kale, khasaaraha nukeleyarka iyo khasaaraha kale oo aan la kala saari karin, khasaaraha oo dhan ee ku saabsan ujeeddada qaybtan, waxaa loo qaadanayaah inay tahay khasaaro nukeleyar ah oo ka yimid shil nukeleyar ah.

Qodobka 100aad: Mas'uuliyadda aan xadidnayn

Mas'uuliyadda markableyga ama hawlgeeliyaha markabka nukeleyarka lagu caddeeyey inuu gaarsiiyey khasaaraha ama dhaawac shaksiyeed oo ka dhashay shil nukeleyar ah ma koobi karo mas'uuliyaddiisa kamana faa'ideysan karo koobidda mas'uuliyadda lagu tilmaamay sharcigan.

Qodobka 101aad: Isticmaalka sanduuqa

Lacagta dammaanadda dhaqaalaha ee dabooleysa mas'uuliyadda hawlgeliyaha sida ku xusan qaybtan waxaa kali ahaan loogu isticmaalaya magdhawga ku tilmaaman isla Qaybtan.

Qodobka 102aad: Mas'uuliyadda hawlgeliyaasha

1. Khasaaraha nukeleyarka haddii uu saameeyo mas'uuliyadda hawlgeliyaa hal ka badan, khasaaraha uu mid kasta geystay aan la kala saari karin, hawlgeliyaasha arrintu saameyso waxay wada mas'uul ka noqonayaan khasaarahaa.

b) Hawlgeliye kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu urursado lacagta khasaaraha iyao la tixgelinayo gefka uu leeyahay mid kasta oo ka mid ah,iyo

t) Haddii ay jiraan duruufo aan oggolaanayn in aan gefka la kala qaybin karin, mas'uuliyadda oo dhan waxaa loo kala goynayaa qaybo isku mid ah.

2. Markii ay jirto mas'uuliyad wada jir ah sida waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkan:

b) Hawlgeliye kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu urursado lacagta khasaaraha iya oo la tixgelinayo gefka uu leeyahay mid kasta oo ka mid ah,iyo

t) Haddii ay jiraan duruufo aan oggolaanayn in aan gefka la kala qaybin karin, mas'uuliyadda oo dhan waxaa loo kala goynayaa qaybo isku mid ah.

Qodobka 103aad: Xadeynta keenista dacwooyinka

1. Xuquuqda ku saabsan magdhabidda oo ku xusan Qaybtan waxay tirtirmayaan haddii dacwadda aan la soo oegin muddo sodon (30) sanadood gudahood laga billaabo taariikhda shilka nukeleyarka. Hase yeeshi, haddii sharciga dalka rukhsadsiinta uu dhigayo in mas'uuliyadda hawlgeliyaha lagu daboolayo dammaanada dhaqaalaha ilaa muddo ka badan sodon (30) sano, xaqa magdhabidda wuxuu tirmayaa kadib dhammaadka muddadaas.

2. Haddii khasaaraha nukeleyarka uu ka dhashay shidaalka, alaabta ama qashinka nukeleyar ah oo la soo xaday, uu lumay, la tuuray ama laga tegay, muddada lagu tilmaamay faqradda 1aad ee Qodobkan, waxaa laga soo tirinayaa taariikhda shilka nukeleyarka ee keenay khasaaraha, laakiinse muddada marna waa inaysan ka badnaan soddon iyo shan (35) sanadood laga billaabo taariikhda tuugada, lumidda, daadinta ama ka tegidda.

3. Dacwad ku saabsan magdhawga khasaaraha nukeleyarka, waxaa lagu mamnuucayaa Qaybtan haddii aan la soo oegin saddex sano gudahood laga billaabo taariikhda uu qofka soo dacwooday inay gaareen khasaroyinka nukleyer ah, uu ogaaday ama uu ogaan karay khasaaraha iyo qofka mas'uulka ka ah khasaaraha, haddii aan la dhaafin muddada lagu gooyey faqradda1aad iyo 2aad ee Qodobkan.

QAYBTA V - KABTANKA IYO SHAQAALAHAA

Qodobka 104aad: Khadka toosan ee markabka

1. Khadka toosan ee markabka waxaa mas'uul ka ah kabtanka markabka isagoo mar kasta mas'uul ka ah hoggaanka markabka marka uu ku jiro safarka ama uu dekedda taagan yahay.

Xattaa marka ay khasab ku noqoto inuu la kaalmeysto wadaha ama markab kale uu jiidayo, waa inuuu asaga laf ahaantiisa hoggaamiyaa ama marka uu marayo marxalado kale.

2. Haddii uu geeriyyodo, maqnaado ama ay lunto kartida kabtanka marka lagu jiro safarka, hoggaanka markabka waxaa la wareegaya sarkaalka markabka ee daraja ahaan ugu xiga kabtanka.

Qodobka 105aad: Waajibaadka kaptanku ka hor iyo marka lagu jiro safarka

1. Ka hor safarka, kaptanku waa inuu xaqqiiyaa in markabku uu dhinac kasta ka fiyow yahay safar gelidda, isagoo si fiican loo qalabeeeyey, si fiicanna loo raray, lana saaray cunto ku filan.
2. Haddii inta lagu jiro safarkan ay dhacaan falal uu keeni kara khatar markabka, badeecoyinka saaran, shaqaalaha ama Rakaabka, kaptanku waa inuu isticmaala dhammaan tashiilaadka uu haysto oo ay ku jiraan laakiinse ku koobo inuu u duwo markabka deked kale isagoo ka codsanaya magangeliyo ama ka codsanaya kaalmo maraakiib kale si uu u badbaadiyo markabka, badeecadda, shaqaalaha iyo rakaabka.
3. Haddii ay noqoto lagamamaarmaan, isagoo isticmaalaya waayo aragnimadiisa iyo go'aankiisa, in la huro ama la jebiyo qeybo ka mid ah markabka ama badeecadda si loo badbaadiyo markabka, shaqaalaha iyo rakaabka, waa inuu haddii ay suurtowdo, marka hore ka bilaabo markabka, kadibna badeecoyinka isagoo mudnaanta siinaya alaabta qiimaha yar iyo kuwo kale oo ka huriddooda ay leedahay faa'ido reebidooduna aysan ahayn lagamamaarmaan.
4. Marka laga tegayo markabka, kaptanku waa inuu noqdaa kan ugu dambeeya ee kategaya isagoo hubinaya intii suura gal ah in warqadaha markabka iyo buugagta iyo alaabta qiimaha leh oo loo dhiibtay asaga in la badbaadiyey, kaptankii lagu helo dembiga inuu si kas ah u hogaansami waayey nidaamka faqraddan, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka badnayn labo (2) sano iyo ganaax So.Shs.300, 000/= aan ka badnayn.

Qodobka 106aad: Xafidaadda xaashiyaha markabka

Kaptanku waa inuu hubiyaa in warqadaha ku saabsan markabka, shaqaalaha, rakaabka iyo badeecoyinka si wanaagsan loo xafiday mar kastana la hagaajiyo lana cusbooneysiyyey.

Qodobka 107aad: Wakiilnimada iyo awoodda sharciveed

1. Kaptanku: waxaa magacaabanaya markableyga ama hawlgeliyaha wuxuuna yahay wakiilkiisa. Kaptanku wuxuu fulinaya awoodda uu sharcigu uga xilsaaray kuna saabsan dhammaan dadka danta ka leh markabka iyo badeecoyinka.
2. Markii uu ka maqan yahay meesha ay joogaan, Markableyga hawlgeliyaha ama wakiilka rasmiga ee markabka, Kaptanku wuxuu sameynayaa falalka lagama maarmaanka ah isagoo fulinaya hawlahaa caadiga ee markabka iyo safarka. Kaptanku wuxuu sidaas oo kale magacaabi kara, shaqaalaha.
3. Kaptanku, dacwadaha si toos ah u sameeyo markabka iyo safarka wuxuu magaca markableyga ama hawlgeliyaha ku furi kara dacwad sharciveed. Sidaas oo kale dhinacyada saddexaad waxay kaptanku markabka ku oogi karaan dacwado ku saabsan arrimaha markabka, markableyga, hawlgeliyaha ama shaqaalaha. Warqadda u yeerista kaptanku xaaladahaas, waxaa loo qaadanayaa in loogu diray markableyga ama hawlgeliyaha markabka.
4. Haddii markableyga ama hawlgeliyaha uu joogo ama uu leeyahay qof wakiil ah oo leh awoodda lagama maarmaanka ah, kaptanku wuxuu qaban karaa keliya hawlmaalmeedka maamulka markabka iyo hagaajinta yaryarka.
5. Dacwadaha lagu oogay kaptanku, joogista markableyga ama hawlgeliyaha ama wakiilkiisa gaar ahaaneed waxaa loogu qaadi kara dhinacyada saddexaad oo ogaa ama laga rabay inay ogaayeen joogistaas.

Qodobka 108aad: Lacagta iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka u ah safarka

1. Haddii, inta lagu jiro safarka, ay timaado baahi deg-deg-ah oo ku saabsan lacag loo baahdo alaabta la quuto, dayactirka ama baahida kale, kaptanku wuxuu marka hore wargelinaya markableyga, hawlgeliyaha ama wakiilka Rasmiga ah isagoo codsanayaa lacagtaas ama talo. Haddii aysan suurtoobin ama uu markableyga ama wakiilka oo la ogeysiyyey uu keeni waayo lacagta loo baahday ama talada, kaptanku wuxuu codsan kara awoodda amaahda lacagta, isagoo ku galaya mas'uuliyadda markabka ama iibinaya kaydka markabka qalabka iyo alaabta kale si uu u helo lacagta lagama maarmaanka ah. Codsiga awooddas waxaa loo sameynayaa hay'adda Garsoorka haddii markabku uu joogo jamhuuriyadda ama Qunsliyadda hadii markabku uu joogo dibadda.

2. Haddii, inta lagu jiro safarka, keydka iyo alaabta kale ee daruuriga u ah socodka safarka ay yaraadaan kaptanku waa in uu qaadaa tallaabo degdeg ah si uu u xalliy arrintaas, oo ay ku jирто u leexinta markabka dekeda ugu dhow iyo ka codsashada alaabta loo baahday maraakiibta lala kulmay. Haddii baahidu ay noqoto mid aad u sarreysa kaptanku wuxuu isticmaali karaa badeecoyinka saran markabka si loogu faa'ideeyo markabka, shaqaalaha iyo rakaabka, hase yeeshee qofka leh badeecoyinkaas waxaa ka magdhabayaa markableyga ama hawlgeliyaha, lacagta u dhiganta qiimaha ay badeecoyinkaas joogaan dekeda loo waday alaabtaas.

3. Kaptanka lagu helo dembiga si kas ah u abuurid xaaladda baahi aan jirin, waxaa lagu ciqaabayaa xarig aan ka badnayn hal (1) sano ama ganaax ilaa Shs So. 500.000/= ama labadaba.

Qodobka 109aad: Ilaalinta danaha mulkileyda & badeecoyinka

1. Marka ay noqoto lagama maarmaan ayadoo la tixgelinayo baahida safarka, kaptanku waa inuu ilaaliyaa danta qofka leh badeecoyinka. Haddii loo baahdo tallaabooyin gaar ahaaneed oo looga hortegayo ama la yareynayo khasaaraha badeecoyinka, kaptanku waa inuu, haddii ay u suurtowdo, ogeysiyyaa dadka leh badeecoyinka ama wakiiladooda xaaladda isagoo raacaya tilmaamaha dadka leh badeecoyinka.

Haddii aysan jirin tilmaamahaas, kaptanku waa inuu qaadaa tallaabooyinka ay la noqoto inay ku habboon yihin badbaadada badeecoyinka.

Qodobka 110aad: Safridda kaptanka faa'idada wada jirka

Markii kaptanku u safro faa'ido wadajir ah ma sameyn karo iskiisa wax dhaqdhaqaaq ganaci ah, haddii aan si kale loogu heshiin. Hadduu jebiyo nidaamka, wuxuu luminayaa saamigiisa oo ku saabsan faa'idada wada jirka ah ayadoo aan la tixgelin khasaaraha ka dhasha haduu jiro.

Qodobka 111aad: Shaqa ka-saarista kaptanka qayb ku leh markabka

Haddii shaqada laga saaro kaptanka qayb ku leh lahaanshaha markabka, wuxuu qaybtisa dhiibayaa isagoo codsanaya in loo soo celiyo lacagtiisa ayna dhiibaan dadka kale ee leh markabka, lacagtaas oo lagu goynayo heshiis ama khabiir ay magacawdo Maxkammadkhaas, tanasulidda waa la mamnuucayaa haddii aan lagu dhaqmin muddo soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda hellidda ogeysiiska shaqa ka saarista.

Haddii xaqa tanasuulidda lagu dhaqmay muddada la gooyey dhexdeeda, dadka leh wada lahaanshaha qayb ahaan, waxay bixinayaan lacagta saamiga kaptanka muddo soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda qiimeyn ta saamigii kaptanka.

Qodobka 112aad: Qaabka shaqaalaha

1. Qaabka shaqaalaha waxaa dhissaya kابتanka iyo dhammaan dadka kale ee shaqada loogu siiyey markabka dushiisa.
2. Wasiirkha kalluumeysiga &Gadiidka Badda, wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiyahaas, Wasiirku wuxuu tixgelinaya nidaamka iyo ku dhaqanka Caalamiga hadba kii haboon. Markableyga, hawlgeleyaha ama kابتanka lagu helo dembiga uu hoggaansami la'aanta xeer-nidaamiyaha baahida shaqaale ee la soo saaray waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan So.Shs. 50.000 /=.
3. Tirada shaqaalaha ee doon kasta, waaxda Badda ayaa soo saareysa ayadoo la tixgelinaayo dabiicada safarka, culeyska iyo sida waafaqsan caadooyinka dalka.
4. Shaqaalaha maraakiibta yaryarka ah waa inay ahaadaan inta ku filan dhaqdhaqaaq caadiga sida waafaqsan isticmaalka loogu tala galay maraakiibtaas.

QAYBTA VI - HESHIISYADA SHAQA QORISTA BADDA

Qodobka 113aad: Habka iyo dabeecada heshiisyada shaqada badda

1. Heshiisyada shaqa qorista ee shaqada doonta iyo maraakiibta yaryarka ah waxaa lagu sameyn karaa af-ahaan sida waafaqsan caadooyinka, heshiisyada shaqa qorista maraakiibta diiwaangashan dushooda waa inay ahaadaan qoraal, dhinac kastana fulin karo, saxeexaan loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha, ayadoo goobjoog ka ah hay'adda Badda haddii lagu sameeyey Soomaaliya gudaheeda, hay'adda qunsuliyadda horteeda haddii dibadda lagu sameeyey heshiiska.

Heshiisyada shaqo qorista ee qofka aan qaan gaarin waa inuu saxiixaa qof mas'uul ka ah qofka aan qaan gaarka ahayn ama waa in lagu daraa heshiiska caddeyn ku saabsan oggolaanshaha waalidnimada oo la sugay. Haddii shaqaalahu uusan saxiixi Karin heshiiska, waa in loo akhriyya loona fasiraa shaqaalaha haddii heshiisku uu ku qoran yahay af uusan aqoonin shaqaalaha.

Asalka heshiiska shaqada waa in lagu hayaa galka Waaxda Badda ama hay'adda Qunsuliyadda ee hortiisa lagu saxiixay heshiiska ayadoo nuqlu la tasdiiqay loo geliyey diiwaanka shaqaalaha laguna hayo warqadaha markabka.

2. Dadka da'dooda ay ka yar tahay toban iyo sided (18) sano kama shaqeyn karaan adeegga makiinadaha maraakiibta diiwaangashan marka laga reebo xaaladaha degdeg ah, ku meeleynta sharci darrada ee shaqooyinkaas makiinadaha qof aan qaan gaar ahayn waxay keenaysaa in la ganaaxo kابتanka, Markableyga ama hawlgeleyaha lacag dhan ilaa So. Shs. 50.000/=.

3. Ayadoo laga dhigayo shuruud ka mid ah shaqo qorista, dadka aan qaan gaarka ahayn da'dooda ka yar tahay toban iyo sided (18) sano, markab aan ahayn kan ay ka shaqeeyaan xubnaha qoyskiisa oo keliya, waa inay kan ay ka shaqeeyaan xubnaha qoyskiisa oo keliya, waa inay haystaan shahaado Takhtar oo muujinaysa caafimaadkiisu u qalmid shaqada. Shahaadada Takhtareed waa in dib loo cusbooneysiiya sannad kasta ayadoo uu oggolaanayo takhtar ay magacawday hay'adda qaabilسان oo saxiixi doonta shahaadada kuna qori doonta taariikhda dhamaadka oo ah hal sano laga bilaaboo taariikhda barista. Shahaadada takhtareed oo dhacay inta safarka lagu jiro waxay soconaysaa ilaa dhamaadka safarka.

4. Fulin la'aanta shuruudaha ku qoran faqradda 1aad iyo 2aad ee Qodobkan waxay ka dhigaysaa heshiiska shaqada mid aan lagu fulin Karin Maxkammadda Soomaaliya. Hase yeeshie haddii ay jiraan xaalado uu loo shaqeeyaha ku dhaqmay khiyaamo, dulmi ama dhaqan xumo taasoo keentay shaqa siinta Muwaadin Soomaaliyeed, heshiisku ha

waafaqsanaado shuruudahan iyo inkale, haddii sidaas loogu caddeeyo Maxkakamad qaabilسان, loo shaqeyaha waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan Shs. So. 150.000/= ayadoo Maxkamaddu ay amreysa in shaqaalaha la dulmiyey la siiyo lacag u dhiganta lacagta uu ku heli lahaa heshiiska.

5. Waqtiga heshiisyada shaqada maraakiibta dushooda waxaa lagu goynayaa ayadoo saldhig looga dhigayo hal safar ama wax ka badan, muddo la gooyey ama dhibaatada dhinacyada muddo aan la xaddidin. Lacagta mushahaarka shaqaalaha waxaa lagu caddeynayaa heshiiska ayadoo saldhig loogu dhigayo qimo loogu gooyey safar kasta, ama lacagta loogu gooyey bil kasta ama muddo go'an ama saami ka mid ah faa'idada safar kasta.

Qodobka 114aad: Heshiisyada shaqada badda

1. Heshiisyada shaqada markabka wata Calan Soomaaliyeed waxaa lagu qorayaawaxyaabaha ay ka mid yihiin, tilmaamaha dhinacyada, markabka, muddada shaqada, mushaharka, taariikhda mushahar bixinta iyo waajibaadka shaqaalaha.

Ugu yaraan heshiisyada shaqada markab wata Calan Soomaaliyeed waa in laga helaa waxyaabaha soo socda:-

b) Magaca iyo cinwaanka marabkaleyga ama hawlgeleyha iyo wakiilka markabka diiwaangashan oo jooga Soomaaliya.

t) Magaca, cinwaanka iyo lambarka Buugga Badmaaxa ee shaqaalaha.

J) Magaca iyo lambarka diiwaangelinta ee markabka.

x) Tilmaanta shaqada iyo waajibaadka markabka dushiisa.

Kh) Haddii heshiiska shaqada saldhig looga dhigay hal safar ama wax ka badan safray tilmaanta dekedaha raridda iyo dekedaha dejinta oo loogu tala galay safarka safarada.

d) Muddada heshiiska oo lagu tilmaamo taariikhda bilowga iyo dhammaadka shaqada.

r) Heshiisyada shaqada ay oggoladaan dhinacyada muddo aan la tilmaamin, heshiisku waa inuu si cad u dhigaa asaaska lagu tiriyo mushaharka, laguna tilmaamo taariikhda muddada ama safarada.

s) Lacagta mushaharooyinka iyo nooca lacagta, mesha iyo qaabka lacag bixinta.

Sh) Muddada ama taariikhda ay bislaadeen mushaharooyinka. L) Meesha iyo taariikhda fulinta heshiiska.

m) Heshiisyada shaqada oo mushaharooyinka ay ka mid yihiin faa'idada saafiga ee hal safar ama wax ka badan, waa in lagu qoraa heshiiska tilmaanta habka logu xisaabiyo faa'idada saafiga.

n) Saxiixyada loo shaqeyaha iyo shaqaalaha, iyo

o) Caddeyneta loo shaqeyaha in dhammaan kharashka u dhoofinta dalkiisa, badmaaxa oo heshiiskiisu ku dhamaaday deked aan ahayn tan laga soo bilaabay adeegga, waxaa horumarin ahaan loo siinayaa kharashka ku saabsan dhoofintiisa isagoo oo bixinaaya loo shaqeyaha ama wakiilkiisa.

2. Heshiisyada shaqada oohal ama wax ka badan shuruudaha lagu tilmaamay farqadda 1aad ee Qodobkan aysan si fiican u caddeyn ama aan ku qornayn waxaa lagu fulinayaa Maxkamad qaabilسان, hase yeeshee dhinaca soo codsaday fulinta, waxaa laga rabaa caddeyneta shuruudahaas. Heshiisyada shaqada oo ku saabsan sharcigan, shuruud ka mid ah heshiiska oo ka hadlayso muddada ay maqan tahay ama aysan caddeyn waxaa lagu fasirayaa hab u daneynaya badmaaxa lagu fasirayaa in dhinacyadu ay ku tala galeen in heshiisku uu socdo muddo aan la xaddidin.

3. Badmaaxa qaba dacwooyinka ka dhasha heshiiska shaqada eeku saabsan Markab

wata calan Soomaaliyeed, wuxuu dacwad ku furi karaa markableyga, hawlgeliyaha, kabtanka ama wakiilka Rasmiga ee markabka si ay ku xukunto magdhaw Maxkamad ka tirsan Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 115aad: Waajibaadka dadka la shaqaaleeyey

1. Saraakiisha iyo shaqaalaha lagu qorey ka adeegidda markab wata Calan Soomaaliyeed, waxay ka hoos shaqeynayaan kabtanka markabka. Shaqaalaha markabka, hase yeeshiee khasab kuma aha inuu qabto adeeg ka duwan kan loogu qoray shaqaalaahaas.

Hase yeeshiee, kabtanka isagoo ilaalinaya danta nabadjelyada iyo badmaridda, wuxuu si ku meel gaar ahaaneed u magacaabi karaa shaqaale shaqada ka duwan tan loo qoray isaga, shaqaalaha markabka oo loo dhiibay waajibaad ka duwan kooda, waxay xaq u leeyihiin mushaharka la siiyo shaqaalaha lahaa waajibaadkaas ama mushaharkiisa kii hadba badan.

2. Kabtanka iyo shaqaalaha markabka ma saari karaan markabka badeecoyin iskooda ayagoo aan oggolaansho ka haysan markableyga ama wakiilkiisa. Caddeyn ta ku saabsan xadgudubka Qodobkan waxay dhinaca ku waajibinaysaa bixinta lacag u dhiganta labanlaab kirada xamuulka badeecoyinka la mid ah.

Qodobka 116aad: Dhammaadka heshiiska

1. Heshiiska shaqada oo loogu tala galay hal safar ama wax ka badan wuxuu dhammaanaa markuu dhammaado safarka ku xusan heshiiska.

2. Heshiiska shaqada ee ku saabsan muddo la xaddiday wuxuu iskiisa u dhammaadaa taariikhda ku xusan heshiiska ama markii muddo lagu tilmaamay heshiiska ay dhamaato. Haddii badmaaxa la qoray laga reebo shaqada ayadoo uu codsaday markableyga, kabtanka ama wakiilka Rasmiga ah, kaddib dhammaadka taariikhda heshiiska haddii aan la dhigin heshiis cusub, badmaaxu waxaa loo qaadanayaa inuu sii waday shaqada shuruudihii iyo muddo aan la xaddidin.

3. Heshiiska shaqada oo loo sameeyey muddo aan la xaddidin ayadoo dhinacyadu oggolaadeen waxaa ka bixi kara dhinac kasta, deked kasta oo markabka laga raray ama wax laga dejiyey, haddii shaqaalaha la siiyo ogeysiis hal bil ah ee ka bixidda heshiiska iyo Kharashka u dhoofinta dalkiisa rasmiga ah.

Qodobka 117aad: Ka bixidda heshiiska

1. Heshiis kasta ee shaqo, markabka wata Calan Sooomaaliyeed, shaqaalaha wuxuu ka bixi karaa haddii ay jiraan shuruudaha soo socda:-

b) Khasaare dhan, u qalmid la'aan badmarid ama karti la'aanta markabka inuu maro badda ilaa muddo lixdan maalmood.

t) Lumidda jinsiyadda markabka.

j) Amarka Maxkammadda ee iibka markabka.

x) Karti la'aanta badmaaxa dhaawac ama jirro awgeed oo ka dhigaysa qof aan dhameyn Karin safarka.

Kh) Kareebid ganacsi deked loo socdo ama xayiraadda markabka ama sabab kale oo aan looga xil saari Karin markableyga, oo kaga dhigaysa waxaan suura gal ahayn bilaabidda safarka ama wadidiisa.

d) Furfuridda markabka haddii uusan ganacsi jirin muddo ka badan labaatan maalmood, ama furfuridda xilliyeed ama furfuridda loogu tala galay hagaajinta doon ama markab muddo sodon (30) maalmood.

- r) Ka tirtiridda buugga shaqaalaha badmaaxa ayadoo uu jiro cudurdaar.
- S) Tirtiridda oggolaansho waalidnimo ku saabsan heshiiska ama tirtirid oggolaansho waalidnimo oo ku saabsan buugga dadka aan qaan gaarka ahayn.
- Sh) Imaashaha La'aanta shaqada badmaaxa la qortay, waqtiga loogu tala galay inuu ku soo xaadiro markabka.
- Dh) Amarka waaxda Badda ama Ha'yadda Qunsuliyadda ayadoo uu soo codsaday badmaaxa haddii lagu keenay caddeyn muujinaysa sabab macquul ah oo la soo raaciyeey codsiga.

Qodobka 118aad: Mushaharooyinka bislaaday dhamaadka ama ka bixidda heshiiska

1. Haddii uu dhamaado heshiiska badmaaxa, isagoo aan la cusbooneysiinayn deked aan ahayn kan dalkiisa ee Ku qoran warqadaha, markableyga, hawlgeliyaha ama wakiilka markabka ee rasmiga ah wuxuu siinaya mushaharooyinka uu xaq u lahaa sida ku qoran heshiiska isagoo isla markaa bixinaya kharashka nooliga dhoofinta badmaaxa ilaa dalkiisa oo loo bixinayo horumarin ahaan inta uusan bilaabin dhoofka badmaaxa.

2. Haddii loo shaqeeyaha ama wakiilka sharcieed uu ka baxo heshiiska badmaaxa, waa inuu ka hor taariikhda dhammaadka heshiiska u bixiyaa lacagta xuquuqda ee ku xusan heshiiska, ilaa maalinta uu markabka soo dhoofay iyadoo la xisaabinayo wakhtiga shaqada markabka dushiisa iyo lacagta oo dhan ee uu xaq u lahaan lahaa, haddii la fulin lahaa dhammaan muddada heshiiska sidii loogu tala galay marka la dhigayey heshiiska.

3. Badmaaxa heshiiska uu ka baxay loo shaqeeyaha ama shaqaalaha markabka ayadoo ay jirtay sabab macquul ah, deked aan ahayn dekeda dalka ee badmaaxa, waxaa loo dhoofinaya dalkiisa isla markiba ayadoo uu kharashka dhoofinta bixinaya markabka. Kharashka dhoofinta waxaa la bixinaya ka hor dhoofinta badmaaxa taasoo ku jirta dhoofintaanka dariiqa ugu tooska ah, joogitaanka lagama maarmaanka ee jidmarka iyo kharashka cuntada laga bilaabo taariikhda uu ka tago markabka ilaa taariikhda uu gaarayo gurigiisa ee ku xusan warqadaha haddii uu badmaaxa ka faa'ideystodariiq ugu dhakhso badan ee suuro gal ah.

4. Badmaaxa u dacwoonaya mushaharooyin aan la siinin sida ku xusan heshiiska shaqada, ha ahaado midka laga baxay ama kan caadiga ah, wuxuu ka furan karaa dacwad lid ku ah marakabka, markableyga, hawlgeliyaha, ama wakiilka rasmiga ah, Maxkammadda awoodda u leh oo ku taala Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya. Haddii dacwoodaha uu ku adkaado isagoo keensaday caddeymo muujinaya in heshiiska si sharci darra ah looga baxay ayadoo ay mas'uuliayadda sharci darrada ay lahaayeen markabka, markableyga, hawlgeliyaha, kaptanka ama wakiilka rasmiga ah, Maxkammadu dacwadaha waxay u xukumi kartaa khasaaraha u dhigma mushaharooyin ka baaqday ayadoo lagu darayo magdhaw u dhiganta lacagta aan ka badnayn saddex lab lacagta ka baaqatey ee la soo caddeeyey.

5. Markii laga eryo markabka badmaaxa, dhamaadka heshiiska ama ka bixidda heshiiska shaqada, ogeysiiska shaqo ka saarista waxaa lagu dhejinaya warqadaha badmaaxa haddii uu dhinaca kale soo codsada waxa laga tasdiiqayaa sarkaalka dawladda ee arrintaas qaabilسان. Badmaaxa wuxuu markasta xaq u leeyahay inuu arko warqadihiisa ama warqadda uu saxiixo markableyga, hawlgeliyaha, kaptanka ama wakiilka rasmiga ah kuna saabsan caddeyn la xiriirta shaqada badmaaxa ee markabka oo ay ku jирто warbixinta waxqabadkiisa iyo fulinta waajibaadka ku xusan heshiiska ee uu ku leeyahay loo shaqeeyaha.

Qodobka 119aad: Mas'uuliayadda markableyga ka saaran xuquuqda badmaaxa

1. Ka sokow bixinta mushaharooyinka, kharashka dhoofinta iyo waajibaadka heshiiska

ee uu leeyahay badmaaxa, sida ku xusan heshiiska shaqada sharcigan, markabka isagoo sii marinaya markableyga, hawlgeliyaha, markabka ama wakiilka rasmiga ah, wuxuu kaloo mas'uul ka noqonaya kharajka xannaaneynta, caafimaadka, magdhawga jirrooyinka, dhaawaca ama geerida aan caadiga ahayn ee badmaaxa inta uu ka shaqeeyaya markabka, sida ku xusan heshiiska shaqada ee uu la leeyahay markabka wata Calanka Soomaaliyeed. Haddii ay timaado geeri aan caadi ahayn oo mas'uul ka yahay markabku, wakiilka shakhsiga ee qofka dhintay wuxuu Maxkamadda qaabilsan ee ku taala Jamhuuriyadda kaga furan kara dacwad uu ku warsanayo magdhawga Dacwooyinka ku saabsan magdhawga jirrada, dhaawac ama geerida, waa in lagu furaa dacwadda muddo saddex sano (3) gudahood laga bilaabo taariikhda jirrada, dhaawaca ama geerida badmaaxa, haddii kale waa laga mamnuucayaa dacwadda, Maxkamadaha Jamhuuriyadda ma oggolaan karaan dacwad uu soo ooga muwaadin ama qof leh dhalasho shisheeyaha, haddii eysan Maxkammad Soomaaliyeed ku qancin in dalkaas shisheeye, isla xaaladahaas lagu oggol yahay in muwaadin ama qof leh dhalashada Jamhuuriyadda dalkaas. Haddii ay dhacdo jirro ama dhaawac inta loogu jiro heshiiska shaqada iyo shaqada markabka, xaqa badmaaxa ee helidda kharashka xannaaneynta iyo daaweynta laguma xiri karo gefka ama khaladka ama ku dhaqanka sharci darrada loo shaqeeyaha. Hase yeeshi loo shaqeeyaha mas'uul uma noqonayo shaqaalahaa, xaaladaha markii uu shaqaaluhu leeyahay gefka isku ogaa markii uu saxiixay heshiiska ama qarinta kaska ee shaqaalahaa jirradiisa ama haddii uu badmaaxu diiday baaris takhtareed ama uu keensaday shahado takhtar isagoo isticmaalaya dariiqyo sharci darra ah ama kuwa aan habboonayn, kuwaasoo keenay in jirradda uu ka dacwoonayo shaqaaluhu uu kordhay.

2. Mas'uuliyadda markabka oo la sii mariyey markableyga, hawlgeliyaha, kaptanka ama wakiilka rasmiga ah waxay ku kooban tahay jirro, dhaawac ama geeri aan caadi ahayn ee badmaaxa haddii la caddeeyo sababta jirrada, dhaawaca ama geerida aan caadiga ahayn ay dhacday taariikhda heshiiska shaqada gaar ahaan laga ogaado taariikhda uu badmaaxu isu xadiriyey markabka dushiisa daraadeed iyo taariikhda dhoofitaanka ee asalka ama ku tala gal ka marka uu dhoofayo tii hadba dhacday markii hore.

3. Haddii jirradu ama dhawaca badmaaxa uu yahay mid muddo gaaban ah kana yimid si toos ah hawsha markabka wata Calanka Soomaaliyeed, mushaharadiisa, kharajka caafimaadka iyo xannaaneynta (haddii uu ka duwan yahya kharashka caafimaadka ama haddii uusan fuushanayn markabka) iyo kharashyada kale ee ku baxday jirrada ama dhaawaca, waxaa bixinaya markabka, badmaaxa markii laga soo saaro takhtarka isagoo la soo daaweyey, lana siiyo shahaado muujinaysa in caafimaadkiisu taam yahay bilaabina kara hawshiisa, waxaa lagu celinaya markabkiisa ayadoo uu markabku bixinayo kharashkiisa, wuxuuna badmaaxu halkaa ka sii wadayaa hawshiisa sida ku qoran shuruudaha heshiiskiisa shaqada ayadoo loo qaadanayo inaysan jirin wax kala go' ah xiriirka shaqada.

4. Badmaaxa haya hawshiisa sida ku qoran heshiiska shaqada la xiriira markabka wata Calanka Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay in markabku ama markableygu uu siiyo kharashka daaweynta, daawooyinka, qalabka daaweynta, safarka, cuntada iyo jiifka iyo kharashka kasta oo kale oo la xiriira jirrada ama dhaawaca ka yimid shaqada laga bilaabo taariikhda ay bilaabatay jirrada ama dhaawaca ka yimid shaqada laga bilaabo taariikhda ay bilaabatay jirrada ama dhacday dhaawaca ilaa la caddeeyo in badmaaxu uu bogsaday ama la caddeyo in jirrada ama karti la'aanta ay tahay mid joogta ah.

5. Markabka ama markableyga waxaa waajib ku ah inuu bixiyo kharajka duugitaanka badmaaxa, geeridiisa ku timid markabka dushiisa ama deked inta uu heyey hawshiisa

ku saabsan markabka, haddii geeridaas ay dhacday inta u dhaxeysay muddada heshiiska shaqadiisa.

6. Wakiilka shaqsiga ee shaqaalaha ama badmaaxa dhintay isagoo hawl ka hayey markabka wata Calanka Soomaaliyeed, kuna dacwoonaya inuu markabku gaarsiyey geeri aan caadi ahayn ama geeri kaga timid jirro ka dhalatay shaqadiisa, wuxuu dacwad ku saabsan magdhaw kaga furan karaa Maxkamadda awooda u leh oo ku taala Jamhuuriyadda. Dacwooyinka aan la oogin muddo saddex (3) sano gudahooda laga bilaabo taariikhda geerida dhaawaca ama markii la ogaaday jirada ama la doonayey inuu ogaado dacwoodaha waa reeban yihiin. Haddii la keeno caddeyn qancinaysa Maxkamadda in sababta geerida, jirrada ama dhawac ay ahayd u qalmid la'aanta badmaridda ee markabka ama gefka, ku dhaqanka sharci darrada ee kabtanka ama sarkaal kale oo kaga hoos shaqeeya, shaqaalaha markabka ama wakiilkiisa shakhsiyeed ee shaqaalaha dhintay wuxuu xaq u leeyahay, ka sokow kharajka xannaanada, daaweynta iyo magdhawga kale ee ay Maxkammadaha Jamhuuriyadda u oggolaadaan kuna saabsan jirada ama dhaawaca inuu magdhaw ganaax ah oo u dhiganta lacag aan ka badnayn saddex lab kharajka la caddeeyey.

BUUGA IV - SOCODSIINTA MARAAKIIBTA IYO XAALADAHA DEG-DEGGA.

QAYBTA 1AAD - KIREYNTA MARAAKIIBTA

Qodobka 120aad: Qodobo guud iyo nidaamka khuseeya

1. Ijaaridda markabka waa heshiis dhexmaray hal dhinac oo ah kireystaha oo la wareegaya dhammaan (ama mararka qaarkood qayb ka mid ah) markab la magacaabay ee uu leeyahay dhinac kale oo ah markableyga. Heshiiska kireynta markabka (Charter Party) waa heshiis ka dhexeeya Markableyga iyo dhinaca ijaartay, tilmaamayana shuruudaha isticmaalka markabka, waajibaadka markableyga iyo kireystaha iyo xuquuqda kale ay ku heshiiyaan dhinacyada.

Guud ahaan, heshiisyada kireynta maraakiibtu waxay u kala baxaan saddex nooc:-

b) Heshiiska safarka oo ah markuu markabku ku hoos jiro kontoroolka markableyga oo ku heshiya inuu qabto hawl ama uu qaado badeecoojin sida uu tilmaamo kireystaha ayadoo la isugu xisaabtamayo safar kasta;

t) Heshiiska muddada oo ah markii uu markableygu haysto, kontoroolka markabka isagoo Wakiil ka ah, amarna ka qaadanaya kireystaha intii muddo ah ee la gooyey; iyo
j) Heshiiska kireynta oo ah markii kireystaha uu la wareego kontoroolka iyo socodsiinta markabka taasoo lagu heshiiyey muddada. Dhammaan noocyada heshiisyada kireynta maraakiibta waxaa lagu dabaqayaa loona fasirayaa sida waafaqsan shuruudaha ku qoran heshiiska iyo xeerarka ay aqoonsan yihiin Ururada Caalamiga ee Gaadiidka Badda.

2. Haddii la isku qabto ama ay ka dhashaan dacwooyin ku saabsan heshiiska kireynta maraakiibta meeshii ay ka maqan yihiin shuruudo, aysan caddeyn ama iskaga horjeedaan, waxaa lagu dabaqayaa nidaamka ku xusan Qodobka 121 ilaa 123aad markii la fasirayo xuquuqda dhinacyada.

Qodobka 121aad: Waajibaadka markableyga & kireystaha

1. Waajibaadka markableyga waa in markasta iyo dhammaan noocyada heshiisyada kireynta maraakiibta uu ku jiro in markabku uu yahay mid u qalma badmaridda iyo dhammaan warqadaha markabka ay yihiin kuwo waafaqsan sharciga taasoo suurtogelineysa in markabku geli karo safar. Baahida ku saabsan u qalmidda

badmaridda laguma heshiin karo si kale. Ka sokow intaas, markableygu waa inuu guud ahaan fuliyaa waajibaadka soo socda:-

b) Inuu si deg deg ah u hagaajiyya isagoo bixinaya kharajka ku saabsan khasaaraha ka dhasha u qalmid la'aanta haddii ay taasu ka imaan cilad qarsoon oo aan la aqoonsan kareyn ayadoo aan la isticmaalin dadaal dheeraad ah.

t) Inuu hagaajiyo ciladaha caadiga ah inta safarka uu ku jiro, markabka la kireystay.

j) Inuu markabku dhiibo kireystaha si uu ugu shaqeysto ayadoo la isugu heshiiyey dekdedda iyo taariikhda.

x) Heshiiska kireynta safarka iyo kuwo muddada go'an, markableyga wuxuu mas'uul ka noqonayaa keenista markabka, qalabeyntiisa iyo saarista korkiisa alaabta quudka iyo shaqaaleyntra markabka isagoo bixinaya lacagtooda sida uu farayo sharciga iyo Xeernidaamiyaha la xiriira nooca markabka, iyo howlihiisa waana inuu dayactiraa markabka isagoo bixinaya kharajka hagaajinta intii muddada heshiiska kireynta ay socoto.

kh) Heshiisyada kireynta safarrada iyo kuwo muddada go'an, haddii uu markabku uu ku haro maamulka markableyga, markableygu waxaa waajib ku noqonaya inuu socodsiyo markabka hab ku saleysan mihnad iyo ganacsi ayadoo la raacayo xeerarka u dhigan nabadjelyada iy badmaridda.

d) Ka hor intaan la bilaabin safarka ku saabsan heshiiska kireynta safarka ama heshiiska muddada go'an, markableygu waa inuu, ka sokow u qalmidda badmaridda markabka, hubiyaa in markabka ay saaran yihiin qalabka lagama maarmaanka ah iyo inuu leeyahay markabku khanan iyo meelo kale ee lagu keydiyo badeecooyinka kireystaha ayna hagaagsan yihiin si loo geliyo, loogu keydiyo, laguna qaado badeecooyinka ayadoo siiba markableygu mas'uul ka noqonayo badeecadda isagoo ku dadaalaya ilaalinteeda.

2. Waajibaadka kireystaha waxaa ka mid ah:-

b) Heshiiska kireynta buuxda ah oo kireystuhu uu la wareegayo markabka macal koontaroolkiisa, waxaa waajib ku ah inuu markabka u qorto shaqaale ayadoo la raacaayo tilmaanta farsamada iyo shuruudaha heshiiska shaqada.

t) Inuu markabka u celiyo markableyga waqtigii iyo meesha lagu heshiiyey isla xaaladdii uu ku sugnaa markabka markii uu bilaabmay heshiiska kireynta markabka marka laga reebo gabowga caadiga.

j) Kireystuhu dib uma ijaari karo markabka mana gudbin karo xuquuqdiisa ku saabsan heshiiska isagoo aan ogolaansho ka heysan markableyga.

x) Kireystuhu markabka ma rahmi karo mana ogolaan karo in lagu xiro xuquuq kale.

kh) Heshiisyada kireynta safarrada ama kireynta muddada, kireystuhu waxaa waajib ku ah inuu keeno, saarana badeecooyin culeyskooda iyo noocooda sida lagu heshiiyey iyo gudbinta dhammaan warqadaha la xiriira badeecooyinkaas, ka sokow intaas kireystuhu waa inuu ku dhejiyya badeecooyinka shabaddo iyo calaamado aqoonsi ah muddada safarka loogu tala galay hase yeeshi markableyga waajib kuma aha inuu hubiyo in warqadahaas iyo tilmaamaha aqoonsiga ay sax yihiin iyo in kale.

d) Heshiisyada safarada iyo kuwa muddada go'an, kireystuhu wuxuu ku dhaqaaqayaa rarida iyo dejinta markabka waqtigii iyo habkii lagu heshiiyey heshiiska kireynta, wuxuuna mas'uul ka noqonayaa khasaaraha ama dhibaatada ku gaartay rarida iyo dejinta aan hagaagsaneyn ama la sameeyay waqtigii aan loogu tala gelin.

r) Ka sokow kharajka la xiriira badeecooyinka, kireystuhu waa inuu bixiyaa kharajka ku saabsan isticmaalka ganacsi ee markabka sida ajuurooyinka wakaaladaha iyo kuwo la midka ah.

s) Kireystuhu waa inuu bixiyaa kirada xamuulka intii muddada uu markabka gacantiisa ku jiro haddii uusan jirin heshiis ka soo horjeeda oo ka dhexeeya markableyga iyo

kireystaha, kirada xamuulka waa in la bixiyaa hormarin ahaan ayadoo loo bixinaayo hafttooyin bil bil ah, hase yeeshiie haddii ay dhacdo xayiraad, la wareegid ama khasaaro markab, waajibaadka bixinta kirada xamuulka wuxuu ku dhamaanaya taariikhda uu falkaas dhacay.

sh) Haddii markabka uu daaho, kireystuhu waa inuu bixiyaa kirada haddii daahiddas ay ka timid sababo badmarid ah oo uusan mas'uul ka ahayn markableyga, hase yeeshiie haddii waajibaadka bixinta kirada uu dhammaaday ayadoo daahiddu ay sabab u ahayd gefka ama taxadar la'aanta markableyga ama haddii markabku uu daahay muddo ka badan afartan iyo sideed (48) saacadood ayadoo ay sabab u ahayd u qalmid la'aanta badmarida; waxaa dhammaanaya waajibaadka bixinta kirada.

Qodobka 122aad: Dhamaadka iyo daahidda

Nidaamka ku saabsan dhamaadka, daahida iyo hor istaagida waxaa ka mid ah:

b) Haddii badmarida markabka kireysan uu joogsado ayadoo ay jirto sabab daruuri ah (force Majorure), heshiiska kireynta waxaa loo qaadanaya inuu yahay mid dhamaaday; hase yeeshiie kireystuhu waa inuu bixiyaa kharajka xamuulka isagoo siinaya lacagtaas markableyga taariikhda uu dhamaaday safarka ama la tirtiray isagoo isla markaas bixinaya kharashka, dejinta badeecoooyinka iyo u celinta markabka, markableyga sida lagu heshiiyey kireynta markabka.

t) Haddii hor istaagida badmarida ay ka dhalato sabab aan ku tala gal ahayn oo ku meel gaar ah, heshiisku wuu sii soconaya kireystaha waajibkiisa ku saabsan bixinta ijaarka xamuulka waxaa weeye mid go'an aan waxna lagama dhimi karo.

j) Kireystaha waa ka noqon karaa heshiiska laakiin waa inuu bixiyaa nus ka mid ah ijaarka xamuulka ee lagu heshiiyey, haddii ka bixidda heshiiska ay dhacdo ka hor inta aan la bilaabin badmaridda, waana inuu bixiyaa dhammaan ijaarka xamuulka haddii kireystuhu uu kaga baxo heshiiska ka dib markii loo boxo safarka, ama uu gudbiyo in ka yar badeecoooyinka lagu heshiiyey, kireystuhu wuxuu mas'uul ka yahay inuu bixiyo kharajyada dhammaan raridda iyo dejinta badeecoooyinka.

x) Haddii imaanshaha laga joojiyey ama ay aad u daahdo ayadoo ka timid sabab aan ku tala gal ahayn, ka bixid la'aanta amarada kireystaha ama sabab kale oo ka baxsan awoodda markableyga, Kabtanku waa inuu mas'uul ka noqdaa nabadgelyada markabka iyo badeecadaha oo ay ku jiraan waxyaabaha ku saabsan ku xiridda deked kale ama ku noqoshada dekeda laga soo baxay.

kh) Haddii qofka ku qoran badeecadaha uu daahiyo ama uu diido inuu la noqdo badeecadda ama uu ka dhasho khilaaf ku saabsan gudbinta, kabtanka wuxuu ka codsan karaa ogollaanshaha Maxkamadda, iney dejiso badeecadaha kuna meeleyso meel ay la habboonaato maxkamaddu, ayadoo uu kabtanku warsan karo oggolaansho, maxkamada iney reebto qaar ka mid ah badeecadaha oo loo gadi karo ijaarka xamuulka, haddii kireystaha uu diido ama uu daahiyo bixinta kirada xamuulka ee lagu leeyahay.

d) Heshiiska wuxuu iskiisa u dhamaanaya sida waafaqsan shuruudaha ku tilmaaman, haddii aan si kale loogu heshiin, heshiis ku dhammaada safar dhexdiisa looma qaadan karo in la cusbooneysiyyey laakiin wuxuu soconaya ilaa dhamaadka safarka.

Qodobka 123aad: Qoraalka iyo xadka

1. Qandaraasyada ku saabsan kireynta markab ka culus 150 GRT waa inuu ahaadaa mid qoraal ah ayna saxiileen kireystaha iyo markableyga ama wakiilkooda si ay u noqdaan kuwo lagu hergelin karo maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

2. Dhinaca xaq u leh dacwad ku saabsan heshiiska kireynta markabku wuxuu keensan

karaa dacwadiisa muddo hal sano gudeheeda laga bilaabo taariikhda dejinta ee heshiiska safarka, taariikhda dhamaadka heshiiska muddada go'an ama heshiiska gebi ahaan haddii kale dacwadaasi lagama furi karo maxkamadaha Jamhuuriyadda.

QAYBTA II - QAADISTA BADEECOYINKA EE BADDA

Qodobka 124aad: Heshiiska qaadista badeecooyinka lagama maarmaannimada qoraalka

1. Heshiiska qaadista badeecadaha wa heshiis caddeyn warqadda raridda ama warqad la mid ah oo ka dhexeeya qaadaha iyo qofka leh badeecadaha oo ku waajibineysa qaadaha inuu ka qaado badeecadaha deked ilaa deked kale, heshiiska wuxuu saarayaawaa waajibaad iyo mas'uuliyado, dhinacyada kaasoo fasirayo sida waafaqsan shuruudaha qandaraaska qaadista iyo sida ku qoran sharcigaan.
2. Qaybtan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan warqadaha raridda (Bil of Lading) ama warqadaha la midka ah oo ku saabsan keenista ama qaadista badeecadaha ilaa dekedaha Jamhuuriyadda oo lagu fulinayo ganacsiga dibadda. Hase yeeshie, heshiisyada qaadista badeecadaha ee maraakiibta ka culus 150 GRT waa iney ahaadaan qoraal, sidii dhinacyada midkood uga hergelin karo maxkamadaha JDS.

Qodobka 125aad: Caddeymo

1. Marka lagu isticmaalo qaybtan erezada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida ku qoran hortooda:-
 - b) "Qaade" Waxaa loola jeedaa markableyga, hawlgeleyaha ama kireystaha oo heshiiska ku saabsan qaadista lala gelaya diraha.
 - t) "Heshiiska Qaadista" waxaa loola jeedaa kaliya heshiisyada qaadista oo ku xusan warqadda raridda ama warqad la mid ah haddii warqadaas ay sameyso qaadista badeecooyinka ee badda, oo ay ku jiraan warqadda raridda ama warqad la mid ah oo la bixiyey ayadoo la tixgelinayo heshiiska kireynta markabka laga bilaabo markii warqadda raridda ama tu la mid ah oo habeyneysa xiriirka ka dhexeeya qaadaha iyo hayaha warqaddaas.
 - j) "Badeecadaha" waxaa loola jeedaa badeecooyinka dharka, alaabta iyo waxyaabaha kale ee nooc kasta ah marka laga reebo badeecooyinka si cad looga reebay heshiiska oo lagu haynayo markabka dushiisa.
 - x) "Markab" waxaa loola jeedaa markab kasta, doonyaha ama maraakiibta yaryarka oo loogu talagalay qaadista badeecooyinka ee badda sida waafaqsan Qodobka 124aad ee qaybtan.
 - kh) "Qaadista badeecadaha" waxaa loola jeedaa muddada u dhexeysa taariikhda raridda iyo dejinta badeecadaha markabka.
 - d) "Diraha" waxaa loola jeedaa qofka leh badeecadaha, ama qareenkiisa ama wakiilkiisa oo metelaya qofka iska leh badeecadaha, fulinayana warqadda raridda ama warqad la mid ah oo caddeyn u noqoneysa heshiiska qaadista badeecadaha ee badda.

Qodobka 126aad: Warqadda raridda iyo bixinteeda

1. Warqadda raridda waxay tahay caddeyn ta koowaad oo ah inuu helay qofka qaadaya badeecadaha ku xusan warqadda raridda.
2. Markuu helo badeecadaha, qaaduhu, wuxuu sameynayaa una gudbinayaa qofka dirsaday, warqadda raridda ama warqad la mid ah oo muujinaysa waxyaabaha soo socda:-
 - b) Calaamadaha gaarka ah oo lagama maarmaan u ah aqoonsiga badeecadaha oo uu soo

gudbiyey diraha ka hor inta aan la bilaabin raridda.

t) Tirada alaabta ama badeecooyinka ama miisaanka ama culeyska badeecadaha, sida ay hadba noqoto oo uu diruhu qoraal ahaan ugu soo gubiyey qaadaha.

j) Kala mudnaanta iyo xaaladda badeecadaha ee kor ka muuqda. Hase yeeshi caddeyn ta dhabta ah ee tilmaamaha waxay saaran tahay diraha, Qaadaha waajib kama saarna inuu ku muujiyo warqadda raridda calaamadaha, tirada, miisaanka, culeyska, mudnaanta ama xaaladda ay ku sugari yihin badeecadaha oo ay la noqoto inaysan sax ahayn kuna saabsan badeecadaha uu qabtay ama uusan haysan awood uu ku qabto dib u fiirstooda.

3. Qofka diraha badeecadaha waxaa loo qaadanaya inuu u damaanad qaaday qaadaha, inay sax yihin markii la dhoofinayey badeecadaha, calaamadaha, tirada, miisaanka iyo culeyska uu soo sheegay; Diruhu wuxuu u magdhabayaa qaadaha, dhammaan khasaara, dhibaatada iyo kharajyada la xiriira ama ka dhasha khaladaadka tilmaamahaas. Xaqa qaadaha ee ku saabsan magdhabidda marna ma xadeyn karo mas'uuliyaddiisa ku saabsan heshiiska qaadista cid aan diraha ahayn laguma laha.

Qodobka 127aad: Waajibaadka qaadaha

1. Marka laga reebo inta ku qoran Qodobka 129aad ee soo socda, qaadaha waxaa heshiis kasta ee qaadista badeecadaha ee badda, uga xilsaaran yahay waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ku xusan halkan:-

b) Qaadaha waxaa waajib ku ah, ka hor iyo bilowga safarka, inuu ku dadaalo inuu markabka ka dhigo mid u qalma badmaridda, isagoo la saaray shaqaale, qalab iyo sahay ku habboon, laguna sameeyo khananka keydka, kuwo qaboojiyeyaasha leh iyo khanka qaboojinta iyo in dhammaan qaybaha kale ee markabka oo lagu qaadayo badeecadaha ay yihin kuwo u qalma keydkooda iyo hayntooda.

t) Qaaduhu wuxuu si habboon iyo si taxadar leh u rarayaa, dhaqaajinayaa, haynayaa, xannaaneynayaa iyo dejinayaa badeecadaha uu soo qaaday.

2. Tallaabada uu diruhu ka qaadi karo qaadaha oo ku saabsan khasaara, ama dhibaato ka gaartay badeecadaha waxay ku kooban yihin waxayaabaha soo socda:-

b) Haddaan ogeysiis qoraal ah ee ku saabsan khasaara, ama dhibaatada iyo caddeyn xaaladda guud ah laga siiyo qaadaha ama wakiilkiisa dekeda dejinta ka hor ama waqtiga ka saarista badeecadaha oo loo gelinayo gacanta qofka xaq u leh dhiibistooda, waxay noqoneysaa caddeyn koowaad ee dhiibista badeecadaha uu dhiibay qaadaha sida lagu tilmaamay warqadda raridda ama warqad la mid.

t) Haddii khasaara, ama dhibaatada ku tilmaaman farqadda 2(b) ee Qodobkan uusan muuqan waqtiga dejinta badeecadaha, ogeysiis qoraal ah ee ku saabsan khasaara, ama dhibaatada waa in la siiyaa qaadaha ama wakiilkiisa muddo saddex (3) maalmood gudhooda oo laga bilaabayo dhiibistaas.

j) Hase yeeshi, qaaduhu iyo markabku waxay kaga baxayaan mas'uuliyad kasta oo ku saabsan khasaara, ama dhibaatada badeecooyinka haddii aan dacwad lagu soo oogin hal sano kadib laga soo bilaabo taariikhda dhiibista badeecadaha ama taariikhda la rabayin lagu gudbiyo badeecadaha.

x) Ogeysiiska ku tilmaaman faqradda 2(b) iyo (t) ee Qodobkan looma baahna mana ka reebaya in dacwadda lagu furo haddii badeecadaha lagu sameeyey kormeer ama dib u firis wadajir ah waqtigii dhiibista.

3. "Badeecadaha la dhoofiyey" warqadda raridda kaddib markii badeecadaha la raro, warqadda raridda waxaa bixinayaa qaadaha, Kabtanka ama Wakiilka qaadaha isagoo u gudbinaya diraha, haddii dhoofiyuhu soo codsadona warqadda raridda waxay

muujinaysaa in badeecadaha la diray; Hase yeeshi, haddii dhoofiyuhu uu helay warqad kale oo caddeynayso mulkiyadda badeecadaha, wuxuu badeecadahaas gacanta ugu saaraya haddii loo soo gudbiyo warqadda raridda oo ku saabsan diridda. Haddii qaaduhu sidaas u doorto, warqadda wuxuu ku arkayaa dekeda raridda, Kaptankama Wakiilka ayadoo ay ku qoran yihiin magaca ama magacyada markabka (Maraakiibta) oo lagu diray badeecadaha iyo taariikhda diridda ayaa markii la ogaaday arrintaas, waxaa loo qaadanayaa inay tahay warqadda raridda intii ku saabsan Qodobkan.

Qodobka 128aad: Nidaamka xadeynaya mas'uuliyadda taxadar la'aanta

1. Nidaam, xeer ama Heshiis kasta oo ku saabsan qaadista badeecadaha ee badda oo ka reebaya qaadaha markabka mas'uuliyadda khasaaraha ama dhibaato loo geystay badeecadaha, kana dhashay taxadar la'aan, gef ama khaladaad ku saabsan waajibaadka iyo mas'uuliyadda qaadaha ama yaraynaya mas'uuliyadda uu sharcigan ama xeernidaamiyaha uga saaray, waxaa loo qaadanayaa inay waxba ka jirin.

Faa'idada caymiska loo sameeyey qaadaha ama nidaam la mid ah waxaa loo qaadanayaa inay tahay wax ka reebaysa mas'uuliyadda qaadaha.

2. Hase yeeshi, Qaaduhu wuxuu xor u yahay in dhammaan ama qayb ahaan dhiibo xaquuqdiisa iyo bursiinooyinkiisa ama kordhisto mas'uuliyaddiisa iyo waajibaadkiisa ku saabsan Qaybtan, haddii aysan ku qornayn warqadda raridda ama warqad la mid ah oo la siiyey.

3. Nimaadka qaybtan laguma dabbaqayo heshiisyada kireynta laakiinse haddii warqadaha raridda loo soo saaro markab la kireystay, warqadahaas waa inay fuliyaan shuruudaha Qaybaan. Wixii ku qoran Qaybtan kama reebayso in warqadda raridda lagu qoro nidaam sharci ah oo ku saabsan khasaaraha guud.

Qodobka 129aad: Heshiis gaar ahaaneed oo ku saabsan badeecooyinka gaarka ah Markii ay jiraan duruuf gaar ahaaneed oo ku saabsan dabiicad ama xaalad badeecadaha la qaadayo ama ay jiraan duruuf, shuruud iyo xaalado markii qaadista ay u baahan tahay heshiis, Qaaduhu, Kaptankama Wakiilka qaadaha iyo Dirahu waxay xor u noqonayaan inta ku saabsan badeecadaha qaarkood keliya ayagoo lala gelaya heshiis sidii loo xadeeyo waajibaadka qaadaha, mas'uuliyaddiisa, xuquuqdiisa iyo bursimooyinkiisa inta ku saabsan badeecadahaas ama u qalmid badmaridda markabka haddii taas aysan ka hor imaanin siyaasadda guud. Hase yeeshi shuruudahaas laguma dhigayo warqadda raridda, waxaase lagu dhigayaa rasiidh gaar ah oo aan caddeyn u noqoneyn milkiyadda ama wareejinta. Heshiiskaas oo gaarka ah kuna saabsan badeecadaha gaarka ah laguma dabbaqayo dhoofin ganaci oo caadi ah oo la xiriira ganacsiga guud.

Qodobka 130aad: Mabaadiida ku saabsan mas'uuliyadda qaadaha

1. Qaaduhu wuxuu inta ku saabsan Qaybtan, mas'uul ka yahay khasaaraha ama dhibaatada gaartay badeecadaha laga bilaabo raridda ilaa dejinta iyo dhibaatada ku gaartay daahidda awgeed, haddii uusan caddeynin in sababta khasaaraha, dhibaatada ama daahiddu aysan ka imaanin khaladkiisa ama khaladka adeegeyaasha. Caddeynta uu khasaarahaas, dhibaatadaas ama daahiddaas ay sabab u ahayd gefka qaadaha ama adeegayaashiisa, waxaa mas'uul ka ah diraha oo uu dacwoonaya khasaaraha ama dhibaatada gaartay.

2. Hase yeeshi wixii ku qoran Qaybtan, kama reebi karto qaadaha ama diraha inuu galo heshiis, qodob gaar ah, shuruud, reebitaan, ama saamixid mas'uuliyadeed oo ku

saabsan qaadaha ama markabka, khasaaraha ama dhibaatada gaartay intii la xiriirtay haynta, xannaanada iyo dhaqdhaqaqa ka hor raridda badeecadaha iyo ka dejinta dambe ee markabka lagu dhoofiyey badeecadaha.

3. Qaadaha ama markabka midna mas'uul kama noqonaya khasaaraha, dhibaatada ama daahidda haddii aysan ka dhalanin dadaal la'aanta qaadaha oo laga rabay inuu markabka ka dhigo mid u qalma badmaridda ama si kaleba u fuliya waajbaadkiisa la xiriira Qaybtan.

4. Diruhu mas'uul kama noqonayo khasaaraha ama dhibaatada gaartay qaadaha ama markabka oo ka dhalanaysa sabab kasta aan ahayn falka, gefka ama taxadar la'aanta diraha, wakiiladiisa ama adeegayaashiisa.

5. Ka leexinta markii la badbaadinayo ama laysugu dayayo badbaadinta naf ama hanti badeed leexashada macquulka ah looma qaadan karo ku xadgudub Qaybtan ama heshiiska qaadista qaaduhuna mas'uul kama noqonayo khasaaraha ama dhibaatada ka timaado.

Qodobka 131aad: Xadeynta mas'uuliyadda qaadaha

1. Haddii diruhu uusan dabiicada iyo qiimaha badeecadaha ka hor dhoofinta, ku dhigin warqadda raridda, qaaduhu marna mas'uul kama noqonayo lumidda ama khasaaraha gaaray badeecadaha wixii ka badan Shs. 10,000 baakad kasta ama shay kasta Shs. So.100/= kilo kasta miisaanka duuban ee badeecadaha lumay ama gaartay khasaaro kii hadba badnaada.

2. Lacagta oo dhan ee laga heli karo waxaa lagu xisaabinaya ayadoo la tixraacayo qiimaha badeecadahaas meesha iyo waqtiga la dejiyey ama la rabay in laga dejiyo markabka sida waafaqsan heshiiska.

3. Haddii qaadista lagu sameeyay konteenar, xirmo (Pallet) ama qalab la mid ah si badeecadaha loo xoojiyo, tirada baakooyinka ama ashiyada lagu sheegay warqadda raridda sida hadba lagu xiray qalabka dhoofinta, waxaa loo qaadanaya inay ku jiraan baakooyinkaas ama ashiyadaas ayadoo la raacayo Qodobkan. Haddii aan si kale loo sheegin lambarkan qalabka qaadista waxaa loo qaadanaya inuu yahay baako ama shay.

4. Dabiicada iyo qiimaha badeecadaha ee uu soo sheegay diruhu ayadoo la tixraacayo faqradda 1aad ee Qodobkan waxay u tahay caddeyn arrintaas, hase yeeshie qaaduhu mas'uul kama noqonayo waxyaabahaas.

5. Qaaduhu marna mas'uul kama noqonayo lumidda ama khasaaraha gaartay ama la xiriirta badeecadaha haddii qiimaha ama dabiicada badeecadahaasu uu diruhu ogaan ama taxadar la'aan khalad ku qoray.

6. Ayadoo la tixraacayo heshiiska ka dhxeeyaa qaadaha ama wakiilkiisa iyo diraha, xadka ugu badnaanta ee mas'uuliyadda oo ka badan tan uu dhigay Qodobkan, waa la goyn karaa; Hase yeeshie xadka mas'uuliyaddaas lagama yareyn karo wax ka yar inta uu dhigayo Qodobkan.

Qodobka 132aad: Badeecadaha khatarta ah

1. Dhoofinta badeecadaha ololi kara, qarxi kara ama leh dabiicad khatar ah, haddii qaaduhu ama wakiilkiisa uusan oggolaan isagoo og dabiicaddooda iyo noocooda, waxaa lagu dejin karaa meel kasta ka hor meeshii loogu tala galay dejintooda ama waa la burburin karaa ama laga saari karaa khatarta ayadoo aan la dhiibin wax magdhaw ah, diraha badeecaddaasna wuxuu mas'uul ka noqonaya dhammaan khasaaraha iyo kharashka ku baxa si toos ah ama si dadban, dhoofintooda. Xaaladahaas, qaaduhu wuxuu mas'uul ka noqonaya ma jirto.

2. Haddii badeecadahaas lagu dhoofiyey ogaanshaha iyo oggolaanshaha qaadaha, ay

khatar u noqdaan markabka ama badeecadda sidoo kale waxaa lagu dejin karaa meel kasta, lana burburin karaa ama uu ka saari karaa khatarta, qaaduhu isagoo aan mas'uul ka noqonayn marka laga reebo khasaaro guud haddii uu jiro.

Qodobka 133aad: Xadeynta dacwooyinka

1. Difaacyada iyo xuduuda mas'uuliyadda oo lagu tilmaamayo Qeybtan waxaa lagu dabbaqayaa dacwad lid ku ah qaadaha oo ku saabsan lumidda ama khasaaraha badeecadaha oo ku qoran heshiiska dhoofinta, dacwaddu ha ku dhisnaato heshiiska dhoofinta ama gefka (tort).
2. Haddii dacwadaas lagu oogo adeegaha ama wakiilka qaadaha (haddii adeegahaas iyo wakiilkaas uusan iskiisa ahayn qandaraasley), adeegahaas ama wakiilkaas wuxuu xaq u leeyahay inuu uga faa'ideysto difaacyada iyo xuduuda mas'uuliyadeed oo uu qaaduhu xaq u leeyahay sida ku qoran Qaybtan.
3. Qiyaasta lacagta laga heli karo qaadaha, adeegayaasha iyo wakiilada, marna ma dhaafi karto xadka ku qoran Qaybtan.
4. Ayadoo ay jiraan faqradaha 1, 2, iyo 3 ee Qodobkan, adeegaha ama wakiilka qaadaha xaq uma laha inuu isaga ka faa'ideysto nidaamka ku saabsan xadka ee ku qoran Qodobkan haddii la caddeeyo in lumidda ama khasaaruhu ka yimid fal ama gefka adeegaha ama wakiilka oo uu ku sameeyay ujeeddada geysmo khasaare ama uu hawshiisa ku qabtay taxadar la'aan taasoo uu ogaa ama ay ahayd inuu ogaan karayn in lumid ama khasaaro ka iman karo.

Qodobka 134aad: Xadka awoodda iyo muddada

1. Diraha ama qofka uu magacaabay wuxuu keensan karaa dacwad ku saabsan lumid ama khasaaro liddi ku ah qaadaha, sida uu dhigayo heshiiska qaadista badeecadaha ee badda, Maxkamad ka tirsan Jamhuuriyadda oo ku taal deked Soomaaliyeed oo ay badeecadaha ku soo degeen ama la rabay inay ku soo degaan.
2. Dacwadaha ku saabsan qaybtan waa in lagu soo oogaa muddo hal (1) sano gudaheed laga bilaabo taariikhda gudbinta ee ku tala galka ama taariikhda gudbinta ee dhabta ah hadba tii dambeysa, ama haddii dacwadda laga mamnuucay Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya. Muddada waa la kordhin karaa marka keliya ee dhinacyadu ay ku heshiiyaan in la kordhiyo kaddib ay dhacdo dacwaddu.

Qodobka 135aad: Isu wareejinta warqadda raridda

Warqadda raridda ama warqad la mid ah waxay muujinaysaa lahaanshaha badeecadaha waxaana weeye warqad la isagu wareejin karo. Nidaamka Madaniga ee Jamhuuriyadda kuna saabsan warqaddaha qiimaha leh ee la isu warejin karo ayaa lagu dabbaqayaa warqadaha raridda iyo warqadaha la midka ah. Ka sokow intaas, Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer-hoosaadyo iyo Xeer-nidaamiyeaal ku saabsan warqadaha raridda iyo wixii kale ee ku qoran Qaybtan, kuwaasoo la rabo inay waafaqsanaadaan nidaamka Qaybtan awooddooduna waxay la mid tahay sharci.

Qodobka 136aad: Xeer nidaamiyaha ku saabsan iibka waxyaabaha la xiriira badda
Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda, wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer-hoosaadyo iyo Xeer-nidaamyo ku saabsan iibka waxyaabahan la xiriira badda, oo ay ku jiraan halista lumidda iyo arrimaha kale ee ku saabsan xiriirka dhinacyada ay ula lahaan karaan iibka waxyaabahaas.

Qodobka 137aad: Konteenaro fiican oo loogu tala galay badeecadaha caalamiga

1. Wasiirka Kalluumeyysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu dejinaya barnaamij ku saabsan kormeer, oggolaansho iyo baaris waqtii ka waqtii ee konteenarada lagu isticmaalo dhoofinta badeecadaha badda. Marka la dejinayo barnaamijkaas, Wasiirka Kalluumeyysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye wuxuuna awooddisa maamuleed u wakiilanayaa cid kale ee barnaamijka ayadoo la tixgelinayo Xeerarka Caalamiga oo uu ka mid yahay Xeerka Caalamiga ee Nabadvigelyada Konteenarada iyo Lifaaqyadiisa oo lagu soo saaray Geneva, Switzerland, taariikhda markay ahayd 2.12.1972.

2. Wasiirka Kalluumeyysiga iyo Gaadiidka Badda isagoo ku soo saaraya Xeer-nidaamiye, wuxuu leeyahay awood fulin xagga barnaamijka oo ay ku jirto awoodda sharchiyeed ee baarista konteenarada, bixinta amarada xayiraadda, reebitaanka ama ka joojinta adeegga, konteenarada lagu arko inay cilado qabaan iyo inuu sameeyo baaris xagga ku-dhaqanka nidaamka dhoofinta dhinaca maraakiibta, sidii hadba loo baahdo.

3. Ganaaxyada madaniga ee lagu ciqaabayo milkiilaha, qofka ay u socdaan ama damiinka konteenarada ciladaha lahaa oo si kas ah u gefay ama diiday inuu fuliyo ogeysiiska iyo amarrada uu soo saaray Wasiirka Kalluumeyysiga iyo Gaadiidka Badda ama Hay'adda wakiil u ah, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badnayn Shs.So.

100.000/= xad gudub kasta.

QAYBTA III QAADISTA RAKAABKA EE BADDA

Qodobka 138aad: Heshiisyada qaadista

1. Ayadoo la fulinayo heshiiska qaadista rakaabka, qaaduhu wuxuu ballan qaadayaa isagoo qaadanayo kiro, inuu ka dhoofiyo dad deked ilaa deked kale ama safar la tilmaamay. Haddii qaadistu tahay mid markab ah, heshiiska waxaa lagu cadeynayaa tigidh uu bixiyo qaaduhu oo tilmaamaya meesha iyo taarikhda la dhoofayo iyo meesha loo dhoofayo iyo lacagta kirada, hase yeeshi heshiisyada dhoofinta rakaabka ee doonta, waxaa lagu sameen karaa af. Haddii aan si kale loogu heshiin, kirada waxaa loo bixinayaa horumarin ahaan.

2. Kirada waxaa ku jira cuntada rakaabka iyo qaadista alaabtiisa oo miisaankeeda xaddidan yahay, ayadoo qaaduhu uu tilmaamayo cabirkiiisa iyo noociisa, ama sida waafaqsan caadooyinka. Lacagta koridda iyo degidda rakaabka iyo alaabta waxaa laga qaadayaa rakaabka naftiisa haddii uusan ku jirin kirada.

Qodobka 139aad: Wareejinta xaqa qaadista

Xaqa qaadista lama wareejin karo ayadoo aan oggolaansho rasmi ah laga haysan qaadaha, haddii tigidhka uu ku qoran yahay magaca rakaabka ama haddii aysan ku qornayn magaca rakaabka, laakiinse uu ku bilaabay safarkan.

Qodobka 140aad: Rakaabka dhoofi waayo

1. Haddii ka hor safarka, rakaabku dhinto ama ay dhalato hor-joogsad taasoo aan sabab u ahayn isaga, oo ka reebaya bilaaabidda safarka, heshiisku waa dhamaanayaa ayadoo loo celinayo lacagta afar meelood saddex meel rakaabka baaqday isagoo laga reebayo lacagta cuntada haddii ay ku jirtay kirada. Haddii hor joogsadku uu saameeyo qof kamid ah xigtada ama dad kamid ah qoyska oo ku wada jiray safarka, rakaabkasta wuxuu soo codsan karaa in la tirtiro heshiiska isla shuruudihii.

2. Xaaladaha ku xusan faqradda kore, qaaduhu waa in laga wargeliyaah hor joogsadka ka hor safarka. Haddii rakaabku ama wakiilkiiisa oo doonaya soo celinta

lacagta, uu ku gefo inuu ogeysiyo qaadaha ka hor inta aan lagu tala galin waqtiga safarka, qaaduhu wuxuu xaq u leeyahay inuu helo kirada oo dhan isagoo rakaabka waxba loo celinayn.

Qodobka 141aad: Daahidda, hakadka iyo wareejinta

1. Qaadaha waa in la siiyaa kirada oo dhan rakaabkana wax lacag ah looma celinayo haddii uu waqtiga bixintaanka loogu talagalay, ku imaan waayo.
2. Haddii rakaabku, isagoo oggolaaday qaaduhu, uu ku wareejiyo, heshiiskiisa qof kale, lacagta kirada oo dhan waa in la siiyaa qaaduhu, hase yeeshi waajibaadka bixinta kirada wuxuu la wareegayaa heshiiska haddii aan markii hore la bixinin.
3. Haddii safarka la hakiyo ayadoo ay jiraan sababo daruuri ah, qaaduhu, wuxuu yeelanayaa kirada safarka inta la soo maray. Hase yeeshi haddii rakaabka siiyey jiif iyo cunto oo ku jiray kirada, safarkana uu ku sii wado markab la mid ayadoo uu kharashka bixiyey qaadaha, kirada oo dhan waa in la siiyaa qaadaha. Wax lacag ah ama khasaara oo lasoo celinayo lama oggola haddii rakaabka uu mas'uul ka ahaa ama ay jireen sababo kale oo uu mas'uul ka ahayn qaaduhu, oo uuna joogsaday safarka.
4. Qaaduhu wuxuu mas'uul ka yahay khasaaro ama dhibaato ku dhacday rakaabka, taasoo uu sabab u ahaa qaaduhu sida daahidda ama beddelka safarka, haddii uusan qaaduhu caddeynin in falka keenay khasaaraha ama dhibaatada uusan ahayn mid sabab u ahaa falka qaadaha. Nidaamka ku saabsan qaybinta khasaaraha waa la oggol yahay haddii uu jiro heshiis qoraal oo uu saxiixay qaadaha iyo rakaabka.

Qodobka 142aad: Waajibaadka qaadaha ka hor safarka

Si loo horumariyo badbaadada nolosha badda, Sharcigu wuxuu dhigayaa heerka ugu sarreya ee looga rabo qaadaha ijaar uu ku qaadayo rakaabka. Qaaduhu, ha ahaado markableyga, hawlgeleyha ama kireystaha markabka wuxuu xaqijinayaa ka hor inta aan loo bixin safarka iyo muddada uu socdo safarku, inuu markabka yahay mid u qalma badmaridda, kuna rakiban tahay, qalabka habboon, la saarayna shaqaalaha u qalma iyo raashiin iyo qalabka ku saabsan nabadgeleyada iyo badbaadinta nolosha kuwaasoo wada shaqeynaya, si loo fuliyo heshiiska lana hubiyo badbaadada rakaabka.

Qodobka 143aad: Mas'uuliyadda qaadaha xagga shilalka

1. Qaaduhu wuxuu mas'uul ka noqonayaa khasaaraha ka yimaada dhimashada ama dhaawaca Shakhsiyeed ee rakaabka haddii falka ama shilka keenay dhimashada ama dhaawaca uu dhacay intii rakaabka fuushana markabka dushiisa ama uu fuulayey ama ka degayey ayadoo uu gefku lahaa qaadaha ama adeegeyaashiisa ama wakiiladiisa oo isaga u shaqeynayaayey.
2. Haddii qaaduhu si ka duwan u caddeynin, waxaa loo qaadanayaa inay gefeen qaadaha, adeegeyaashiisa iyo wakiiladiisa markii ay timaado geeri, ama dhaawaca shakhsiyeed oo ka timid ama la xiriirta burbur markab, isjiirid, habaabid, qarxin, ama dab.
3. Marka laga reebo faqradda 2aad ee Qodobkan mas'uuliyadda caddeynnta gefka qaadaha, adeegeyaashiisa ama wakiiladiisa waxay saran tahay dacwoodaha.

Qodobka 144aad: Xadka mas'uuliyadda qaadaha

1. Mas'uuliyadda qaadaha ee geerida ama dhaawaca shakhsiyeed ee rakaabka oo kira laga qaatay, waxaa la waafajinaayaa Qodobka 82aad ee Qaybtan.
2. Qaadaha iyo Rakaabka waxay ku heshiin karaan xad sare mas'uuliyadeed.
3. Xadkan mas'uuliyadda waxaa lagu dabbaqayaa wadajirka dacwooyinka la soo

gudbiyey ama lagu soo gudbiyey magaciisa rakaabka, dhaxaltooyadiisa ama dadka uu mas'uul ka yahay, dacwooyinkaas oo ka dhasha dhacdo keliya.

4. Qaadaha xaq uma laha inuu ka faa'ideysto xadka mas'uuliyadeed ee ku xusan Qodobkan haddii, la caddeeyo in geeridu ama dhaawacu ka dhashay fal ama gefka qaadaha ama adeegeyaashiisa ama wakiiladiisa oo loogu kacay ujeeddada gaarsinta khasaaraha ama taxadar la'aanta ah oo uu dhinacu ogaa ama la doonayey inuu ogaado in khasaarahaasu uu dhici karo.

5. Heshiis la dhameeyey ka hor dhicida falka keenay khasaaraha, oo ka reebaysa mas'uuliyadda qaadaha dhinaca rakaabka ama dhaxaltooyadiisa ama dadka uu mas'uul ka yahay ama dhigidda xad ka hooseysa tan uu gooyey sharcigan iyo qodob kale oo ka wareejinaysa mas'uuliyadda caddeyn taan ee saaran qaadaha ama dhigaya in khilaafka loo gudbiyo Maxkamad gaar ah ee qaabilsan ama dhexdhedaadin waxaa weeye mid aan waxba ka jirin.

6. Qodobadan sharcigan waxay dhigayaan habka magdhabida geerida ama dhaawaca ku yimaada rakaabka, hase yeeshi awoodda madaniga waxaa ka faa'ideysan kara kuwa ku dacwoonaya magdhawga geerida ama dhaawaca oo dacwooyinkooda ku dhisan yihiin heshiiska.

Qodobka 145aad: Dacwad lid ku ah qaadaha

1. Haddii ay jiraan dacwooyin ku saabsan geeri ama dhaawac shakhsiyeed ee ku dhacay rakaabka ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan dacwada waa in loo gudbiyaa qaadaha ama Wakiilkiisa muddo soddon (30) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda uu rakaabka ka degay ama ahayd inuu ka degto. Haddii uusan jirin ogeysiiskaas ama caddeyn lid ku ah, rakaabka, waxaa loo qaadanayaa inuu ka degtay markabka isagoo nabad ah.

2. Dacwooyinkaas ku saabsan magdhawga geerida ama dhaawac shakhsiyeed ee ku dhaca rakaabka, waxaa lagu soo oogayaa muddo sadddex (3) sano gudaheed laga bilaabo taariikhda degitaanka ama waa laga mamnuucayaa Maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

3. Dacwooyinka ka dhasha dhaawac shakhsiyeed oo la xiriira heshiiska dhoofinta iyo haddii ay dhacdo geeri degitaan kaddib, muddada xadka waxaa la xisaabinayaa laga bilaabo taariikhda geerida, hase yeeshi muddada xadka marna kama badnaan karto afar (4) sano laga bilaabo taariikhda degitaanka.

Qodobka 146aad: Dacwooyin lid ku ah adeegeyaasha iyo wakiilada qaadaha

1. Iyadoo la tixraacayo faqradda 2aad ee Qodobkan haddii dacwad lid ku ah adeegaha ama wakiilka qaadaha, kuna saabsan geeri ama dhaawac ku timaada rakaab ayadoo la caddeeyay in adeegaha ama wakiilka uu fulinayey hawsha looga xil saaray qaadaha, wuxuu xaq u leeyahay inuu uga faa'ideysto difaacyada iyo xadka mas'uuliyadeed ee uu qaaduhu naftiisa xaq u lahaan lahaa inuu ku dacwoodo.

2. Adeegaha ama wakiilka qaadaha xaq uma laha inuu kaga faa'ideysto difaacyada iyo xadka mas'uuliyadeed ee ku qoran qaybtan, haddii la caddeeyo in geeridu ama dhaawacu uu kaga yimid fal ama gefka adeegaha ama wakiilka oo lagu sameeyay ula kac si loo gaarsiiyo khasaaraha ama lagu sameeyey taxadar la'aan taasoo uu ogaa ama ahayd inuu ogaado in khasaarahaas uu ahaa mid dhalan karay.

QAYBTA IV - KA QAYBGALKA KHASAAROOYINKA GUUD (GENERAL AVERAGE)

Qodobka 147aad: Falka khasaaraha

1. Fal khasaare wuxuu jirayaa marka keliya ee ay dhacdo hurid aan caadi ahayn ama la galoo kharash macquul ah oo la sameeyey si kas ah ujeeddadiisuna ahayd in laga ilaaliyo dhibaato ku timaado hanti la wada leeyahay oo ku saabsan dhacdo badeed.
2. Magdhawgaas iyo kharashkaas oo si toos ah kaga dhasha falka khasaara guud ee keliya, waxaa loo oggolaanayaa inay yihiin khasaaro guud. Khasaaro ama dhibaato ku timaado markabka ama badeecadaha xagga daahidda muddada safarka ama kaddib, sida kharashka ku daahidda dekedda iyo khasaaro kale ee aan toos ahayn sida lumidda faa'idada suuqa looma oggola inuu qayb ka noqdo khasaaraha guud.

Qodobka 148aad: Mas'uuliyadda caddeyntra

Dhinaca u dacwoonaya khasaaraha guud waxaa saaran mas'uuliyadda caddeyntra in khasaarahaas ama kharashka lagu dacwoonayo uu ka dhashay fal ku saabsan khasaaraha guud.

Qodobka 149aad: Hurid iyo kala qaybsashada kharashka

1. Huridda iyo kharashka ku saabsan khasaaraha guud waxaa loo kala bixinayaa sida ay dhigeyso qaybtan oo ay ku jiraan waxyaabaha soo socda:-
 - b) Xuquuda khasaaraha guud la waxyeelye maayo xitaa haddii falku ama dhacdadu dhaliso huridda ama kharashka ay ka yimaadeen gef ka tirsan dhinacyada.
 - t) Kharashyada dheeraadka oo la galay meeshii kharashka lagu oggolaan lahaa khasaaraha guud, waxaa loo qaadanayaa inuu yahay kharashka khasaaraha guud waana la oggolaanayaa iyadoo aan tixgelin la siinaynin keydka ama danaha kale, hase yeeshie, lacagta waa inaysan ka badan lacagta kharajka ee khasaaraha guud ee la baajiyey.
 - j) Khasaaraha Guud waxaa la isku hagaajinayaa xagga khasaaraha iyo isugeynta oo saldhig looga dhigayo qiimaha waqtiga iyo meesha uu ku dhamaado dhacda badda; hase yeeshie jiritaanka ma sameynayo xulushada meesha lagu sameynayo khasaaraha guud.

Qodobka 150aad: Khasaaraha guud – duruufa gaar ah

1. Tuurista badeecadaha: Badeeco la tuuray lagama magdhabi karo khasaaraha guud, haddii aan badeecaddaas loo sidin ayadoo waafaqsan ku dhaqanka caadiga ee ganacsiga oo aqoonsan yahay.
2. Khasaaraha tuurista iyo huridda loogu tala galay nabadjelyada guud: Khasaaraha gaaray markabka ama badeecadaha ama labadaba ayadoo hurashada loo sameeyey nabadjelyada guud, oo uu ku jiro khasaaraha kaga yimid biyaha soo gelaya markabka qolalka ama dalool kale ee loo sameeyey tuurista badeecadaha oo loogu tala galay nabadjelyada, waxaa daboolayaa kharajka khasaaraha guud.
3. Dab ka kaca markabka dushiisa:- Khasaaraha gaaray markabka ama badeecadda ama labadaba, oo ka yimid biyaha ama waxyaabaha kale ee lagula dagaallamayo dabka ama khasaaraha ka dhasha markii la geynayo markabka dekeda ama la kala goynayo markab dab qabsaday waxaa laga bixinayaa kharashka khasaaraha guud; hase yeeshie ma jirto wax magdhaw ah laga bixinayo khasaaraha gaartay qeybaha markabka, badeecadaha aan la duubin, ama badeecadaha lagu duubay baakooyin, oo dhibaato uga timid dabka.
4. Qallinka qolofka markabka:- Khasaaraha ama dhaawac ku gaaray qallinka qolofka markabka ama wixii ka hara qalabka, makiinadaha ama alaabta kale oo markii hore dhaawac uga soo gaaray dhibaatooyinka badda lagana bixinayo kharashka khasaaraha guud.
5. Dejinta markabka oo iskood ah:- Haddii markabka ogaan lagu dejiyo badda hoosteeda ayadoo ay jireen duruufo in haddii tallaabadaas la qaadi lahayn uu markabku ku dhici lahaa dhulka ama dhagaxa badda, khasaaraha ama dhaawaca gaaray markabka

ama badeecadaha ama labadaba, oo ay sabab u ahayd dejin kas ah, waxaa laga bixinaya kharashka khasaaraha guud, hase yeeshi khasaaraha dib u sabbeynta markabka waxaa laga bixinaya kharashka khasaaraha guud. Dhammaan xaaladaha ku saabsan degitaanka markabka oo loogu tala galay badbaadada guud khasaaraha ama dhaawaca markabka iyo badeecadaha waxaa laga bixinaya kharashka khasaaraha guud.

6. Qaadashada qalabka gooshida: Khasaaraha ama dhaawaca ku dhaca markabka ama badeecadaha ama labadaba qaadista qalabka gooshida, lagama bixinayo haddii falka u dhacay inta uu markabka ku sabbeynayey; hase yeeshi, haddii falkaas la sameeynayey ayadoo ujeeddadu ay ahayd in markabka laga riixo dhulka ama la geeyo dhul sare ama ay dhacdo xaalad degdeg oo kale, waxaa kharashka laga bixinaya kharashka khasaaraha guud.

7. Khasaaraha ku dhaca makiinadaha iyo dhuumaha biyaha lagu kariyo: Haddii uu ka dhashay dadaalka sabeynta markab caariyey, dadaalkaasina loogu tala galay ilaalinta nabadgelyada guud, waxaa bixinta kharashka laga oggolaanaya kharashka khasaaraha guud, hase yeeshi kharashka khasaaraha guud lama ogolaanayo haddii markabku sabeynayey, dhibaatana uusan ku jirin oo daruuri ka dhigayey in makiinadaha la sameeyo ama la sameeyo talaabooyin la mid ah.

8. Fududeynta culeyska markab caariyey: Haddii markabku uu caariyey, badeecadaha, shidaalka markabka, alaabta keydsan ama waxyaabahas laga dejinayo, sidii loo fududeyn lahaa culeyska markabka taasoo ah fal ku saabsan khasaaraha guud, kharashyada fududeynta dib u raridda iyo khasaaraha ama dhaawaca kaga yimaada falkaas, waxaa laga bixinaya kharashka khasaaraha guud.

9. Keydka iyo Alaabta loo isticmaalay shidaal haddii qaaduhu keeni waayo ama uu ku gefo keenista shidaalka xagga tirada ama tayada, intii loogu tala galay safarka, alaabta markabka keydka ama badeecadaha loogu isticmaalay shidaalka oo ujeeddadu tahay ilaalinta nabadgelyada waqtiga khatarta loogu jiro, waxaa loo oggolaanaya inay ka mid tahay kharashka khasaaraha guud. Tirada shidaalka oo si kale loogu isticmaali lahaa oo lagu xisaabinayo dekeda bixitaanka ee markabka, taariikhda gooshida waxa laga bixinaya kharashka khasaaraha guud.

Qodobka 151aad: Khasaaraha guud – kharashyo kale

1. Dekedda magangelyada: Markii uu markabku soo galo dekeda magangelyada ama uu noqday dekeda marka ugu dambeysa laga soo baxay ama laga soo raray ayadoo ay sabab u ahayd shil, hurid ama duruufo kale oo lagama maarmaan u ahaa nabadgelyada guud ee safarka kharashka gellida iyo ka bixidda dekedaas waxaa loo aqoonsanaya khasaaraha guud. Haddii ku socodka markabka deked kale ama meel kaleba loogu baahdo hagaajin, kharashka ku saabsan socdaalkaas waxaa loogu aqoonsanaya khasaaraha guud, kharashka la xiriira shaqada markabka dushiisa ama dejinta iyo raridda shidaalka, keydka ama badeecadaha ee dekeda magangelyada, haddii loo baahdo nabadgelyada guud, waxaa loo aqoonsanaya khasaaraha guud.

2. Dhaafidda Safarka: Haddii markabka laga tago ama uusan ku socon safarkii asalka ahaa, kharajka keydka ee la galay ka dib ka tegidda markabka ama dhaafidda safarka waxaa loo aqoonsanaya khasaaraha guud. Hase yeeshi, haddii markabka laga tago ka hor dhamaadka dejinta badeecadaha, kharajka keydka waxaa loo aqoonsanaya khasaaraha guud ilaa iyo muddada la joojiyey dejinta.

3. Jiidista markabka iyo ka wareejinta si loo badbaadiyo badeecadaha: Haddii markabka oo ku jiro kharashka khasaaraha guud uu galo magangelyo si loogu hagaajiyo deked aan ahayn midda uu usocdo ayadoo hagaajintaas ay tahay mid aan suurto gal ahayn ama lagu sameyn karin dekedaas, taasoo ay keeneyso inuu markabku uusan qaadi karin

badeecadda oo dhan, wixii ka soo harajiidista markabka ama ka wareejinta geynta badeecadaha ilaa dekedda loo socday, wixii ku saabsan badeecadaha iyo markabka la jiiday, la wareejiyey ama geeyey, waxaa bixinaya dhinacyada ay saameyso arrintaas ayadoo loo kala raacayo kharashka aan caadiga ahayn oo la baajiyey.

4. Mushaharooyinka, xannaanada iyo kharashka kale ee lagu galay dekedda magangelyada: Mushaharooyinka iyo xannaanada Kabtanka, Saraakiisha iyo Shaqaalaha, loogu daray kharashyada shidaalka, keydka markabka iyo ajuurada dekedda oo laga bixiyey soo gelidda dekedda magangelyada oo loogu tala galay nabadgelyada safarka iyo kharashka ka dhasha dheeraanshaha lagama maarmaanka ee safarka, daruuftaas waxaa loo aqoonsanayaa kharashka khasaaraha guud; Hase yeeshi kharashka shidaalka iyo keydka la isticmaalay oo si toos ah u saameynayo hagaajinta looma aqoonsanayo khasaaraha guud. Kharajyadaas dheeraadka ah, waxaa ku jira kuwo lagama maarmaan ah ilaa taariikhda uu safarka markabka uu socday ama ay ahayd inuu socdo. Hase yeeshi haddii markabka laga tego ama safarka la dhaafo, kharajyadaas dheeraadka waa la oggolaanayaa ilaa taariikhda ka tegidda markabka, dhoofidda safarka dhamaadka dejinta badeecadaha hadba taariikhda ugu dambeysa.

5. Khasaaraha ku dhaca badeecadaha inta dejinta: khasaaraha ama lumidda badeecadaha, shidaalka ama keydka markabka oo ka yimaada hawlgalka, dejinta, keydinta, dib u raridda iyo jiidista waxaa laga bixinayaa kharashka khasaaraha guud marka keliya haddii kharajka tallaaboooyinkaas loo aqoonsado khasaaraha guud.

Qodobka 152aad: Ka jaridda kharashka hagaajinta

1. Fulinta dacwooyinka la xariira khasaaraha guud ee hagaajinta loogu ogol yahay khasaaraha ee loogu kala beddelayo alaabta cusub kan duugga ah. Nidaamka jarista khasaaraha guud kharajka hagaajinta waxaa lagu dabaqayaa nidaamka hoos ku qoran iyo Xeer-nidaamiyaha uu u soo saaro ujeeddooyinkaas Wasiirka Kalluumeyisiga iyo Gaadiidka Badda:-

b) Ka jarista waxaa lagu nidaaminayaa da'da markabka laga bilaabo taariikhda diiwangelinta koowaad ilaa taariikhda dhacdada ama shilka oo lagama maarmaan ka dhigeysa hagaajinta marka laga reebo ka jarista loo sameynayo alaabta iyo keydka markabka, oo ay ku jiraan alaabta kala saarista korontada, doonyaha nabadgelyada nafta, iyo doonyaha kale ee la xiriira markabka, qalabka geograafiyada, raadiyaha, raadista jihada, qalabka maqalka iyo kuwa la midka ah, makiinadaha iyo dhuumaha biyo karkarinta waxaa lagu nidaaminayaa da'da qeybta gaarka ah ama qalabka laga bedelay.

t) Waxba laga jari maayo cuntada markabka, keydka markabka iyo qalabka aan la isticmaalin.

j) Waxaa wax laga jarayaa kharashka alaabta cusub ama qalabka, ayadoo ay ku jiraan kharashka shaqada iyo rakibaadda hase yeeshi kuma jiraan kharashyada furfuridda.

x) Ujuurooyinka juudiga kharashyada iyo dhaqdhaqajinta markabka waxaa la ogolaanayaa ayagoo dhan waxbana laga jarin.

kh) Lama ogola sifeynta iyo rinjiyeynta hoosta markabka haddii aan la rinjiyeyn ilaa lix bilood laga bilaabo taariikhda shilka ama dhacdada keentay baahida hagaajinta.

2. Kala jarista oo lagu sheego qeybaha kharashka hagaajinta, waxaa lagu goynayaa sida hoos ku qoran ayadoo saldhig looga dhigayo da'da markabka:-

b) Da'da ilaa hal sano:- Lagama jari karo kharashka hagaajinta marka laga reebo saddex meelood hal meel kharashka hoolista, safeynta, rinjiyeynta ama daboolidda hoosta markabka.

t) Da'da hal ilaa saddex sano: Waxaa la jarayaa saddex meelood hal meel taasoo ah

kharashka hoolista, safeynota, rinjiyeynta hoosta markabka ayadoo la raacayo faqradda 1aad (kh) ee Qodobkan. Waxaa la jaraya saddex meelood hal meel kharashka hagaajinta ama ka beddelidda shiraaca, xarkaha iyo jiingadaha (oo aan ahayn fillooyinka iyo silsiladaha) qalabka daboolidda raashiinka iyo keydka iyo rinjiyeynta. Waxaa la goynayaa lix meelood hal meel kharashka hagaajinta qalabka alwaaxda ee qolalka hoose ee markabka (ay ku jiraan korka qolalka hoose) qoryaha, doonyaha, qalabka guriga, maacuunta, maryaha, alaabta birta iyo dhalada, fillooyinka, xarkaha kala duwan, qalabka juquraafiyadda, raadiyeyaasha, baadigoobka jihoooyinka, qalabka maqaalka iyo qalab la mid ah, fillooyinka silsiladaha dabka iyo isku xiridooda (oo aan ku jirin makiinadaha wareega ee korontada). Hagaajinta kale waxba looma jarayo. Jarista ku saabsan hagaajinta iyo bedelidda daboolida birta ee maraakiibta alwaaxda ama isku dhafka waxaa lagu xisaabinayaa ayadoo la ogollaaday kharashka oo dhan oo ku saabsan la mid ah culeyska jiingadaha birta oo la bedelay marka laga jaro lacagta laga helay birta duqowday. Kharashyada kale oo ka mid ah shaqada iyo alaabta kale sida masaabiirta iyo furaashyada waxaa la yareynayaa ayadoo laga jarayo saddex meelood hal meel.

j) Da'da saddex ilaa lix sano:- Jaristu waxay la mid noqoneysaa sida ku tilmaaman lambarka 2 (b) ee Qodobkan, marka laga reebo jarista saddex meelood hal meel kharashka hawsha alwaaxda iyo lix meelood hal meel kharashka hawsha birta ee shiraacyada daqallada, qalabka kale iyo makiinadaha.

x) Da'da lix ilaa toban sano: Jarista waxaa la sameynayaa sida ku qoran faqradda 2 (j) ee Qodobkan, marka laga reebo jarista saddex meelood hal meel kharashka hagaajinta ama ka bedelidda dhamaan xarkaha, jiingadaha, alaabta birta ee daqallada iyo dabbeelinta qalabka juqraafiyada, raadiyeyaasha, raadinta jihoooyinka, maqalka iyo kuwo la midka ah, alxanka makiinadaha xoojinta, wadidda, wiishashka iskuxirnaanshaha iyo dhammaan makiinadaha kale (oo ay ku jiraan dhuumaha biyo karkarinta iyo meelaha ay ku rakiban yihiin).

kh) Da'da tobani (10) ilaa tobani iyo shan (15) sano: Jaris ilaa saddex meelood hal meel kharashyada dhammaan cusbooneysiinta; marka laga reebo cusbooneysiinta baroosinada oo loo oggolaanayo dhammaan ayadoo aan waxba laga jareyn, jaristuna waxay noqoneysaa lix meelood hal meel kharashka cusbooneysiinta hawsha birta ee qolalka hoose, shimiiteynta iyo fillooyinka silsiladaha.

d) Da'da wixii ka badan tobani iyo shan sano (15) Jaristu waxay noqoneysaa saddex meelood hal meel kharashka dhammaan cusbooneysiinta, marka laga reebo fillooyinka silsiladaha oo laga jarayo lix meelood hal meel kharashka cusbooneysiinta. Waxba laga jarimaayo kharashka cusbooneysiinta baroosinada.

Qodobka 153aad: Kharashka khasaara ha guud-hagaajinta ku meel gaarka

1. Hagaajin ku-meelgaarka ee markabka lagu sameynayo dekedda rarrida ama dekedda magangelyada ee loogu tala galay nabadjelyada guud ama uu kaga yimid dhibaato kaga soo gaartay hurida ku saabsan khasaara ha guud, waxaa loo aqoon sanayaa kharajka khasaara ha guud. Hase yeeshi, hagaajinta kumeelgaarka ah oo kaga dhasha shilalka si loo dhameystiro safarka waxaa laga ogollaanayaa khasaara ha guud ayadoon la tixgelin keydka haddii uu jiro ama danaha kaleba.

2. Jarista bedellida cusub ilaa duugga lama sameynayo kharashka hagaajinta ku meel gaarka ah oo loo ogollaan karo khasaara ha guud.

Qodobka 154aad: Khasaara ha guud- waayidda kirada xamuulka

1. Waayidda kirada oo ka dhasha dhibaato ama lumid badeecadaha waxaa laga

bixinayaa khasaaraha guud, ha ka timaado falka khasaaraha guud ama laga magdhabayo khasaaraha ama lumidda badeecadaha.

2. Waxaa laga jaraya lacagta lumidda xamuulka, kharashka uu geli lahaa qofkii lahaa xamuulka, laakiinse uusan gelin ayadoo sabab u ahayd huridda.

Qodobka 155aad: Xamuul lumay ama ku khasaaroobay hurid

1. Magdhawga laga siinayo kharashka khasaaraha guud kuna saabsan khasaaraha ama lumidda badeecadaha la huray waxaa weeye khasaaraha uu galay qofka leh badeecadaha oo loogu xisaabinayo qiimaha dhabta ah ee suuqa, maalinta ugu dambeysa ka dejinta markabka ama dhamaadka dhacdada haddii ay ku dhamaato meel aan ahayn meeshii uu markabku asal ahaan u socday.

2. Badeecadaha dhibaatada kaga soo gaaraty haddii la iibyo ayadoo aan si kale lagu heshiinin magdhawga laga bixinayoo kharashka khasaaraha guud waxaa weeye farqiga ka dhexeyya lacagta iibka iyo qiimaha badeecadaha ee suuqa, maalinta ugu dambeysa ka dejinta markabka ama dhamaadka dhacdada haddii ay ku dhamaato meel aan ahayn meesha uu markabku asal ahaan u socday.

Qodobka 156aad: Dhibaatada gaartay markabka

1. Lacagata laga oggol yahay kharashka khasaaraha guud, dhibaatada ama khasaaraha gaartay markabka, makiinadaha ama qalabka marka la hagaajinayo ama la beddelayo waxaa weeye kharashka dhabta ah ee hagaajinta ama kabidda dhibaatadaas ama khasaarahaas ayadoo la tixgelinayo jarista lagu sheegay Qodobka 153aad ee Qaybtan. Haddii aan la sameynin hagaajinta, lacagta laga oggolaanayo kharashka khasaaraha guud waxay noqonaysaa, qiime dhaca macquulka ah laakiinse aan ka badnayn kharashka loogu tala galay hagaajinta.

2. Haddii uu ku dhaco khasaare guud oo dhab ah markabka kana yimaado fal ku saabsan khasaaraha guud lacagta loogu oggol yahay khasaaraha guud waxaa lagu xisaabinayaa qiimaha dhabta ah ee markabka marka laga jaro lacag la mid ah kharashka loogu tala galay kabidda khasaaraha oo aan looga oggolayn khasaaraha guud ayadoo lagu daray lacagta iibka haddii ay jirto.

Qodobka 157aad: Badeecadaha aan la caddeynin ama si khalad ah loo caddeeyey

1. Bedeecadaha la raray isagoo aannu ogeyn qaadaha ama wakiilkiisa ama la raray ayadoo uu diruhu ama wakiilkiisu si khalad ah u tilmaamay qiimo khalad ahna kaga sheegaya badeecadahaas looma aqoonsanayo kharashka khasaaraha guud, waana in loo magdhabaa, haddii la badbaadiyo.

2. Dhibaatada ama khasaaraha gaaray badeecadaha si khalad ah la caddeeyey ama la qiimeeyey markii la saaray markabka ayadoo qiimahooda loogu qadiray ka yar intii qiimahooda dhabta ahayd, waxaa loo aqoonsanayaa kharashka khasaaraha guud, qiimaha la caddeeyey, hase yeeshi, wuxuu ka bixinayaa kharashka qiimaha dhabta ah.

Qodobka 158aad: Khasaaraha guud - dhiibista lacagta

1. Kharashka caymiska lacagta loo horumariyey bixinta lacagta khsaaraa guud waxaa loo aqoonsanayaa inay ka mid tahay khasaaraha guud. Khidmad ka kooban 2% lacagta khasaaraha guud waxaa loogu aqoonsanayaa khasaaraha guud ayadoo aan khidmadas loo oggolaanayn lacagta mushaharooyinka iyo xannaanada Kabtanka, Saraakiisha iyo Shaqaalaha markabka, shidaalka iyo keydka aan la beddelin inta uu socdo safarku. Haddii aan la dhiibin lacagta, dhinacyada danta ka leh, kharashka loo baahdo wuxuu ka imaanayaa Sanduuqa ama si kaleba ama khasaaraha ay galaan dadka

leh badeecadaha la iibiyey si lacagta loogu biiriyo kharashka khasaaraaha guud, waxaa loogu tala galayaa khasaaraaha guud.

2. Khasaaraaha guud waxaa loo qaybinaya markabka tirada, xamuulka, lacagta qaadista rakaabka, badeecadaha iyo dhammaan hantida oo ay ku jirto tan si toos ah u gashay khatarta ka timid dhacdada guud waqtigii khasaaraaha guud.

3. Codsiga ku biirsta khasaaraaha guud lama oggolaanayo haddii dhibaato aysan saameynayn ka reebidda uu qoraal ahaan u soo gudbiyey Kabtanka ama lid ku ah isaga oo la keenay todoba (7) maalmood gudahood laga bilaabo gudbinta badeecadaha.

Qodobka 159aad: Khasaaraaha guud – dulsaarka la oggolyahay

Dulsaarka waxaa lagu oggolaanaya kharashyada huridda iyo gunnooyinka, waxaana lagu xisaabinaya 7% sanadkiiba ilaa taariikhda warbixinta khasaaraaha guud, hase yeeshi, gunnada la siiyo si ku meel gaar ah, waxaa laga siyyaa danaha ku biirashada ama Sanduuqa keydka ee khasaaraaha Guud.

Qodobka 160aad: Khasaaraaha guud – dhigaalada lacagta caddaanka

Haddii la uruursado lacag caddaan ah oo ku saabsan mas'uuliyadda badeecadaha guud, gurmadka ama ajuurooyin gaar ahaaneed, dhigaaladaas waxaa si deg deg ah lagu bixinaya magaca Wakiilka ee uu magacaabay qaaduhu iyo wakiilka ay magacaabeen laba qof oo ku dhigtay lacag dhigaal ah Banki ay wada oggolaadeen wakiiladooda. Lacagta la dhigay iyo dulsaar bislaaday haddii uu jiro, waxaa loo reebayaa dhinacyada oo la siinaya lacagta khasaaraaha guud oo xaq u leh, gurmadka ama ajuurooyinka gaarka ah ee badeecadaha. Bixinta lacagta ama soo celinta dhigaalada waxaa lagu sameynayaa khasaaraaha ayadoo qoraal uu ku soo xaqiijiyey qofka soo qiimeynaya khasaaraaha. Dhigaalada iyo bixinta lacagta ama soo celinta waxaa la sameynayaa ayadoo aan waxba loo yeelin mas'uuliyadda ugu dambeynta ah ee dhinacyada.

Qodobka 161aad: Warbixinta khasaaraaha guud

1. Warbixinta khasaaraaha guud waxaa loo diyaarinaya dulsaarka caddaan ahaan lagu bixinayo qiyaasta khasaarooyinka ee loogu oggolaado khasaaraaha guud iyo ku biirsta oo ku saleysan qiimeynata markii uu dhamaado safarku iyo haddii aan si kale loo sheegin, lagu saleeyo meeshii uu safarku ku dhamaanayo. Warbixinta khasaaraaha guud waxay dhaqan galaysaa laga bilaabo markii la gaaro meesha safarku ku dhammaanayo.

2. Warbixinta khasaaraaha guud waxaa diyaarinaya hal ama ka badan qadirayaasha khasaaraaha, siday ku heshiyeen dhinacyada danta ka leh. Haddii dhinacyadu ay heshiin waayaan dhinacyada hal ama ka badan waxay maxkamadda ugaga codsan karaan inay magacowdo qadiraha khasaaraaha guud ama ay meelmariso qofka ay ku soo taliyeen hal dhinac ama ka badanba.

3. Khasaaraaha loogu tala galo diyaarinta warbixinta khasaaraaha guud waxaa qaadaya kuwii markii hore ka qayb galay.

Qodobka 162aad: Khasaaraaha guud – xayiraada hantida

Hantida loogu baahdo ku biiridda khasaaraaha guud qaaduhu wuxuu ku xayiri karaa dekeda imaanshaha haddii aan qaadaha la siinin damaanad habboon oo ku filan, dabooleysana bixinta lacagta ee uu ku leeyahay.

Qodobka 163aad: Khasaaraaha guud – xadeynta falalka

1. Dacwooyinka ku biirsta khasaaraaha guud waxaa la mamnuucaya haddii aan la hor keenin maxkamad ka tirsan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya saddex (3) sano

gudaheeda laga bilaabo taariikhda uu soo galay markabka ama la rabay inuu soo galo dekdedda uu safarka ku dhammaanayo. Muddada xadeynta waa la laalayaa intii hal ama wixii ka badan qaderayaasha khasaaraha guud sida ku qoran Qodobka 161aad faqraddiisa 2aad. Haddii qadirayuhu soo caddeeyo inuusan fulin Karin waajibaadkiisa, Maxkamaddu waxay ku kordhin kartaa laba sano muddada xadeynta laga bilaabo taariikhda caddeynta qadirayaha khasaaraha.

QAYBTA V - SHILALKA BADDA

Qodobka 164aad: Caddeynta iyo awooddha

1. Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda, wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer-nidaamiye ku saabsan kala saaridda dariiqyada maraakiibta iyo barnaamijyada kale ee yareynta ama ka hortagidda shilalka badda.
2. Haddii shil ka dhaco soohdinta badda ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya kana dhex dhaca laba ama ka badan maraakiibta maraya badda ama biyaha gudaha ama xeebaha, ayadoo aan la fiirinayn jinsiyadda markabka, mas'uuliyadda iyo magdhawga khasaaraha loo geystay maraakiibta, badeecadaha ama alaabta kale iyo dhaawac ama geeri ku timaada dadka saaran markabka waxaa lagu dhameynaya sida waafaqsan Qaybtan iyo Xeer-nidaamiyaha khuseysa.

Qodobka 165aad: Awooddha maxkamadeed

1. Dacwad ku saabsan shil markab waxaa la hor keeni kara Maxkamadaha Jamhuuriyadda haddii ay jiraan marxaladaha soo socda:-
 - b) Haddii dacweysanaha uu caadi ahaan deggan yahay ama uu ganaci ku leeyahay Jamhuuriyadda.
 - t) Haddii markabka la soo dacweeyey uu wakiil rasmi ah ku leeyahay Jamhuuriyadda, waxaa dacwadda lid ku ah markabka la furi karaa ayadoo ogeysiis la siinayo wakiilka rasmiga ah.
 - j) Haddii markabka la soo dacweeyey ama markab kale ee uu leeyahay isla markableyga leh markabka la soo dacweeyey si sharci ah loo xiro Jamhuuriyadda dhexdeeda ama la xiri karay markabka laakiin lagu sii-daayey xuriyad ku meel gaar ah ayadoo la dhibay dammaanad.
 - x) Shilka ka dhacay soohdinta deked Soomaaliyeed ama badda dalka ama Qaybta Xigta ee Jamhuuriyadda.
2. Haddii dacwad la soo oogay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya gudaheeda, dacwooduhu ma keensan karo dacwad kale lid ku ah isla dacweysanayaasha oo ku saleysan isla shilkii ka dhacay soohdinta kale ayadoo aan marka hore la joojin ama la dhammeynin dacwad kaga furan Maxkamadda Soomaaliyeed.
3. Haddii ay jiraan dacwoodeyaal badan oo dacwooyin ku leh isla dacweysanayaasha, kana dhasha isla shilkii ama dhacdadii isku xirta dacwoodayaasha waxaa la oggolaan karaa markii la hor keeno arji Maxkamadda, ama Maxkamad Soomaaliyeed ee awood u leh dacwaddaas lid ku ah dacweysanaha ama dacweysanayaasha.

Qodobka 166aad: Xadeynta dacwad-oogidda

1. Dacwad ka dhalata shil ka dhacay badda waa in lagu soo oogaa laba (2) sano gudaheed laga bilaabo taariikhda shilka haddii kale waa laga mamnuucayaa dacwaddaas, Maxkamadda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya; hase yeeshii muddada xadeynta waa la dheereynaya ilaa shan (5) sano haddii xiridda markabka la dacweynayo noqoto lagama maarmaan ayna suurta geli weyday.

2. Haddii dacweysanaha uu siiyey magdhawga dacwoodaha dacwad dambe ee ku saabsan isla shilkii ama dhacdadii lidna ku ah isla dacweysanaha, waa laga mamnuucayaa dacwaddaas Maxkamadda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya muddo hal sano ah laga bilaabo taariikhda magdhawgaas.

Qodobka 167aad: Mas'uuliyadda shilka oo ku saleysan gef

Maxkamad ku taalo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaliya oo la hor keenay dacwad ku saabsan shilka badda, waxay go'aan ka gaareysaa sababta shilkaas iyo gefka maraakiibta gashay shilkaas ayadoo ku dabaqeysa sharcigan, xeer-nidaamiyaha quseeya iyo heshiisyada caalamiga ama ku dhaqanka caadooyinka badda. Mas'uuliyadda bixinta waxay ku saleysan tahay gefka markab kasta ee uu ku geystay shilka sida ku xusan halkan:

b) Haddii hal markab lagu helo gef, kuwa kalena lagu waayo, markabka gefay wuxuu mas'uul ka noqonayaa dhammaan bixinta lacagta dacwooyinka oo dhan ee la soo caddeeyey.

t) Haddii maraakiibta ku saabsan shilka ay dhamaantood mas'uul ka ahaayeen isku si gefka keenay shilka, midna mas'uul uma noqonayo midka kale.

j) Haddii maraakiibta isku dhacday ay wada lahaayeen gefka, markabka lagu helo gefka intiisa badan, wuxuu mas'uul ka noqonayaa bixinta lacagta dacwooyinka la soo caddeeyey ee markabka kale, intii la xiriirta gefka uu galay markab kasta.

x) Haddii ay dhacdo geeri ama dhaawac shakhsiyeed ayadoo aan la caddeyn karin gefka markabka ama mas'uuliyadda markab kasta dhammaan maraakiibta khuseeyey shilka aaya la wada saarayaa wadajir ahaan iyo qeyb ahaan mas'uuliyadda geerida ama dhaawaca shakhsiyeed.

QAYBTA VI - KAALMADA IYO SAMATABIXINTA

Qodobka 168aad: Waajibaadka kaalmeynta iyo samata-bixinta

1. Kabtanka markab kasta, maraya badda ama u diyaar garoobaya gooshidda, waxaa sharchiyan waajib uga saaran yahay inuu kaalmeeyo markab kasta oo uu ku ogaado inuu ku jiro dhibaato ama khatar, intii awoodiisa asagoo aan dhibaato ama khatar gelineyn markabkiisa, shaqaalaha iyo rakaabka fuushan haddii uusan ogaanin in kaalmada lagama maarmaanka ah ee uu u baahday markabku laga siinayo markab kale ee habboon.

2. Haddii markabka dhibaateysan uusan Lahayn awood dhaqdhaqaaq, kabtanka markabka kaalmeynaya isagoo aan dhibaato ama khatar u geysaneyn markabkiisa, shaqaalaha ama rakaabka fuushan, waa inuu isku dayaa inuu samatabixiyo markabka dhibaateysan isagoo badbaadinaya dadka saaran markabkaas.

3. Kabtanka markab kasta waxaa sharchiyan waajib uga saaran yahay inuu u fidiyo kaalmo isagoo badbaadinaya dadka saaran markabka ama ku dhax daadsan badda halisna u ah dhaawac ama geeri.

4. Kabtanka markab kasta oo u fidin waayey kaalmo maraakiibta ama dad ay haysato dhibaato ama ku jira khatar, ama uu isku dayi waayo samata bixinta ama badbaadinta, waxaa laga qaadayaa darajadiisa baddeed iyo buugga gooshidda, isagoo lagu ciqaabayo xarig aan ka badneyn lix (6) sano.

Qodobka 169aad: Magdhaw iyo abaal-marin

1. Kaalmada loo fidiyey iyo samata bixinta markab dhibaateysan oo uu Kabtanku markabka dhibaateysan uusan waxba ka qabin ama si toos ah u diidin, waxay xaq u

siinaysa markabka fidiyey kaalmada ayadoo la tixgelinayo xadka qiimaha hantida la kaalmeeyey ama la badbaadiyey, inuu helo magdhaw khasaaraha ama dhibaatada gaartay markabka fidiyey kaalmada, si loogu celiyo kharashka uu galay iyo in la siiyo abaalmarin. Xuquuqdan waa in la fuliyaa xataa haddii isku dayga kaalmeynta ama samatabixinta lagu guuleystay qayb ahaan keliya.

2. Maraakiibta jiidista ee heshiis lala galay, xaq uma laha magdhabidda hawlaha kaalmada iyo samatabixinta haddii aysan u geysan adeegyo aan caadi ahayn oo ka badan intii ku xusan shuruudaha heshiiska.
3. Lacagta adeegga samatabixinta ay fidiyeen ama loo fidiyey maraakiibta xataa haddii uu leeyahay isla qofkii, xaq baa lagu leeyahay.

Qodobka 170aad: Saldhigga goynta lacagta

1. Ayadoo la raacayo wixii lagu beddelo amar Maxkamadeed sida uu dhigayo Qodobkan, dhinacyada ay saameyso dacwadda ku saabsan kaalmeynta iyo samatabixinta waxay ku heshiin karaan goynta saldhigga iyo qaddarka lacagta ee la siinayo.
2. Dhinaca codsanaya lacagta ku saabsan kaalmada ama samatabixinta sida waafaqsan Qaybtan ama codsanaya waxka beddelidda heshiiska lacagta ku saabsan kaalmeynta ama samatabixinta wuxuu dacwad ka furan karaa Maxkamad ku taal Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya. Dacwooyinkaas waa in la soo oogaa laba (2) sano gudaheed laga bilaabo taariikhda hawlaha ay dhamaadeen ama la dhaafay haddii kale dacwadda waa ka dhacaysa.
3. Lacagta xaqa loo leeyahay waxaa goynaysa Maxkammadda ayadoo eegaysa dulucda dacwad kasta, tixgelineysana waxyaabaha soo socda:-
 - b) Marka ugu horreysa, guusha la gaaray, dadaalka iyo faa'idada markabka samatabixiyey ama kaalmeeyey khatarta uu ku jiray markabka la samatabixiyey ama la kaalmeeyay, shaqaalaha, rakaabka iyo badeecadaha, khatarta uu galay markabka la samatabixiyey ama la kaalmeeyey iyo shaqaalahiisa, muddada iyo dadaalka la galay, kharashka iyo khasaaraha la galay iyo qiimaha hantida la badbaadiyey.
 - t) Tan labaad, qiimaha hantida la badbaadiyey.
 - j) Maxkammadda way diidi kartaa lacagta ama way yareyn karta lacagata lagu soo dacwooday haddii la soo caddeeyey in Markabka samatabixiyey ama kaalmeeyey uu si khalad ah u kaalmeeyey ama samatabixiyey ama loogu helay dembi ku saabsan tuugo, khiyaamo, qarsasho khiyaamo ama falal kale oo sharci darra ah.
4. Wax lacag ah loo siin maayo badbaadinta qof naftiisa, hase yeeshi haddii la badbaadiyey dadka naftooda ayadoo lagu jiray kaalmeynta ama samatabixin markab, badeeco, ama qalab waa la oggolaanayaa lacagta ku saabsan markabka, badeecadaha, qalabka la badbaadiyey hase yeeshi lacag lagu siin maayo badbaadinta nafta baniaadamka.

Qodobka 171aad: Heshiiska kaalmeynta ama samatabixinta

1. Heshiis ku saabsan kaalmada iyo samatabixnta oo la galay markii lagu jiray dhibaatada ama khatarta, ayadoo ay xaaladdu ahayd mid deg-deg ah, heshiiskaas waa la burin karaa ama la beddeli karaa ayadoo arji loo qorayo Maxkamadda.
2. Maxkammaddu waxay amraysaa burinta ama beddelidda haddii ay la noqoto in lacagta ama abaalmarinta lagu heshiiyey ay aad u badan tahay ama ay aad u yar tahay marka la firiiyo khatarta la galay iyo adeegga la fidiyey.

Qodobka 172aad: Qaybsashada lacagta, abaalmarinta ama waajibaadka

1. Abaalmarinta kaalmeynta ama samatabixinta waxaa qaybsanayaa qofka leh markabka kaalmeeeyey ama samatabixiyaha iyo shaqaalaha ayadoo saddex (3) meelood hal meel la siinayo markableyga, saddex meelood laba meelna la siinayo shaqaalaha haddii markabka aysan ku rakibnayn qalabka jiidista ama uusan caadi ahaan ku shaqa lahayn samatabixinta; hase yeeshiee saddex meelood laba meel oo la siin lahaa shaqaalaha waxaa loo qaybsanayaa, ayadoo la tixgelinayo mushaarka uu qaato shaqaalo kasta iyo dadaalka uu galay.

2. Abaalmarinta lagu siinayo kaalmeynta ama samatabixinta markabka kaalmeeeyey, waxaa qaybsanayaa dhammaan dhinacyada ay khuseyso oo ku shaqada leh markabka kaalmeeeyey, qalabkiisa iyo badeecadaha sida waafaqsan nidaamka ku biirista khasaarha guud oo lagu sheegay sharcigan iyo xeer-nidaamiyaha khuseya. Qaybsashada waajibaadka waxaa lagu dabaqayaa xitaa haddii kaptanka markabka uusan codsan kaalmada ama samatabixinta.

qodobka 173aad: Ku dabbaqida nidaamka maraakiibta dawladda
Nidaamka lagu xusay qaybtan waxaa lagu dabbaqayaa xataa maraakiibta dawladda ha ahaadeen kuwo bixinaya ama la siinayo kaalmada ama kuwo samatabixinaya ama la samatabixinayo.

QAYBTA VII - RAADINTA IYO SAMATABIXINTA MARAAKIIIBTA CAARIYEV

Qodobka 174 aad: Nidaamka iyo xeer-nidaamiyaha

1. Qaybtan waxaa lagu dabbaqayaa raadinta iyo samatabixinta maraakiibta caariyey iyo hanti kale ee ku daadatay ama loogaga tegay dhulka xeebaha ah ee dhinacyada kala duwan oo ay Jamhuuiyadda Dimuqraadiga Soomaaliya awood badeed ku leedahay. Qaybtan ma saameynayso kaalmada ama samatabixinta maraakiibta ama dadka dhibaateysan ama ku jira khatar ee lagu xusay meelaha kale ee sharcigan.

2. Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda, wuxuu leeyahay awood uu ku soo saaro xeer-nidaamiye haddii loo baahdo oo lagu ilaalinayo danta Jamhuuriyadda ayadoo la tixgelinayo daruuf gaar ahaaneed, oo ay ku jiraan aanse ku koobneyn samatabixinta iyo lahaanshaha waxyabaaha qiimo taariikheed u leh hidaha, qaranka, hanti qaali ah oo luntay ama hanti markii hore ay lahayd dawladdu.

Qodobka 175aad: Samatabixinta iyo waajibaadka samatabixiyaha

1. Ayadoo ay jiraan xuquuqda qofka iska leh hantida oo ku saabsan samatabixinteeda, haddii dad badan ay ku tala jiraan samatabixinta ama ku dacwoodida xaqooda ku saabsan samatabixinta hantidaas, waxaa mudnaanta koowaad la siinayaad dadka marka ugu horreysa siiyey ogeysiiska ujeeddada samatabixinta Waaxda Badda. Hase yeeshiee dadkaas waa inay bilaabaan hawshooda samatabixinta hal sano gudaheeda laga bilaabo maalinta la bixiyey ogeysiiska waxayna howshooda wadanayaan ayadoo aan la joojin haddii la sii wadayo hal sano ka badan, markaasoo kale samatabixiyaha waxaa ka lumeysa mudnaantiisa, ayadoo dadka kale ee ku jira tartanka samatabixinta hantidaas loo oggolaanayo inay keenaan ogeysiiska samatabixinta ayagoo markaas la siinayo mudnaanta.

2. Mar haddii la bilaabay hawsha samatabixinta ayadoo la ogyahay dadka leh hantidaas, galeyna dhibaato, hawsha samatabixinta lama joojinayo ayadoo aysan jirin sabab macquul ah.

3. Markii ay dhamaadaan hawlaho samatabixinta, samatabixiyaha wuxuu tobani (10) maalmood gudahooda laga billaabo imaanshaha dekeda ee markabka

samatabixinta ama toban (10) maalmood gudahooda laga bilaabo dhamaadka hawsha haddii uusan ku saabsanayn isticmaalka markabka, samatabixiyuhu wuxuu ogeysiinaya qofka leh hantida haddii la yaqaan ama Waaxda Badda isagoo diyaarinaya hantida la samatabixiyay sidii loogu gudbin lahaa mulkileyda ama Waaxda Badda.

Qodobka 176aad: Magdhawga iyo abaalmarinta iyo xadka

1. Haddii la fuliyo waajibaadka samatabixiyaha ayadoo la dhameeyay gudbinta hantida, samatabixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay magdhawga khasaaraha uu galay isagoo loo soo celinayo kharashka la galay oo loogu darayo abaalmarin la goynayo ayadoo la tixgelinayo qiimaha hantida la samatabixiyey, dadaalka iyo khatarta loogu galay samatabixinta. Haddii markabka samatabixinta uu saaran yahay qalabka samata bixinta, markabka wuxuu xaq u leeyahay xitaa kharashka guud ee uu galay.
2. Abaalmarinta waxaa loo qaybsanayaa sida ku xusan Qodobka 172aad ee sharcigan.
3. Dacwooyinka magdhawga, soo celinta kharashka iyo abaalmarinta waxaa la oogayaa ayadoo ay ku heshiyeen dhinacyadu ama sida waafaqsan habka dacwadaha ee ku xusan Qodobka 170aad iyo 171aad ee sharcigan.
4. Dacwooyinka magdhawga, soo celinta kharashka iyo abaalmarinta waxaa la hor keenayaa maxkamadda ku shaqada leh ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaliya, laba (2) sano gudaheed laga bilaabo taariikhda dhamaadka hawsha samatabixinta haddii kale dacwadahaas lama furi karo.

Qodobka 177aad: Samatabixinta uu sameeyay kaptanka markabka

1. Ayadoo ay jiraan qodobada qaybtan, waxaa mudnaanta la siinayaan xaq samatabixinta ee kaptanka markabka oo markii uu dhaco shilka, caddeynayaa inuu doonayo inuu noqdo samatabixiyaha koowaad, u sheegayana Waaxda Badda ee ugu dhow.
2. Haddii uusan jirin heshiis ka dhexeeya kaptanka iyo markableyga, xisaabta abaalmarinta ay leeyihiin kaptanka iyo shaqaalah oo gacan ka geystay hawsha samatabixinta, waxaa sameynaya Waaxda Badda ama hay'adda qunsuliyadda ayadoo la tixgelinayo qiimaha hantida la samatabixiyey, dadaalka iyo khatarta ay galeen samatabixiyeyaasha.

Qodobka 178aad: Helidda qolofka markabka iyo ogeysiiska loo baahan yahay Qof kasta oo ka hela qolofka markabka oo qiimahiisu ka badan yahay Shs.So.5,000/=, soohdinta dhulka xeebaha ama qaybaha kale ee badda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waa inuu ogeysiyyaa xafiiska ugu dhow ee ku saabsan arrimaha badda oo ay leedahay Jamhuuriyadda, qofka helay qolofka ama hay'adda badda waxay isku dayeysaa inay ogeysiiso mulkileyda qolofka, ayadoo ku dadaaleysa aqoonsiga mulkileyda haddii aan la aqoonin markii la helay qolofka markabka.

Qodobka 179aad: Haysashada iyo lahaanshaha hantida samatabixinta, hantida laga tegay, *dacwooyinka dowladda*

1. Markii la helo ogeysiiska helidda qolofka markabka ama loo gudbiyey hantida la samatabixiyey, hay'adda badda ee qaabilsan, haddii aan la aqoon mulkileyda hantida, waxay soo faafineysa ogeysiis inuu qofka danta ka leh hantida uu muddo lix (6) bilood gudahood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska ku soo oogo dacwadda. Haddii aan dhinacna soo oegin dacwadda lahaanshaha, lix (6) bilood gudahood, laga bilaabo taariikhda marka ugu horeysa la soo faafiyey ogeysiiska, hantida waxaa la caddeynayaa inay tahay mid laga tegay, lahaann shaheedana waxaa lagu wareejinaya qofka helay

ama samatabixiyey.

2. Alaab kasta oo ku saabsan fanka, taariikhda, arkiolojiyada ama itnograafiyada, ahmiyadna u leh Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya laga helay ama lagu samatabixiyey dhulka xeebaha ama qaybaha kale oo ay leedahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxaa laga reebay faqradda laad ee Qodobkan. Kaddib markii loo oggolaado qofka helay ama samatabixinta fursadda ogeysiiska iyo dhegeysi sidii loo goyn lahaa xuquuqda hantida ama dacwadda magdhawga, soo celinta kharshka iyo abaalmarinta, haddii dacwadda ay Jamhuuriyaddu ku gar hesho waxaa lagu dhawaqaayaa inay ka mid tahay hantidaas khasnadda qaranka ee Jamhuuriyadda ama arrimaha taariikheed iyo magaca Jamhuuriyadda. Xaaladdaas oo kale Jamhuuriyadda waxaa waajib ku saaran tahay inay siiso qofka helay ama samatabixiyey dhammaan dacwooyinka magdhawga, soo celinta kharashka ama abaalmarinta.

3. Hantida laga tegay oo laga helo dhulka xeebaha, dekedaha, biyaha gudaha ama biyaha gooshida ee Jamhuuriyadda, kadib markii laga bixiyo ogeysiis hal bil oo ku saabsan ujeedadaas, waxaa la wareegeysa Jamhuuriyadda ayadoo lagu xaraashayo meel fagaara ah, hase yeeshee, hay'adda dawladeed oo ku shaqada leh waa inay qaadaa tallaabooyin haboon si loo aqoonsado mulkileyda hantidaas ayadoo bixineysa ogeysiis ay ku sheegeysa meesha, tilmaanta iyo xaaladda hantida laga tegay. Hal bil kadib taariikhda faafinta ogeysiiska, hantida waxaa loo qaadanayaan in looga tagey ayadoo laga bixinayo ogeysiinta iibka. Haddii, kadib markii lagu gado naado fagaaro ah, hantida lagu dacwooday lana keeno caddeymo ku saabsan lahaanshaha, hantileyda waxay xaq u yeelanayaan inay helaan inta ka soo hartay haddii ay jirto, lacagta iibka, lacag u dhiganta qiimaha hantida ku sugaran xaaladii looga tagey marka laga jaro lacag u dhiganta dhammaan kharashka ay dawladdu ku bixisay soo saarista, ogeysiinta iyo iibka.

QAYBTA VIII - RAHANKA BADDA IYO BURSIINOYINKA⁷

Qodobka 180aad: Nidaam guud

1. Qodobada Qaybtan waxay dhigayaan nidaamka bursiinooyinka ku saleysan rahanada badda ee lid ku ah maraakiibta. Dhismaha rahan badeed waxaa la siinayaan mudnaanta kaga sarreysa rahanada kale ama bursiinada guud ama gaar ahaaneed.
2. Haddii hanti ku lug leh rahan badeed ay halowdo ama ay yaraato, bursiinadu way jiraysa laakiinse waxaa lagu dabbaqayaa ilaa xadka qiimaha inta hartay oo keliya.

Qodobka 181aad: Dacwooyinka bursiinooyinka

Waxyaabaha hoos ku qoran waxay dhalinayaan rahannada badda ee maraakiibta iyo badeecadaha kor saaran intii loogu jiro safarka oo ay billaabatay dacwadda dhalisay rahanka ku saabsan qalabkaiyo alaabta ee ku rakiban ama la socda markabka:-

b) Kharashka Garsoorka ama ajuurooyinka iyo canshurta uu ku leeyahay maamulka oo ka dhasha danta guud ee deynbixiyeyaasha si loo badbaadiyo markabka; kharashka qabanqaabada iibka markabka iyo qaybinta lacagta iibka; ajuurada miisaanka, nalka iyo dekdedda iyo canshurta kale ee dawladda oo la midka ah, ajuurada wadidda, kharashka ilaalinta iyo badbaadinta laga bilaabo waqtiga soo gelida markabka dekdedda Soomaaliyeed.

⁷ Eraygan 'Bursiinooyinka' oo Af Ingiisiga ah 'Privileges' waxa loo tarjumay Xeerka Madaniga 1973 (Qodobada 918 ilaa 937) 'horumarin' or 'xuquudda horumarinta' (privileged rights). Labadaba erayba waxay uun sheegayaan mudnaan ah ka horreyn.

- t) Dacwooyinka ka dhasha shaqa qorista Kaptanka ama dadka kale ee loo qaataay shaqada markabka iyo dacwooyinka ka dhasha heshiiska shaqada badda.
- j) Lacagta loo bixiyey kaalmada, samatabixinta iyo ku biirista khasaaraha guud ee markabka.
- x) Magdhawga iyo khasaarooyinka kale ee laga rabo inuu bixiyo markabku kuna saabsan shilka markabka, khasaaraha la gaarsiiyey dekedaha, meelaha lagu xiro markabka iyo qalabka badmaridda, dacwooyinka ku saabsan dhaawac shakhsiyeed ee la gaarsiiyey rakaabka ama shaqaalaha, magdhawga lumidda ama khasaaraha gaaray badeecooinka ama xafiiska.
- Kh) Dacwooyinka ka dhasha heshiisyada, adeegyada la qabtay ama falalka uu geystey Kaptanka markabka, marka uu ka maqan yahay dekeda Dalka Hooyo iyo haddii heshiisyadaas, adeegyadaas ama falka ay ahaayeen kuwo lagamamaarmaan u ah badbaadada markabka ama socodsinta safarka. Faqraddan waa in lagu dabbqaa xattaa haddii Kaptanka uu yahay mulkileyda ama uu ku leeyahay qayb markabka iyo haddii dacwada uu isagu leeyahay ama ay leeyihiin deyn bixiyeyaasha kale.
- d) Rahannada Badda oo ku saabsan markabka waa waajibaad ku xiran markabka oo la xiriira xattaa dhinacyo saddexaad oo iibsanaya markabka oo mas'uul ka noqonaya rahanka markabka haddii ay iibsadaan markabka.
- r) Bursiinada waxay ku xiran tahay waxaana lagu fulin karaa xamuulka haddii laga rabo ama lacagta ay ku jirto gacanta Kaptanka ama wakiilka markableyga.
- s) Bursiinada waxaa kaloo lagu fulin karaa markab uu maamulayo hawlgeleyaha oo aan ahayn mulkiilaha, ayadoo aan rahanka lagu xiri karin xaaladahaas haddii hawlgeleyaha uu si aan habboonayn ama si sharci darra ah u gutay hawshiisa taasoo dhalisay waajibaadka iyo falalkaas uu ogaa deyn bixiyaha markii uu waajibaadku dhacay kaasoo dhalijey rahanka lagu dacweeynayo.

Qodobka 182aad: Dhammeystirka iyo mudnaanshaha dacwooyinka

1. Dacwooyinka waxay ku dhameystirmayaan ayadoo la fuliyey rahanka badda kadib markii ogeysiis la siiyey Waaxda Badda. Dacwooyinka aan la dhameystirin hal (1) sano gudaheed laga bilaabo taariikhda falka ama dhacdada dhalisay dacwadda waa dhacayaan.
2. Dacwooyinka waxaa la siinaya kala mudnaanta, guud ahaan ayadoo tixgelin la siinayo waqtiga iyo taariikhda la dhameystiray ayadoo la siinayo mundaanta kowaad tan ugu horeysay; hase yeesh, dacwooyinka ku saabsan rahanka badda oo la dhameystiray kuna xiran safarka ugu danbeeyey waxay mudnaanta kaga leeyihiin kuwa ku xiran safarka ka horeeyey ayadoo deynbixiyaha dambe uusan waxba ka ogeyn ama aysan jirin wax sabab ah oo khasab ka dhigeysay inuu ogaado rahaanada hore.
3. Rahanada badda ee la dhameystiray waxay ka hooseeyaan dacwooyinka deynbixiyeyaasha leh damaanad.
4. Ka sokow qodobada sharcigan, sharciga madaniga iyo xeerka habka madaniga, maxkamadaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay ku dabaqaysaa fasiraadda garsoorka.

Qodobka 183aad: Lacagta lagu dacwoonayo

Haddii la iibiyo hanti ku lug leh rahanka badda, deyn bixiyeyaasha hashta rahan la dhameystiray, waxay xaq u leeyihiin iney soo bandhigaan dacwooyinkooda oo dhan iyadoon la tixgelin nidaamka uu dhigayo sharcigan oo ku saabsan xadeynta mas'uuliyadda ama dhimista ku biirista lacagta khasaaraha guud, qeybinta lacagta waxaa lagu dabbaqayaa mudnaanta deynbixiyeyaasha ayadoo la raacayo taariikhda

dhameystirka rahan baddeedka.

Qodobka 184aad: Bursiinooyinka hantida la raray

1. Rahannada badda oo dhalinaya bursiinooyinka ku lug leh hantida lagu raray markabka, waxaa loo ogolaanayaar darajooyinka soo socda:-

b) Kharashka sharchiyeed ee uu leeyahay maamulka ama lagu galay danta deyn biixiyeyaasha oo ku lug leh xayiraada ama talaabooyinka fulinta ee lagu qaadayo hantida.

t) Canshuurta furdada ee lagu leeyahay hantida meesha lagu dejijo.

j) Magdhawga iyo abaalmarinta kaalmada iyo samata bixinta iyo lacagta lagu leeyahay badeecadaha kuna saabsan ku biirista kharajka khasaaraha guud.

x) Deymaha ka dhalanya heshiisyada xamuulka oo ay ku jiraan kharashyada iyo keydinta ee hantida saaran markabka.

Kh) Lacagta raasamaalka iyo dulsaarka ku saabsan waajibaadka uu gelay kabitanka sidii uu u fulin lahaa kharajyada macquulka ah oo lagu ilaalinayo badeecadaha iyo danta dirayaasha.

2. Haddii hantida la raray ay lunto ama khasaarowdo, lacagta magdhowga ee lumista ama khasaaraha, oo ay ku jirto tan ceymiska waa in la siiyaa deynbixiyeyaasha lagu tilmaamay Qodobkan haddii aan lacagahaas la helay si degdeg ah loo isticmaalin si toos ah hagaajinta ama bixinta khasaaraha soo gaaray.

QAYBTA IX - RAHANNAD

Qodobka 185aad: Mudnaanta rahannada maraakiibta – habka iyo faafinta

1. Curaar loo dhiibay si loo magangeliyo waajibaad dhaqaale si toos ah ku xiran markabka waxaa loo qaadanayaan dan magangashan, mar haddii la dhameystirayna waxay mudnaan kaga leedahay dhammaan rahanada kale ee markabka oo lagu tilmaamay sharcigan, marka laga reebo rahannada ka dhashay mushaharooyinka shaqalahaa oo aan la bixin oo leh mudnaanta ugu sarreysa. Rahanaka markabka oo la dhammeystiray waxaa weeye caddeynya xuquuqda qofka loogu dhiibay rahanka, inuu ka bixiyo lacagta harsan ee amaaahda ee uu dammaanad qaaday rahanku.

2. Rahannada maraakiibta waxay abuurayaan lahaansho markab waana inay ahaadaan qoraal si loo dhaqan geliyo loona faafiyoo si looga dhigo rahan dhameystiran, sida waafaqsan Qodobada 72, 73iyo 74aad ee sharcigan. Nuqul tasdiiqan oo ku saabsan mudnaan rahan markab oo dhameystiran waxaa lagu haynayaaa warqadaha rasmiga markabka dushiisa waxaana lagu dhigayaa diiwaanka ku shaqada leh ee markabka. Kalamudnaanta rahannada waxaa lagu caddeynayaa taariikhda ku qorista diiwaanka markabka ayadoo uu leeyahay xaqa ugu horreya qofka ugu horreya ee ka mid ah rahannada fuliyey shuruudaha iyo qoraalada faafinta. Ku qorista diiwaanka markabka waxay xaqiijinaysaa rahanka muddo saddex (3) sano, waana in la cusbooneysiyyaa, haddii kale wuxuu ku dhammaanayaan dhammaadka muddadaas.

3. Rahanka markabka waxaa loogu bixin karaa dhismaha markabka taasoo khasab ku ah in lagu qoro diiwaanka maraakiibta, doonyaha ama maraakiibta yaryarka sidii hadba haboon, waxaana lagu qorayaa caddeyn ku saabsan ballarka markabka iyo qiyaasta miisaanka iyo meesha lagu dhisayo markabka.

4. Qofka loo dhiibay rahanka wuu gedi karaa ama ku wareejin karaa dhinaca saddexaad.

Qodobka 186aad: Awood rahan markab

1. Rahan markab waxaa sameynkara markableyga ama wakiilkiisa oo ka haysta wakaalad buuxda oo qoraal ah.
2. Haddii ay jiraan laba ama ka badan mulkiley oo leh isla markabkii, rahanka waxaa lagu dhiibi karaa ayadoo ay codka oggolaanshaha dhiibeen lahaanshaha saddex meelood laba meel ama haddii ay jiraan duruufo degdeg ah, ayadoo la raacayo amarka Maxkamadda oo uu soo codsaday mulkileyga.Qofka qeyb ku leh markabka wuxuu rahmi karaa saamigiisa keliya markii ay ogollaadaan wada lahanshaha markabka intooda badan.
3. Rahan markab wuxuu xayiraya markabka; marka laga reebo damaanado shakhsiyeed oo qoraal ah ee mulkileyda oo gooni ka ah rahanka markabka, waajibaadka la xiriira rahanka waxay u gudbayaan iibsadaha dambe ee markabka, ha ahaado iibsade dhinac saddexaad ah ama mulkileyda mid ka mid ah.

Qodobka 187aad: Waajibaadka qofka rahanka dhigaya

1. Ka hor intaan la dhiibin rahanka markabka, qofka rahanka dhiibaya waa inuu qoraal ugu caddeeyaa qofka loo dhiibayo rahanka, haddii ay jiraan rahanno badeed, rahan hore ama waajibaad ama mas'uuliyad kale oo saaran markabka ee uu ogyahay qofka dhiibaya rahanka ama la rabay inuu ogaado.
2. Qofka dhiibaya rahanka ma ogolaanayo fulinta rahannada ama waajibaad kale oo dammiinsan lidna ku ah markabka laga bilaabo taariikhda dhiibista ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkanilaa uu qofka looga rahamay uu waqtii haboon u heystay fulinta shuruudaha dhameystirkha rahankiisa sida keenista arjiga iyo faafinta; hase yeeshe waajibaadka lagu sheegay faqraddan kuma jirto mushahaarooyinka shaqaalaha markabka ama dacwooyinka la xiriira khasaaraha guud oo ka dhashay lacagta kaalmaynta ama samata bixinta.
3. Qofka dhiibay rahanka markabka oo lagu helo xad gudub Qodobbada qeybta isagoo sameeyey falal khiyaamo waxaa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badnayan Sh.So.25,000/= ama xarig aan ka badneyn labo sano (2) ama labadaba.

Qodobka 188aad: Ka qaadida rahanka iyo iibka

1. Qofka iibsaday markabka doonayana inuu isaga ilaaliyo xarig iyo fulin rahan, wuxuu u gudbin karaa dhamaan deyn bixiyeyaasha ama dadka gudbiyey rahanka, shahaadada xuquuqda isagoo caddeynaya ujeeddadiisa ku saabsan bixinta deynta rahanka ha ahaado mid bislaaday ama in kale, ilaa xadka qiimaha iibka ee uu bixiyey. Ogeysiiskaas si uu u noqdo mid tixgelin leh, waa in la dhiibaa tobant iyo shan (15) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la diiwaangeliyey iibka. Caddeynta ujeeddadaas waxaa lagu xadeyn karaa bixinta lacagta hartay ee lagu lahaa rahanka sidii deynka lid ku ah markabka la casriyeen lahaa. Oggolaanshaha ogeysiiska iyo bixinta dhabta ah, waxay dabooleysaa deynta iyo sii deynta rahanka.Kadib markii la bixiyey ama la sii daayey, waa in sidaas lagu qoraa diiwaanka markabka iyo waraaqaha rahanka isagoo ku dhigayaa qofka loogu dhiibay rahanka.
2. Qofka loo dhiibay rahanka markabka oo lagu gefay wuxuu arji u qoran karaa Maxkammadda awooda u leh ee ka tirsan Jamhuuriyadda Soomaaliya, isagoo ka codsanaya iney bixiso amarka iibka xaraashka ee markabka ayadoo tilmaameysa xaqa qofka loo dhiibay rahanka ee lacagta iibka ilaa xadka waajibaadka ku saabsan rahanka marka lagu daro khaarashka garsoorka iyo iibka, Ogeysiiska falkaas iyo dhegeysiga dacwadda waxaa la siinayaa qofka dhiibaya rahanka.
3. Bixinta dhamaan deynta ku saabsan rahanka waxay keeneysa ka qaadidda rahanka, waana in lagu qoraa diiwaanka markabaka.

BUUGGA V - QODOBKA HABKA

QEYBTA I - BAARITAANKA IYO DACWOYINKA SHILALKA BADDA

Qodobka 189aad: Baaritaan kooban

Hay'adda badda ama Qunsuliyadda ee lagu tilmaamay Qodobka 30aad iyo dadka lagu tilmaamay Qodobka 57aad ee sharcigan, ka dib gudbinta kaalmada, waxay ku sameynayaan baaritaan sababaha iyo duruufaha keentay shilka ama dhacdada waxayna qaadayaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee loogu ilaaliyo caddeynta sababahaas.

Warbixin rasmi ah ayey sameynseysaa hay'adda, haddiise la tilmaamo gef ama hawl sharci-darra ah waa in si degdeg ah warbixintaas loo gudbiyaa Waaxda Badda oo isla markaas ogeysiineysa hay'adda Garsoorka ee ugu sokeysa.

Qodobka 190aad: Tallaabooyinka kale - dacwooyin maxkamdeed

Ka hor intaan la bilaabin tallaabooyinka garsoorka ee lagu xallinaayo dacwooyinka ka dhasha shil-baddeed dhaawac ama geeri ka dhacda markab dushiisa, dhinacu waa inuu marka hore isku dayaa inuu dhibaatada ku dhameeyo heshiis ay raali ka noqdaan dhammaan dhinacyada arrintu khuseyso, isagoo ka codsanaya Waaxda Badda in ay soo dhexgasho dhexdhedaadiyena ka noqoto. Haddii lagu guuleysan waayo heshiis dhinaca dacwoonaya wuxuu isku dayaya tallaabooyin maamuleed ee uu qaadi karo ka hor inta uusan maxkamad ku taal Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaliya, ka furan dacwadda. Maxkamaddu, ka hor inta aysan oggolaanin furista dacwadda, waxay fiirineysaa dhammaan baaritaanada rasmiga iyo waxyaabaha caddeynaya inuu dacwooduhu ku dadaalay qaadista tallaabooyinka kale hase yeeshi waxay siineysaa caddeyn lid ku ah ama taageeraya warbixinnda baaritaanadaas.

QEYBTA II - DACWOYINKA SHAQADA

Qodobka 191aad: Tallaabooyinka maamulka

1. Dacwooyinka shaqada waxaa ku jira dacwooyin ka dhasha ama saameeya waxyaabaha soo soca:-

b) Fulinta shaqada ee badmaaxiinta.

t) Xiriirka fulinta shaqada dekedda dhexdeeda, oo ay ku jiraan dacwooyinka la xiriira mushaharooyinka

j) Mushaharka Hawlgeliyayaasha maraakiibta yar yarka iyo dadka ku shaqada leh raridda iyo dejinta badeecoooyinka iyo dhaqdhaqaqa rakaabka dekedda gudaheeda.

2. Ka hor inta aan Maxkamad Soomaaliyeed la hor keenin dacwadda, dacwoodaha waa inuu isku dayaa dhammaan tallaabooyinka maamulka ee u furan isagoo marka hore dacwadda u gudbinaya Xafiiska shaqada ee qaabilsan.

QAYBTA III - XAYIRAADDA MARAAKIIBTA

Qodobka 192aad: Ujeedada iyo dabbaqidda nidaamka

1. Markab lagu tuhmay ku xad gudubka shuruucda ciqaabta ee Jamhuuriyadda ama lagu tuhmay xad gudubka shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaasha ku saabsan xiriirka qaybaha badda ee Jamhuuriyadda, ama kuwa lagu tuhmo ku xad gudubka xuquuqda biyaha gudaha, badda dalka, qaybta xigta, qaybta gaarka ah ee dhaqaalaha ama qaybta

badda hoosteeda oo ay leedahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaa lagu soo rogayaa tallaabooyinka xayiraad oo deg deg ah, kuwaasoo uu qaadi karo muwaadinka awoodda u leh ama ha'yad ka tirsan Jmahuuriyadda. Xirida waxaa lagu dhameystirayaa arji loo qorto Maxmakamad awood u leh oo ka tirsan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ayadoo arjigaas lagu sameynayo magaca Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda. Markii loo keeno arjiga xiridda, maxkamaddu waxay bixinaysaa si deg-deg-ah amarka xiridda markii loo keeno caddeyn ku filan oo tilmaamaysa in loo baahan yahay baaritaan kale. Arjigaas waa in la siiyaa tixgelin gaar ahaaneed oo degdeg ah xataa haddii la keensado maalin ay Maxkamaduhu ku jiraan fasax ama ay xiran yihiin ayadoo lagu jiro fasax garsoor, waxaana amarkaas lagu soo saarayaasaxiixa Garsoore, ayadoo la tilmaamayo magaca iyo jinsayadda markabka, dekeda uu markabkaasi joogo iyo shuruudaha kale ay markaas ku xирto hay'adda soo saartay amarkaas.

Dhegeysiga dacwadda ee ku saabsan duluucda oo uu joogi karo Wakiilka markabka la dacweenayo, waxaa la muddeynayaa waqtiga ugu horreeya kaddib markii la ogeysiyo amarka xiridda, markabkana laguna soo rago xayiraadda.

Ogeysiiska xiridda markabka wata Calanka Shisheeye, duruufaha la soo sheegay waxaa loo gudbinayaa Dalka calanka ayadoo la sii-marinayo dariiqa dibloomaasiyadda.

2. Xayiraadda markabka wata Calanka Soomaaliyeed, ama calanka Shisheeye oo culeyskiisa, kayar yahay tobant (10) tan waxaa lagu dhaqayaa habka sharciga.

3. Xayiraadda markabka wata Calanka Soomaaliyeed am Calanka Shisheeye, oo aan lagu sheegin faqraddan 1aad ee Qdobka, waxaa loogu dhammeystirayaa dadka keensaday dacwooyinka badda sida lagu xusay qaybtan.

Qdobka 193aad: Dacwooyin badeed- caddeymo

Dacwooyinka badda oo fulintooda uu ku jiri karo amarka xayiraadda markabaka waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda:-

b) Mushaharooyinka Kabtanka, Saraakiisha iyo Shaqaalaha.

t) Dhibaato uu geysto markabka markii uu galo shil ama si kale.

j) Khasaaro naf ama dhaawac shakhsiyeed uu geysto markabku ama ay dhacdo inta la fulinayo hawlahaa markabka.

x) Kaalmada iyo Samatabixinta.

kh) Heshiis ku saabsan isticmaalka ama ijraarka markabka ha lagu kireysto safar ahaan ama si kale.

d) Heshiisku saabsan qaadista badeecoooyinka ee badda ayadoo markabka la kireystay ama si kaleba.

r) Khasaaraaha Guud.

s) Jiidista iyo hagidda.

sh) Kharashka badeecoooyinka ama alaabta marka loo gudbiyo markabka ee loogu baahday socod siinta hawshiisa.

dh) Dhismaha iyo hagaajinta markabka, qalabkiisa ama ajuurooyinka ku xirnaanshaha dekeda iyo ajuurooyinka kale ee dekeda.

c) Kharashka uu galo Kabtanka, Diraha, Kireystaha ama Wakiilka oo ay matalayaan markabka ama Markableyda.

g) Khilaaf ka dhexeeyaa Mulkileyda wadaaga lahaanshaha markabka kuna saabsan xuquuqda lahaanshaha, haysashada ama dakhliga markabka.

f) Khilaafadka aan ahayn kuwa ka dhex dhasha Markableyda, kuna saabsan lahaanshaha markabka oo ay ku jiraan dacwooyinka ku saabsan rahanaada.

q) Dacwooyinka madaniga ee lid ku ah markabka ama Markableyga iyo,

k) Dhammaan dacwooyinka ku saleysan falalka ee uu Mulkileyga ama hawlgeliyuhu awood u lahaanayo inuu koobo mas'uuliyadda.

Qodobka 194aad: Maraakiibta la xiri karo

1. Marka laga reebo inta ku xusan faqradda 2aad ee Qodobkan, dacwooduhu wuxuu dooran karaa inuu codsado xayiraadda markab gaar ah oo galay shil ama dhacdo ay dacwaddu ka dhalatay ama markab kale ee uu leeyahay isla qofkii ama qofkale, isla meeshii uu ka dhacay shilka ama dhacdada ay ku saleysan tahaya dacwaddu. Hase yeeshiee dacwooyinka ku saleysan faqrada ha hoosaadyadan (g), (f) iyo (q) ee Qodobka 193aad xayiraaddu waxaa lagu sameyn karaa keliya markabka galay shilka ama dhacdada ay dacwaddu ku saleysan tahay.

2. Haddii dacwaddu ay ku saleysan tahay shilka ama dhacdada ku saabsan markab ku shaqeysanayo kiro ama Hawlgeliyaha aan ahayn markableyga hase yeeshiee haysta caddeynta hawlgeliyenimo dacwooduhu wuxuu warsan kara xayiraadda markabka ku shaqada leh ama markab kale ee uu leeyahay kireystaha ama hawlgeliyaha laakiinse ma codsan karo xayiraad markab kale ee uu leeyahay Mulkileyga markabka la kireystay oo galay shilka ama dhacdada.

Qodobka 195aad: Xayiraad amar maxkamadeed dacwad

Wixii ka baxsan inta ku qoran faqradda 1aad ee Qodobka 192aad ee Qaybta, laguna oggolaaday awoodda Hoggaamiyaha Dekedda, Hay'adda Dekedda, iyo Saraakiisha Caafimaadka oo xayiri karta dhoofidda maraakiibta la soo dacweeyey, xiridda markabka waxaa lagu fulin kara ayadoo la raacayo amarka Maxkammadda awood u leh oo ka tirsan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 196aad: Sii deyntra markabka la xiray

1. Dacwooyinka ku saabsan xiridda markabka ayadoo la raacayo faqradda 1aad ee Qodobka 192aad ee sharcigan, markabka la xiray, waxaa lagu siideyn karaa amar Maxkamadeed oo ku siideysay xuriyad ku meel gaar ah ama dammanad u dhiganta ugu yaraan qiimaha ganaaxa ugu sarreeya ee lagu qaadi karo Qodobka 9aad ee sharcigan ama kaddib la qaaday dacwad oo lagu waayey markabka dacwaddii ama markabka ama qofka arrintu saameysey ee lagu helay dembiga kadib laga siidaayo xarigga ayadoo la bixiyey ganaaxyada oo dhan oo ay maxkamaddu ku xukuntay.

2. Xaaladaha ku saabsan haddii markabkii lagu xiray dacwooyinka ka dhasha tilmaamaha ku xusan faqradda-hoosaadyaha (l) iyo (M) ee Qodobka 193aad ee qaybtan, hawlgalka markabka waxaa loogu oggolaanayaa inuu socdo isagoo dacwooduhu keensanayo dammaanad ku filan oo lagu ilaalinayo danaha dacweysanaha ama si kaleba loo oggolaado in hawlahay ay socdaan si loogu ilaaliyo danaha dhammaan Markableyga wada lahaanshaha ama kuwa diiwaangashan.

3. Haddii dhinacyadu ay ku heshiin waayaan lacagta ama damaanadda la dhiibayo, Maxkammadda ayaa g'aan ka gaaraysa kaddib markii dhinacyada fursad loogu siiyey keenista doodaha.

4. Dhiibista dammaanadda ama codsiga siideyntra markab xiran looma qaadanayo oggolaanshaha mas'uuliyadda iyo ka tanaasulid faa'idada xadeyntra ma'uuliyadda ee markableyga.

Qodobka 197aad: Dhiibista dammaanadda

Haddii aysan jirin duruufo gaar ahaaneed oo markaas la siinayo ogeysiis kale sida degdeg ah, amarka Maxkammadda ee xiridda markabka waxaa la socda warbixinta ku

saabsan saacadda, taariikhda iyo meesha sida ku xusan habka madaniga. Amarka waxaa lagu codsan karaa keenista dammaanadda dheeraadka ee dacwoodaha, hase yeeshiee dammaanadda waa mid khasab ah haddii dacwadaha markaas uusan hayso rukhsadda joogista dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 198aad: Dacwad ku saabsan duluucda

Amarka Maxkammadda ee xiridda waxaa lagu goynayaa saacadda, taariikhda iyo meesha lagu qabanayo dacwadda garsoorka oo ku saleysan duluucda dacwadda. Ogeysiiska waxaa lagu tilmaamayaa in dhegaysiga dacwadda ay dhinacyada fursad u helayaan gudbinta doodahooda.

Waxaa kaloo ogeysiisku dhigayaa in haddii dhinacu uu ku gefo imaanshaha, ha ahaado mid shakhsiyeed ama keenista doodaha qoraalka, waxaa lagu xukumayaa isagoo dhinacu maqan yahay. Dacwadda ku dhisan duluucda waa la sii wadayaa si looga baajiyo daahidda ku dhacda markabka la dacweeyey haddii dacwaduhu uusan keenin araajida lagama maarmaanka ah sida uu dhigayo habka madaniga, muddo soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda xiridda markabka, waxaana la siideynayaa markabka ayadoo dacwadda la tirtirayo.

Qodobka 199aad: Raadka ka yimaada xaringga – kormeerka garsoorka

1. Guud ahaan xiridda markabka waxaa markabka ka reebaysaa ka bixidda dekedda ugu horeysa ee uu soo galay, kaddib xiridda ayadoo la tixgelinayo awoodda Hay'adda Badda ama Garsoorka Jamhuuriyadda si xayiraad loogu soo rogi lahaa dhaqdhaqaqa markabka iyo dadka fuushan markabka ee loogu baahdo si loo ilaaliyo caddeynta iyo xasiloonida guud ama lagu xaqiijinayo xaaladda la joogo ilaa xuquuqda iyo ma'uuliyadaha la isugu haysto go'aan garsoor laga gaaro. Hase yeeshie mar kasta waxaa lagu soo rogayaa xayiraadda lagama maarmaanka u ah markabka iyo dadka fuushan markabka.

2. Maxkammadda awoodda u leh oo dhageysatay dacwadda ku saleysan duluucda waxay kormeeraysa ilaa go'aanka kama dambeysta ah iyo fulinta dacwooyinka oo dhan. Fulinta Garsoorka waxaa ku jira awoodda maxkamadaha ee ku saabsan dhammaan amarada iyo ogeysiiska fal kasta oo dambe oo la qaadayo loona gudbinayo dhammaan dhinacyada khuseysa dacwadda.

3. Maxkammaddu waxay kaloo ogeysiis ka siinaysa amaradeeda Guddiga Qaranka qaabilسان ama hay'adaha kale ee badda sidii looga reebi lahaa maraakiibta la xiray, bixitaankooda.

Qodobka 200aad: Raadka ka yimaada iibka ama la wareegid

Haddii fal garsoor oo lagu qaaday Qaybtan kaga dhasho inay maxkamad amar ku bixiso gadid ama ku wareejinta markabka Jamhuuriyadda marakab, wareejintaas waa la diiwaangelinayaa ayadoo ogeysiis rasmi ah la dhiibaayo sida waafaqsan Qodobka 73aad ee sharcigan.

BUUGGA VI - KA HORTEGIDDA WASAKHEYNTA BADDA EE MARAAKIIBTA

QAYBTA I - BARNAAMIJKA IYO XEER NIDAAMIYAH

Qodobka 201aad: Maamulka barnaamijka

1. Wasiirka kalluumeysiga & Gaadiidka Badda, wuxuu awood u leeyahay inuu dejijo, fuliyo iyo hirgeliyo barnaamij loogu tala galay ka hortegidda wasakheynta badda oo

kaga yimaada maraakiibta. Barnaamijka waxaa ku jirayaa awoodda dhammaan Qaybaha Badda ay awood ku leedahay Jamhuuriyadda Dimuqradiya Soomaaliya oo ay ka mid yihin dhulka xeebaha, biyaha gudaha, badda dalka, qaybta ku xigta, qaybta gaarka ah ee dhaqaalaha iyo qaybta badda hoosteeda waxaan kaloo ku jiraysa awoodda ku dabbaqidda tallaabooyinkaas xataa inta ka baxsan xadka awoodda haddii hawlaha ku saabsan ka bixidda xadka ay khatar ku saabsan wasakheynta badda u keenayaan biyaha Soomaaliyeed.

2. Ayadoo la sameynayo baraamijka ka hortegidda wasakheynta badda, Wasiirka Kalluumeysiga & Gaadiidka Badda wuxuu dib u fiirin ku sameynayaa, go'aanna ka gaarayaa talada meelmarinta Protocolka (MAARPOL) loona yaqaano "PROTOCOL 1978" ee ku saabsan xeerka Caalamiga ee ka hortegidda wasakheynta ka timaada maraakiibta ee 1973 laguna dejiyey LONDON 2da NOVERBER , 1973.

3. Mar haddii uu hirgalu baraamijka, dadka si kas ah ugu xadgudba Xeernidaamiyaha loo soo saaray ujeeddadaas, xadgudub kasta waxay ku muteysanayaan ganaax aan ka badnayn Shs.So. 1.000.000 ama xarig aan ka badnayn shan (5) sano ama labadaba. Maalin kasta oo uu xadgudubku sii socdo, waxaa loo qaadanayaa inuu yahay xadgudub cusub. Haddii uusan jirin xeernidaamiye ku saabsan ujeeddadaas, ciqaabta kor ku qoran waxaa lagu dabbaqayaaa maraakiibta ha ahaadeen kuwa wata Calanka Soomaaliyeed ama Calan Shisheeye, oo lagu helo dembiga daadinta wasakhda meel kasta oo ka mid ah soohdinta biyaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

4. Qofka lagu helo dembiga wasakheynta badda ee ku saabsan Qaybtan, looma oggola inuu koobo mas'uuliyaddiisa la xiriirta khasaaraha ka dhasha xadgudubkaas.

QODOBO GUUD

Qodobka 202aad: Ciqaab guud

Xadgudubyada aan lagu tilmaamin sharcigan ee lagu helo qof kasta, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka yarayn 2,000 kana badneyn Sh.So. 2,000,000/=.

Qodobka 203aad: Xeer nidaamiyeyaasha

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya isagoo dhegeystay talada Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu soo saarayaa xeer nidaamiyayaasha lagu xusay Sharcigan iyo kuwii kale ee loo baahdo oo lagu hirgelinayo sharcigan.

Qodobka 204aad: Burin

Sharciga Badda ee Lr.1 ee 21.2.1959 iyo sharci kasta ama Xeer Nidaamiye kasta oo ka horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la buriyey.

Qodobka 205aad: Dhaqan gal

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa Lixdan maalmood laga billaabo taariikhda sharcigan lagu faafijo Faafinta Rasmiga ee Dowladda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.